



JAMHURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA


**XEER-HOOSAADKA GOLAHA SHACABKA
BAARLAMAANKA 11aad EE JFS**

Diseember 31, 2022

**ANSIXINTA XEER HOOSAADKA GOLAHA
SHACABKA BAARLAMAANKA 11AAD**

Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS			
Xubnaha Codeeyey: 143	Oggol: (139)	Diiidmo (3)	Ka aamustay (1)
			
Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"			Taariikh: Disembar 31, 2022

Guddoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Shacabka BJFS	
	
Xil. Sacdiya Yaasin Xaaji Samatar	Taariikh: Disembar 31, 2022

Guddoomiye Ku-xigeenka 2aad ee Golaha Shacabka BJFS	
	
Xil. Cabdullaahi Cumar Abshir "Abshirow"	Taariikh: Disembar 31, 2022

EREYGA GUDDOOMIYAH GOLAHA

Mudanayaal iyo Marwooyin;

Xeer Hosaadka Golaha Shacabka ee BJFS, waa xeer Dastuuri ah oo ku dhisan, Qodobka 68aad Faqradda 1aad ee Dastuurka KMG, sidaa daraadeed waa waajib saaran Golaha Shacabka inay sameeystaan, kuna dhaqmaan, si habsami u socodka howlaha Golaha loo xaqiijiyo. Golaha Shacabku waa hay'adda bulshaduna u wakiilatay inay ku matelaan dejinta shuruucda iyo xeerarka dalku ku shaqeeynayo, ilaalinta qaranimada, ilaalinta nidaamka dowliga ah iyo kor-joogteynta fulitaanka iyo dhaqangelinta howlaha iyo waajibaadka hay'adaha fulinta. Haddaba; si looga mira dhalinta waajibaadka iyo howlaha Golaha, waa waajib in Goluhu xaqiijiyo midnimada iyo habsami u shaqeeynta Golaha. Xeer Hoosaadka goluhu waa:

- 1) Hagaha iyo habsami u socodka Golaha, iyo
- 2) Ilaliyaha habdhaqanka iyo anshaxa xubnaha.

Mudanayaal iyo Marwooyin;

Sida ku cad Qodobbada 14aad, 15aad 16aad iyo 19aad ee Xeer Hoosaadka, Guddoomiyaha waxaa ka saaran xil gaar ah ku dhaqanka Xeer Hoosaadka, ilaalinta habsami u socodka iyo gudashada waajibaadka Golaha saaran, haddaba; waxaan xasuusinayaa dhammaan xubnaha Golaha arrimaha hoos ku xusan:

- 1) Muhimadda ay leedahay akhrinta, fahmizza iyo dhaqangelinta Xeer Hoosaadka.

- 2) Ilaalinta habsami u socodka howlaha Golaha iyadoo lagu ilaalinayo xeyndaabka sharci ee uu inoo farayo Xeer hoosaadkaan oo ah waxa aynu heshiis ku nahay.

Waxaan ilaahay ka rajeynayaa in Goluhu noqdo kii la mahadiyo kuna guulesyta gudashada waajibaadkiisa iyadoo loo marayo dariiqooyinka sharcigu inoo fasaxayo. Waxaan u mahadnaqayaa dhammaan xubnaha Golaha, ka qeyb qaadashada helitaanka Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka Baarlamaanka 11aad iyo u taagnaanshaha gudashada waajibaadka dastuuriga ah ee loo igmaday. Si gaar ah waxaan ugu mahad naqayaa Guddiga Xeer Hoosaadka Anshaxa, Xasaanadda iyo Daryeelka, oo waqt badan geliyey ka mira dhalinta dib-u-eegista Xeer Hoosaadkaan.

Mahadsanidiin:

Mudane Sh. Aadan Maxamed Nuur “Madoobe”
Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS.

EREY BIXIN:

Haddii aan Xeer-hoosaadkaani si kale u qeexin ereyada soo socda waxaa loola jeedaa:

- 1) **Dhismaha Golaha:** Fadhiga goluhu ku shiro.
- 2) **Fadhiga Golaha:** Kulanka guud ee Golaha Shacabka.
- 3) **Golaha/Goluhu:** Golaha Shacabka, Baarlamaanka JFS.
- 4) **Guddoon/Guddoonka:** Guddoomiyaha & Labadiisa Ku-xigeen.
- 5) **Guddoomiye/Guddoomiyaha:** Macnayaasha kala ah:
 - a. Guddoomiyaha markasta oo laga hadlayo.
 - b. Marka Goluhu shaqeynayo cidda Guddoominaysa.
 - c. Guddoomiye gudi marka laga hadlayo gudiyada.
- 6) **Heshiis Caalami ah:** Heshiisyada dhex mara in ka badan laba daraf, caadiyan waxaa laga hadlayaa heshiisyada ay galaan ururro Goboleedyada ama ururro Caalami ah oo Soomaaliya xubinta ka tahay sida “Qaramada Midoobay, Midowga Afrika, IGAD, Jaamacadda Carabta, Ururka Midowga Muslimiinta (OIC) IWM”.
- 7) **Kalfadhi:** Wadar kulameedyo Goluhu yeesho sanadkiiba laba jeer.

- 8) **Kulanka Golaha:** Kulanka guud ee Goluhu yeesho.
- 9) **Labada Aqal/Labada Gole ee Baarlamaanka:** Golaha Shacabka & Aqalka Gobolada ama Aqalka Sare, ee Baarlamaanka JFS.
- 10) **Maalin Shaqo:** Maalmaha ay dowladda Soomaaliyeed u calaamadeysay in la shaqeeyo oo Golaha Shacabkana u ah maalmo shaqo.
- 11) **Saacad Shaqo:** Saacadaha shaqada goluhu go'aansaday inuu shaqeeyo.
- 12) **Xafiiska Guddoonka:** Guddoonka & Habdhowrayaasha Golaha.
- 13) **Xoghayaha Golaha:** Xoghayaha Guud ee Golaha.
- 14) **Xubin/ Xubnaha:** Xubnaha Golaha Shacabka.
- 15) **“BFS”:** Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed.
- 16) **“BJFS”:** Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.
- 17) **“JFS”:** Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- 18) **“KMG”:** Ku-meel-gaar

TUSMO

CUTUBKA 1AAD:	1
GOLAHA SHACABKA	1
QODOBKA 1AAD: GOLAHA SHACABKA, BJFS	1
QODOBKA 2AAD: AWOODAHA GOLAHA SHACABKA, BJFS.....	2
QODOBKA 3AAD: DHAARTA XILDHIBAANNADA	4
QODOBKA 4AAD: AMNIGA GOLAHA SHACABKA.....	4
QODOBKA 5AAD: MAAMULKA GOLAHA SHACABKA.....	6
QODOBKA 6AAD: XUQUUQDA XUBNAHA GOLAHA	8
QODOBKA 7AAD: XILKA XUBNAHA GOLAHA SHACABKA	10
QODOBKA 8AAD: XIL-WAAYIDDA XUBINNIMADA GOLAHA SHACABKA	11
QODOBKA 9AAD: XASAANADDA XUBNAHA GOLAHA SHACABKA	12
QODOBKA 10AAD: LABBISKA IYO HEYBADDHA XILDHIBAANKA.....	13
CUTUBKA 2AAD:	14
GUDDOONKA GOLAHA SHACABKA	14
QODOBKA 11AAD: XAFIISKA GUDDOONKA GOLAHA.....	14
QODOBKA 12AAD: GUDDOOMIYAH A KU-MEEL-GAARKA	14
AH EE GOLAHA	14
QODOBKA 13AAD: DOORASHADA GUDDOOMIYAH A YO LABADIISA KU-XIGEEN	15
QODOBKA 14AAD: XILKA GUDDOOMIYAH A GOLAHA SHACABKA.....	18
QODOBKA 15AAD: XILKA GUDDOOMIYE KU-XIGEENNADA GOLAHA SHACABKA	19
QODOBKA 16AAD: AWOODAHA GUDDOOMIYAH A XILLIGA FADHIGA.....	20
QODOBKA 17AAD: XIL-WAAYIDDA GUDDOOMIYAH A GOLAHA YO LABADIISA KU-XIGEEN.....	22
QODOBKA 18AAD: XILKA HAB-DHOWRAHA YO KU-XIGEENNADIISA	24
QODOBKA 19AAD: NIDAAMKA FADHIGA GOLAHA.....	24
QODOBKA 20AAD: XIL-WAREEJINTA GUDDOONKA & GUDDIYADA	26
CUTUBKA 3AAD:	29
KALFADHIYADA & FADHIYADA GOLAHA	29
QODOBKA 21AAD: KALFADHIYADA YO FADHIYADA GOLAHA SHACABKA	29
QODOBKA 22AAD: KALFADHIYADA AAN CAADIGA	30
AHEYN EE GOLAHA	30
QODOBKA 23AAD: XAADIRIDDA FADHIYADA GOLAHA	30

QODOBKA 24AAD: GUNTANKA (QUORUM).....	36
QODOBKA 25: AJENDAHA FADHIYADA GOLAHA.....	37
QODOBKA 26AAD: XUSHMADA ISTAAGA IYO FADHIGA GOLAHA	38
QODOBKA 27AAD: KALA HORREYNTA HAWLAHA GOLAHA.....	39
QODOBKA 28AAD: HABKA DOODDA IYO ANSHAXA EE XUBNAHA	40
QODOBKA 29AAD: SOO BANDHIGIDDA QORAALADA (LAYING OF PAPERS).....	43
QODOBKA 30AAD: DAAH-FURNAANTA FADHIYADA GOLAHA	43
QODOBKA 31AAD: NOOCYADA CODEYNNTA GOLAHA	45
QODOBKA 32AAD: KEYDINTA & XAFIDAADA (RECORDS) KALFADHIYADA GOLAHA	47
CUTUBKA 4AAD:	48
GUDDIYADA GOLAHA.....	48
QODOBKA 33AAD: XEERARKA GUUD EE GUDDIYADA	48
QODOBKA 34AAD: WAAJIBAADKA GUDIYADA GOLAHA SHACABKA	51
QODOBKA 35AAD: GUDDOONKA GUDDIYADA.....	54
QODOBKA 36AAD: GUDDIGAJOOGTADA EE GOLAHA	55
QODOBKA 37AAD: GUDDI HOOSAADYADA	56
QODOBKA 38AAD: QORSHEYAAASHA SHAQO IYO QOONDEYNTA	57
MIIASAANIYADDA GUDDIGA	57
QODOBKA 39AAD: SHAQAALAHAD GUDDIYADA	60
QODOBKA 40AAD: QORAALLADA GUDDIGA	60
QODOBKA 41AAD: KULAMADA GUDDIYADA	61
QODOBKA 42AAD: KULAMADA KHAASKA AH IYO KUWA GUUD.....	62
QODOBKA 43AAD: AJENDAHA KULAMADA GUDDIYADA.....	63
QODOBKA 44AAD: SOO XAADIRISTA KULAMADA GUDIYADA.....	64
QODOBKA 45AAD: HABKA KULAMADA GUDDIYADA	65
QODOBKA 46AAD: GUNTANKA GUDDIYADA	66
QODOBKA 47AAD: CODEYNNTA GUDDIYADA	67
QODOBKA 48AAD: DHAGEYSIGA DADWEYNAHA	68
QODOBKA 49AAD: WARBIXINTA SAFARADA DIBADDA Ee WUFUUDDA GOLAHA SHACABKA	69
QODOBKA 50AAD: GUDDIYADA GOLAHA SHACABKA	69
CUTUBKA 5AAD:	80
GOLAHA SHACABKA & XUKUUMADDA	80
QODOBKA 51AAD: KALSOONI-SIINTA XUKUUMADDA.....	80

QODOBKA 52AAD: DHAARTA RA'IISUL WASAARAH & WASIIRRADA	81
QODOBKA 53AAD: U YEERIDDA RA'IISUL WASAARAH IYO WASIIRRADA.....	81
QODOBKA 54AAD: CODKA KALSOONI KALA NOQOSHADA XUKUUMADDA	82
QODOBKA 55AAD: DIIDMADA KALSOONI KALA NOQOSHO	84
QODOBKA 56AAD: KOR-JOOGTEYNTA GUDDIYADA GOLAH	84
QODOBKA 57AAD: XIRIRKA GUDDIYADA IYO XUKUUMADDA	85
QODOBKA 58AAD: BARNAAMIJYADA SHAQO EE WASAARADAH & GUDDIYADA ...	85
QODOBKA 59AAD: XOG RAADINTA GUDDIGA	86
QODOBKA 60AAD: BAARITAANNADA UU SAMEEYO GUDDIGU.....	88
QODOBKA 61AAD: WARBIXINTA GUDDIGA EE ARRIMAH LA BAARAY	89
QODOBKA 62AAD: SU'AAL-WADAREEDKA (INTERPELLATION)	90
QODOBKA 63AAD: SU'AAL-OORAHEED OO XUKUUMADDA LOOGA.....	93
CODSANAYO JAWAAB ORAAH AH	93
QODOBKA 64AAD: SU'AASHA XUKUUMADDA LOOGA CODSANAYO JAWAAB QORAAL AH	95
QODOBKA 65AAD: HADAL-JEEDINTA WASIIRRADA.....	95
CUTUBKA 6AAD:	95
GOLAHA SHACABKA & MADAXWEYNNAHA	95
QODOBKA 66AAD: DOORASHADA MADAXWEYNNAHA	95
QODOBKA 67AAD: EEDHEYN IYO XIL KA QAADISTA MADAXWEYNNAHA JFS.....	97
QODOBKA 68AAD: DHAARINTA MADAXWEYNNAHA JFS.....	97
QODOBKA 69AAD: BANNAANAANTA XAFIISKA.....	98
MADAXWEYNNAHA JFS	98
QODOBKA 70AAD: MAAMUUSKA MADAXWEYNNAHA & GOLAHA SHACABKA	99
QODOBKA 71AAD: FADHIYADA WADAAGA LABADA AQAL EE UU MADAXWAYNUHU CODSADO	100
QODOBKA 72AAD: KU DHAWAAQIDDA XAALADDA DEG-DEG AH	100
QODOBKA 73AAD: KU DHAWAAQIDDA XAALAD DAGAAL	101
CUTUBKA 7AAD:	102
SOO-JEEDINADA (MOTIONS).....	102
QODOBKA 74AAD: NOOCYADA SOOJEEDINNADA.....	102
(TYPES OF MOTIONS)	102
QODOBKA 75AAD: QABASHADA SOO-JEEDINNADA	103
QODOBKA 76AAD: HABRAACA DOODDA SOO-JEEDINADA.....	105

QODOBKA 77AAD: CODSI WADAREED QORAAL AH (PETITION)	105
QODOBKA 78AAD: HADALJEEDIN	106
QODOBKA 79AAD: DHEXGAL TOOSINEED (POINT OF ORDER)	107
QODOBKA 80AAD: XAQA AY XUBINTA U LEEDAHAY	108
JAWaab CELIN.....	108
CUTUBKA 8AAD:	109
HINDISE SHARCIYEEDYADA	109
QODOBKA 81AAD: CURINTA HINDISE SHARCIYEEDKA	109
QODOBKA 82AAD: HOR-TABINTA SOO BANDHIGIDDA HINDISE SHARCIYEED	109
QODOBKA 83AAD: SOO BANDHIGGIDA IYO AKHRINTA HINDISE SHARCIYEEDKA..	110
QODOBKA 84AAD: AKHRINTA HINDISE SHARCI.....	110
QODOBKA 85AAD: U-GUDBINTA HINDISE SHARCIYEEDKA GUDDIGA U-XIL-SAARAAN	112
QODOBKA 86AAD: SOO-CELINTA WARBIXINTA HINDISE SHARCIYEEDKA EE HEERKA LABAAD IYO U-GUDBINTA GUDDIGA	112
QODOBKA 87AAD: WAX-KA-BEDELIDDA HINDISE SHARCIYEEDKA EE XILIGA WARBIXINTA GUDDIGA	113
QODOBKA 88AAD: HABKA DOODDA WAX-KA-BEDELIDDA HINDISE SHARCIYEED	114
QODOBKA 89AAD: SOO-JEEDINTA (MOTION) GABAGABADA HEERKA WARBIXINTA	115
QODOBKA 90AAD: HUBINTA & ANSIXINTA HIDISE-SHARCIYEEDKA.....	116
QODOBKA 91AAD: HINDISE SHARCIYEED SUGAYA SAXIIXA MADAXWEYNHA	118
QODOBKA 92AAD: HINDISE SHARCIYEEDKA LA DIIDAY	119
QODOBKA 93AAD: FAAFINTA & XAFIDAADDA SHARCIYADA	119
QODOBKA 94AAD: DHAQAN-GELIDDA SHARCIYADA	119
QODOBKA 95AAD: DURID SHARCI	120
QODOBKA 96AAD: DIB-U-EEGISTA & KA WARBIXINTA QORAALADA SHARCIYADA QABYADA AH	120
QODOBKA 97AAD: NIDAAMKA ISU GUDBINTA HINDISE-SHARCIYEEDYADA EE LABADA AQAL.....	122
QODOBKA 98AAD: HINDISE-SHARCIYEED LOO GUDBINAYO AQALKA SARE	123
QODOBKA 99AAD: HINDISE SHARCIYEED KA YIMID AQALKA SARE	123
CUTUBKA 9AAD:	124
HABRAACA MIISAANIYADDA	124

QODOBKA 100AAD: HAB-RAACA LOO ANSAXIYO MIISAANIYADDA FEDERAALKA	124
QODOBKA 101AAD: HAB-RAACA LAGU ANSIXINAYO KABID-MIISAANIYADEEDKA FEDERAALKA & WAX-KA-BEBBALKA MIISAANIYADDA FEDERAALKA	127
QODOBKA 102AAD: HABRAACA LOO ANSIXINAYO WARBIXINTA XISAAB XIR-SANADEEDKA KU SAABAN MIISAANIYADDA FEDERAALKA	128
QODOBKA 103AAD: MADAXBANNAANIDDA QOONDADA MIISAANIYADEED EE GOLAHASHACABKA	128
QODOBKA 104AAD: HABRAACA ANSIXINTA MIISAANIYAD SANADEEDKA GOLAHASHACABKA	131
CUTUBKA 10AAD:	131
QODOBO GUUD.	131
QODOBKA 105AAD: GUDDIYADDA MADAXBANNAAN	131
QODOBKA 106AAD: GUDDIYADA WADAJIRKA AH	133
QODOBKA 107AAD: DHISMAHA GUDDIGA WADAJIRKA AH EE	133
WAX-KA-BADDELKA DASTUURKA	133
QODOBKA 108AAD: CURINTAWAX-KA-BEDDALKA DASTUURKA	133
QODOBKA 109AAD: HOWLAHA GUDDIGA WADAJIRKA AH EE WAX-KA-BADDELKA DASTUURKA	133
QODOBKA 110AAD: ANSIXINTA HESHIISYADA CAALAMIGA AH	134
QODOBKA 111AAD: XEER-HOOSAADKA GOLAHASHACABKA	135
QODOBKA 112AAD: WAX-KA-BEDDEL	135
XEER-HOOSAADKA GOLAHASHACABKA	135
QODOBKA 113AAD: LAALIS	136
QODOBKA 114AAD: REEBBANAANTA HOOS U DHIGISTA IYO XADDIDAADDA AWOODDA	136

CUTUBKA 1AAD: GOLAHA SHACABKA

Qodobka 1aad: Golaha Shacabka, BJFS

- 1) Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS, waa wakiilka shacabka Soomaaliyeed, waana awoodda ugu sarreysa ee sharci-dejinta dalka.
- 2) Golaha Shacabka wuxuu ka kooban yahay 275-xubnood, sida ku xusan Qodobka 64aad Faqraddaha 2aad iyo 4aad ee Dastuurka.
- 3) Qof kasta oo noqday Madaxweyne Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sharci ahaan wuxuu noqonayaa xildhibaan inta uu nool yahay, haddii aan xil-ka-qaadis lagu sameynin ka hor inta uusan dhameysan xilligiisa sida ku xusan Qodobka 92aad ee Dastuurka, wuxuuna xildhibaanada ku noqonayaa dheeri si waafaqsan Qodobka 64aad Faqradda 4aad ee Dastuurka¹.
- 4) Afka rasmiga ah ee goluhu waa Af-soomaali (maay & maxaa tiri), afka carabiguna waa afka labaad, sida ku xusan Qodobka 5aad Faqradda 1aad ee Dastuurka².
- 5) Xarunta goluhu waa magaala madaxda dalka ee Muqdisho.

¹ Qodobka 1st (3) “Golaha Shacabka” wuxuu u qormaa “Qof kasta oo noqday Madaxweyne Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, qaanuu ahaan wuxuu noqonayaa Xildhibaan inta uu nool yahay, haddii aan xilkha looga qaadin ka hor intuusan dhameysan xilligiisa sida ku xusan Qodobka 92nd iyo Qodobka 59nd ee dastuurka, wuxuuna xildhibaanada ku noqonayaa dheeri” waxaa loo baddelay sida ku xusan kor, Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhliga 4th kulankiisa 20th ee 31/10/2018.

² Qodobka 1st (4) XH-GSH-B10 “Afaka rasmiga ah ee Goluhu waa Af-Soomaali (Maay & Maxaa Tiri), Afka Carabiguna waa afka labaad, sida ku xusan Qodobka 5aad (I) dastuurka”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhliga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 6) Golaha Shacabka iyo gudiyadiisa waxay xaq u leeyihiin in qaar ka mid ah fadhiyadooooda ku qabsan karaan meel ka baxsan xaruntiisa sida ku cad Faqradda 5aad ee Qodobkan, haddii ay duruuf kallifto ama ay sidaas go'aansadaan³.
- 7) Muddada xilheyn ta golahu waa afar (4) sano oo laga bilaabay o maalinta lagu dhawaaqo natijada doorashada si waafaqsan Qodobka 60aad Faqradda 1aad ee Dastuurka⁴.

Qodobka 2aad: Awoodaha Golaha Shacabka, BJFS

Sida ku cad dastuurka KMG, goluhu wuxuu leeyahay awoodaha soo socda⁵:

- 1) Ansixinta, wax-ka-baddelka, ama diidmada hindise shariyeedyada la horkeenay Golaha⁶.
- 2) Dejinta Hindise Shariyeedyada marka laga reebo kuwa la xiriira Miisaaniyad Sannadeedka.
- 3) Ansixinta miisaaniyad sannadeedka iyo xisaab xirkeeda.
- 4) Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka, Ku-xigeennadiisa iyo xil ka qaadistooda.

³ Qodobka 1st (6) XH-GSH-B10 “Golaha Shacabka iyo Gudiyadiisa waxay xaq u leeyihiin in qaar ka mid ah fadhiyadooooda ku qabsan karaan meel ka baxsan xaruntiisa, haddii ay duruuf kallifto, saasna ay go'aansadaan”. Goluhu wuxuu ansixiyey wax-ka-badelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disecember 31, 2022.

⁴ Qodobka 1st(7) “Golaha Shacabka” waxay u qornayd “Muddada Golaha waa 4 (afar sano) oo laga bilaabay o Maalinta la dhaariiyay Xildhibaanaada ugu horceya ee ka tirsan Golaha Shacabka (20.08.2012)”. Waxaa loo baddelay sida ku xusan kor, Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhiga 4th kulankiisa 20th ee 31/10/2018.

⁵ Qodobka 2nd “Awoodaha Golaha Shacabka” waa la lambariyey oo markii hore ahaa xuruuf (Alphabetical series). Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4th, kulanka 20th ee 31/10/2018

⁶ Qodobka 2aad (1) XH-GSH-B10 “Ansaxinta, wax ka bedelka ama diidis hindise shariyada la hor keenay”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disecember 31, 2022..

- 5) Doorashada Madaxweynaha Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
- 6) Xil ka qaadista Madaxweynaha JFS, sida ku xusan Qodobka 92aad. ee Dastuurka ku-meel-gaarka.
- 7) Kalsooni siinta Xukuumadda ama u codeynnta mooshin ku saaban u diidista ama kala noqoshada kalsoonida.
- 8) La xisaabtanka iyo u kuur-gelidda hay'adaha dowladda federaalka si loo hubiyo fulinta sharciyada.
- 9) Dhisidda guddiyo baara hay'addaha dowladda iyo xad gudubyada xildhibaannada ay geystaan ama iyaga loo geysto⁷.
- 10) U-yeeridda Ra'isul Wasaaraha, xubnaha Wasiirrada, iyo Guddoomiyayaasha Guddiyada Qaranka iyo xafiisyada Madaxa-bannaan.
- 11) U kuur-gelidda dhaqan-gelinta Dastuurka.
- 12) Wax-ka-baddelka Dastuurka, sida ku xusan Cutubka 15aad ee Dastuurka.
- 13) Si waafaqsan Qodobka 113aad ee Dastuurka, Goluhu wuxuu meel mariyaa xeerarka ku saabsan Guddiyada Madaxa-bannaan.
- 14) Ansixinta ama diidmada Guddiyada Madaxbannaan ee ay xubnaha Wasiirrada horkeenaan Golaha Shacabka⁸.

⁷ Qodobka 2^{aad} (9) XG-SH-B10 “Dhisidda Gudiyo baara Hay'addaha Dowladda iyo xad gudubyada Xildhibaannada ay geystaan”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhliga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 15) Dejinta iyo wax-ka-beddelka Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka.
- 16) Ansixinta heshiisyada caalamiga ah iyo heshiisyada ay xukuumaddu la gasho dowlado ama dhinacyo kale.
- 17) Oggolaashaha ama diididda xaaladda deg-degga ah (state of emmergency), ka dib marka ay soo jeediso xukuumaddu⁹.

Qodobka 3aad: Dhaarta Xildhibaannada

Xubin kasta oo ka mid ah xildhibaannada Golaha Shacabka, BJFS, ka hor intuusan/inteysan qaban xilka wuxuu marayaa ama waxay mareysaa dhaarta hoos ku qoran:

“Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahey inaan xilkeyga u guto si daacad ah oo ay ku jirto danta dalka, dadka iyo diinta, dhowrana Dastuuurka Qaranka iyo shuruucda kale ee Dalka u yaala”.

Qodobka 4aad: Amniga Golaha Shacabka

- 1) Waa waajibaadka Guddoomiyaha inuu hubiyo amniga Golaha Shacabka. Guddoomiyaha wuxuu amri karaa Habdhowraha inuu qaado tallaabooyinka loo baahan yahay ee lagu xallinayo xaalada iyadoo la ilaalinayo sharafta iyo xasaannada xildhibaanada¹⁰.

⁸ Qodobka 2nd (14) XH-GSH-B10 “Ansixinta gudiyada madaxbannaan ee ay xubnaha wasiirada horkeenaan Golaha Shacabka”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022...

⁹ Qodobka 2nd (17) oo horey u qornayd: “Ogolaanshaha xaaladda deg-degga ah (state of emmergency), ka dib markay soo jeediso xukuumaddu” waxaa loo baddelay sida kor ku xusan. Goluhuna wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3rd kulankiisii 18nd ee 22/10/2013.

¹⁰ Qodobka 4nd (1) XH-GSH-B10 “Waa waajibaadka Guddoomiyaha inuu hubiyo amniga Golaha Shacabka. Guddoomiyaha wuxuu amri karaa habdhowraha inuu qaado tallaabooyinka loo baahan yahay ee lagu xallinayo

- 2) Waxaa ka reebban in dhismaha lala soo galo hub marka laga reebo cidda Faqradda 5aad ee Qodobkaan loogu fasaxayo¹¹.
- a) Haddii xubin ka tirsan uu diido inuu hubka ku wareejyo ciidamada amniga, mid ka mid ah hab-dhawrayaasha aaya la ogeysiinaya.
- b) Haddii xubintaasi ay ku sii adkeysato in ay dhinac marto amarka hab-dhowraha, waxaa arrinta loo gudbinayaa Guddoomiyaha, si uu xubintaas tallaabo habboon uga qaado.
- 3) Ciidanka amniga ma soo geli karo xarunta hadduusan Guddoomiyaha amrin inay soo galaan¹².
- 4) Cid aan aheyn xildhibaannada iyo hawladeennada Golaha ma gali karaan xarunta haddii aysan fasax ka haysan Habdhawraha¹³.

xaalad iyadoo la istiemaalayo ciidanka amniga". Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

¹¹ Qodobka 4^{aad} (2) ee "Amniga Golaha Shacabka" waxay u qormayd "Waxaa ka reebban in dhismaha lala soo galo hub. Haddii xubin ka tirsan uu diido inuu hubka ku wareejyo ciidamada amniga, mid ka mid ah hab-dhawrayaasha aaya la ogeysiinaya. Haddii xubintaay ku sii adkeysato in ay dhinac marto amarka hab-dhowraha waxaa arrinta loo Gudbinayaa Guddoomiyaha si uu xubintaas tallaabo habboon uga qaado". Xarfaha (a&b) waxay kaa sameysmeen isla faqrada 2^{aad}. Waxaa loo baddelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

¹² Qodobka 4^{aad} (3) XH-GSH-B10 "Ciidanka amniga ma gali karo xarunta haduusan Guddoomiyaha ka codsan in ay soo fara-geliyaan". Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

¹³ Qodobka 4^{aad} (4) XH-GSH-B10 "Cid aan ka aheyn xubnaha Golaha iyo shaqaalaha maamul ma gali karaan xarunta haddii aysan fasax ka haysan hab-dhawraha". Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

- 5) Guddoomiyaha goluhu wuxuu u oggolaan karaa isagoo xadidaya tirada ilaalada dharka cad ee Madaxweynaha, Ra'iisul Wasaaraha, Guddoomiyaha Gole Baarlamaan ama marti kale oo haysta habmaamus sare sida¹⁴:
- a) Madaxweynayaal ama Ra'iisul Wasaarayaal caalamka oo booqasho ku yimid dalka.
 - b) Guddoomiyayaasha Baarlamaanada dalalka shisheeye ee martida u ah fadhiyada Golaha.

- 6) Ilaalada dharka cad ah ee lagu fasaxayo Faqradda 5aad ee Qodobkan, waxaa laga fadhiisinaya kulanka guud meel gaar ah oo loo asteeyey, waana inaysan isku hor-gudbin fadhiga xubnaha Golaha¹⁵.

Qodobka 5aad: Maamulka Golaha Shacabka

- 1) Howl-wadeenada Golaha Shacabka waxay ka mid yihiiin shaqaalahaa Rayidka ee Dowladda, iyagoo leh muhiimad gaar ah, waxaa la shaqaaleysiinaya iyadoo lagu saleynayo baahida loo qabo lana waafajinayo habraaca shaqaaleysiinta ee lagu qeexayo Xeerka Maamulka ee Goluhu ansixiyo¹⁶.

¹⁴ Qodobka 4^{aad} (5) ee “Amniiga Golaha Shacabka” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

Qodobka 4^{aad} (5) XH-GSH-B10 “Guddoomiyaha goluhu wuxuu u oggolaan karaan isagoo xadidaya tirada ilaalayaasha dharka cad ee madaxweynaha, ra'iisulwasaraaha, Guddoomiyaha gole baarlamaan ama marti kale oo haysta habmaamus sare sida” Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

¹⁵ Qodobka 4^{aad} (6) ee “Amniiga Golaha Shacabka” waa cusub tahay Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

¹⁶ Qodobka 5^{aad} (1) XH-GSH-B10 “Shaqaalahaa Golaha Shacabka waxay ka mid yihiiin shaqaalahaa dowlada, isla markaasna yihiiin xubin muhim ka ah shaqaalahaa rayidka ee dowladda. toos waxaa u shaqaleysta hadba sida baahidiisa, iyo shurudaha loogu tala galay sida uu cadeeyo guddoonka Golaha”. Goluhu wuxuu ansixiyey wax-kabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 2) Inta laga dhisayo Guddiga Adeegga Baarlamaanka, xilalka iyo isku dubbaridka howl-wadeennada Golaha, waxaa lagu hagayaa Xeer Maamuleed gooni ah oo Guddiga Xeer-hoosaadku soo jeedsho, Golahuna ansixiyo¹⁷.
- 3) Howl-wadeennadu waxay hoos imaanayaan Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka, kaasoo kormeeraya, qiimaynaya shaqaadooda, amarkiisana ay ku shaqeynayaan. Xoghayaha ayey ka mid tahay howshiisha arrimaha ku saabsan maqaamkooda iyo marxaladooda shaqo¹⁸.
- 4) Qiimaynta shaqada, dalaciinta, tilaabooinka anshaxa iyo kala wareejinta howl-wadeenada waa in ay waafaqsanaadaan Xeer Maamuleedka Golaha¹⁹.
- 5) Ilaa inta laga sameynayo Guddiga Adeegga Baarlamaanka, Xoghayaha Guud ee Golaha waxaa magacaabistiisa soo jeedinayaan Guddoomiyaha isagoo la tashaday Ku-xigeenadiisa, waxaana ansixinaya Guddiga Joogtada.
- 6) Xoghayaha Guud ayaa ah masuulka ugu sareeya ee u xilsaarhan maamulidda arrimaha Golaha, islamarkaasna u xilsaarhan arrimaha la xiriira heykalka maamul, farsamo iyo dhaqaale, isagoo ka amar qaadanaya Guddoomiyaha islamarkaasna waafajinaya Xeer Mamuleedka uu ansixiyay Golaha Shacabku.

¹⁷ Qodobka 5nd (2) XH-GSH-B10 “Xilalka iyo isku dubbaridka shaqaalaha Golaha, waxaa lagu hagaya xeer maamuleed gooni ah, sida uu u soo jeediyoo guddoonka oo uu ansixiyo golahu”. Goluhu wuxuu ansixiyey wax-kabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

¹⁸ Qodobka 5nd (3) XH-GSH-B10 “Shaqlalha waxaa ay hoos imaanayaan Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka, kaasoo kormeeraya, qiimaynaya shaqaadooda, amarkiisana ay ku shaqeynayaan. Xoghayaha ayey ka mid tahay howshiisha arimaha ku saabsan maqaamkooda iyo marxaladooda shaqo”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

¹⁹ Qodobka 5nd (4) XH-GSH-B10 “Qiimaynta shaqada, dalaciinta, tilaabooinka anshaxa iyo kala wareejinta shaqlalha waa in ay waafaqsanaadaan Xeer Maamuleedka Golaha”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

- 7) Xeer-maamuleedka ee Goluhu ansixiyo waxaa lagu sameyn karaa dib-u-eegis sanad kasta **Kalfadhiga labaad haddii²⁰:**
- a) Guddoomiyaha Goluhu soo jeedsho.
 - b) Ay codsadaan xubno aan ka yareyn tobant **Xildhibaan.** (10)
 - c) Guddiga Xeer-hoosaadku sidaas go'aansado.

Qodobka 6aad: Xuquuqda Xubnaha Golaha²¹

- 1) Xuquuqda gunno ee Guddoonka iyo Xildhibaannada waxay ka bilaabanaysaa maalinta loo dhaariyo xilka waxayna u kala baxdaa:
 - a) Gunno Xileed bille ah;
 - b) Gunno Fadhi;
 - c) Gunno deegaan;
 - d) Gunno caafimaad;
 - e) Gunno gaadiid; iyo
 - f) Sahay safar shaqo.
- 2) Faah-faahinta iyo qaddarka gunnooyinkaas waxaa habeynaya Xeer gaar ah oo uu Goluhu soo saari doono.
- 3) Wixii xaqquq ah ee ka maqnaada xildhibaanadda muddada ay xilka hayeen, waxaa waajib ku ah xukuumad kasta oo timaada in ay bixiso xaqquqda uu muteystay oo buuxda.

²⁰ Qodobka 5^{aad} (7) waa Faqro cusub. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

²¹ Qodobka 6^{aad}(4) ee “Xuquuqda Xubnaha Golaha” waxay u qornayd “Xildhibaan kasta oo dib loo soo dooran waayo wuxuu xaq u leeyahay laba bilood gunno sagootis ah sannadkiiba oo ku jaan go'an mudadii uu soo shaqeeyey waxaana lagu soo saarayaa sharci gaar ah’. Waa la tiray maadama xeerka Xuquuqda siyaasiinta looga hadlay xuquuqda xildhibaanada. Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

- 4) Xildhibaanka laga qaaday xasaanadda wuxuu haysanayaa guriga iyo gaadiidka dowladda, wuxuuna qaadanayaa gunnooyinkiisa oo dhan marka laga reebo gunno fadhi, hase yeeshee kama qeyb galayo fadhiyada mana yeelanayo cod, ilaa iyo inta maxkamadu arrintaas ka gaareyso xukun kama-dambays ah.
- 5) Haddii xildhibaanka la eedeeeyey lagu waayo dembigii wuxuu xaq u yeelanayaa in la siyo dhammaan xuquuqdii ka baaqatay.
- 6) Daaweynta xildhibaannada & xubnaha qoyska (xaaskiisa/odaygeeda iyo caruurtooda) waxaa damaanad qaadeysa dowladda.
- 7) Muddada haweenka xildhibaannada ah ay ku jiraan fasaxa dhalmada waxay xaq u leeyihii in la gaarsiyo qoraalka la xiriira howlaha Golaha, go'aanada uu gaaro, fadhiyada caadiga iyo kuwa aan caadiga ahayn bishii hal mar.
- 8) Wixii la xiriira fasaxa dhalmada iyo mudadiisa waxaa la waafajinayaa shuruucda dalka.
- 9) Xildhibaan kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo ciidan suga amnigiisa.
- 10) Gunnooyinka iyo daryeelka kale ee ay xaqa u leeyihii xildhibannada Golaha Shacabka waxaa laga bixinaya khasnadda dhexe ee Xukuumadda Federaalka²².

²² Qodobka 6^{ad} (10) waa ku cusub tahay “xuquuqda xubnaha Golaha”. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

- a) Daryeelka caafimaad ee xubnaha Golahu leeyihiin waa xuquuq asaasi ah oo xildhibaannadu leeyihiin, xiritaanka kalfadhi walbana waa in loosoo gudbiyaa xisaab xirkeeda Golaha²³.
- 11) Xildhibaan kasta wuxuu xaq u leeyahay markasta oo kalfadhi xirmo inuu ka helo khasnadda dowladda dhaqaale uu ku gaaro deegaan doorashaddiisa, isla markaasna kaga qeyb qaato howlaha horumarineed ee bulshada (Constituency Development Fund), waxaana lagu qeexayaa Xeerka Miisaaniyadda Qaranka & Miisaaniyadda Golaha²⁴.
- 12) Gunnooyinka & sahay-safarka xildhibaanka waxay ku eg yihiin marka la dhaariyo xildhibaanka cusub ee badddelaya xildhibaanka bannneeyey xilka, marka laga reebo xuquuqaha ku xusan sharciga xuquuqda siyaasiinta dowladda²⁵.

Qodobka 7aad: Xilka Xubnaha Golaha Shacabka

- 1) Xubin kasta oo ka mid ah Golaha Shacabka marka ay xilkeeda gudaneyso waa in ay ku shaqaysaa sida ay danta qaranku ku jirto.

²³ Qodobka 6^{asd} faqrada 10(a) Waa xaraf cusub. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

²⁴ Qodobka 6^{asd} (11) waa ku cusub tahay “Xuquuqda xubnaha Golaha”. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{asd}, kulanka 20^{asd} ee 31/10/2018

²⁵ Qodobka 6^{asd} (12) waa ku cusub tahay “Xuquuqda xubnaha Golaha”. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{asd}, kulanka 20^{asd} ee 31/10/2018

Qodobka 6^{asd} (12) XH-GSH-B10 “Mushahaarka & gunnooyinka xildhibaanka waxay ku eg yihiin dhamaadka mudada xil-hayntiisa, marka laga reebo xuquuqaha ku xusan Sharciga xuquuqda siyaasiinta dowladda”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 2) Iyada oo oofinaysa waajibaadka ku cad faqradda (1) ee qodobkaan, xubin kasta oo ka mid ah Golaha Shacabka, xil gaar ah ayaa ka saaran matilaadda degaan-cod-bixiyeyaasha laga soo doortay, iyadoon loo eegin siyaasad iyo taageerid xisbiyo kale.
- 3) Xilliga fasaxa, xildhibaannada waxaa looga baahan yahay arrimaha soo socda:
 - a) Haddii xaaladda nabadjelyo ay saamaxdo, waa in muddo aan ka yareeyn Toban & shan (15)-cisho la soo joogaan degaaannada ay matalaan;
 - b) In ay qabtaan kulamo guud ay bulshada kula socodsiiyayaan arrimaha horyaalo si ay ugala tashtaan;
 - c) In ay kala hadlaan hormunarinta, midnimada qaranka, nabadda iyo dib-u-heshiisiinta;
 - d) In ay kala tashadaan arrimaha guud ee ay daneynayaan & baahida deegaanka;
 - e) In ay uga soo gudbiyaan Golaha warbixin qoraal ah waxii ay kala soo kulmeen booqashadooda hawleed.

Qodobka 8aad: Xil-Waayidda Xubinnimada Golaha Shacabka

Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka waxaa lagu lumin karaa:

- 1) Xubinta oo geeriyoota.
- 2) Xubinta oo ay la soo gudboonaato xaalad xil-gudasho la'aaneed oo joogto ah.
- 3) Xubinta oo istiqaalad u gudbisa aqalka ay xubinta ka tahay, lagana ogolaado.

- 4) Ka-maqnaansho labo kalfadhi oo caadi ah, iskuna xiga ayada oo aanay jirin sabab maangal ah.
- 5) Haddii ay xubantu aqbasho xil dawladeed aan wasiir ka ahayn.
- 6) Haddii la hakiyo xuquuqdiisa muwaaddinnimo, si waafaqsan sharciga.

Qodobka 9aad: Xasaanadda Xubnaha Golaha Shacabka²⁶

Xubnaha Golaha Shacabka, waxay leeyihiin xasaanad sida ku cad Qodobka 70aad ee dastuuurka.

- 1) Xildhibaanka Golaha Shacabka dhibaato kama soo gaari karto fikradda ama codka uu ka hor dhiibto Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah iyo guddiyadiisa.
- 2) Haddii aan laga haysan oggolaansho Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah, xildhibaanka laguma qaadi karo dacwad ciqaabeed, lama xiri karo, lamana baari karo qof ahaan, hoygiisa ama meeshii kale ee u gaar ah, haddaan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi sharci ahaan khasab ay tahay in laga soo saaro amar qabasho ah. Sidoo kale haddii aan laga helin oggolaansho Golaha, xildhibaanka lama qaban karo, xabsina laguma hayn karo, iyadoo la fulinaayo xukun maxkamadeed oo xataa kama dambays ah.

²⁶ Qodobka 9^{aad} "Xasaanadda Xubnaha Golaha Shacabka" waxaa la waafajiyey Dastuurka, marka laga reebo Faqrada 5^{aad} oo laga soo qaatay Xeer Hoosaadka B9^{aad}. Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhiiga 4^{aad} kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

- 3) Dacwad aan ahayn mid ciqaabeed xildhibaanka waa lagu furi karaa, iyadoo aan oggolaansho la weydiisan Golaha Shacabka.
- 4) Sharci gaar ah ayaa qeexaya Xasaanadda xilidhibaannada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka. Xeerka waxaa soo-jeedinaya Guddiga Xeer Hoosaadka, Anshaxa, Xasaanadda iyo Daryeelka.
- 5) Markii xildhibaan laga qaadayo xasaanadda waa in ay oggolaadaan saddex dalool labo tirada guud ee Xubnaha (2/3) iyadoo tirada laga reebayo kuraasta bannaan (post Vacanti) ee sababtey Geeri, tanaasulid ama si sharci ah u bananaada²⁷.

Qodobka 10aad: Labbiska iyo Heybadda Xildhibaanka

Waxaa ka reeban Xildhibaanka Golaha Shacabka, inuu ku yimaado muuqaal aan ku habooneyn heybaddiisa oo aan waafaqsaneyn Shareecada Islaamka.

²⁷ Qodobka 9^{aad} (5) ee “Xasaanadda Xubnaha Golaha Shacabka” waxay u qornayd “Markii Xildhibaan laga qaadayo Xasaanada waa in ay oggolaadaan saddex dalool labo tirada guud ee Xubnaha (50%+1), iyadoo tirada Golahalaga reebayo kuraasta bannaan (post Vacanti) ee sababtey Geeri, tanaasulid ama si sharci ah u banaan’. Faqradaan waxaa laga soo minguuriyey XB9aad. Goluuhu waxay isla ogolaadeen kalfadhiga 4^{aad} kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

CUTUBKA 2AAD: GUDDOONKA GOLAHADH SHACABKA

Qodobka 11aad: Xafiiska Guddoonka Golaha²⁸

- 1) Guddoonka iyo Xafiiska Golaha Shacabka wuxuu ka kooban yahay:
 - a) Guddoomiyaha Golaha Shacabka.
 - b) Guddoomiye Ku-xigeenka Koowaad.
 - c) Guddoomiye Ku-xigeenka Labaad.
 - d) Habdhowraha iyo Labadiisa Ku-xigeen.
- 2) Habdhowraha iyo Ku-xigeennadiisa waa in ay yihiin xubno ka tirsan Golaha, waxaana soo magacaabaya Guddoomiyaha isagoo la tashanaya Ku-xigeennadiisa, kadibna waxaa ansixinaaya oo ku meel marinaaya cod hal dheeri tirada xubnaha oo gacan taag ah, waxaana xilka ka qaadi kara Golaha, oo ku meel marinaaya cod hal dheeri ah, ka dib markii ay mooshin ka keenaan 25% ee xubnaha.

Qodobka 12aad: Guddoomiyaha Ku-Meel-Gaarka ah ee Golaha

Fadhiga ugu horreeya ee Golaha Shacabka, inta laga dooranaayo Guddoomiyaha iyo Labadiisa Ku-xigeen ee rasmiga ah, waxaa si ku-meel-gaar ah u sii guddoominaya xildhibaanka ugu da'da weyn xubnaha Golaha Shacabka oo aan musharax ahayn haddii uusan isagu ka cudur daaran²⁹.

²⁸ Qodobka 11^{aad} ee “Guddoonka & Xafiiska Golaha” ee XB9^{aad} waxaa laga tiray Faqro 3^{aad} oo u qorneyd “Labada Xoghye waa in ay ka mid noqdaan hawl-wadeemnada Golaha Shacabka” sababta loo tiray waa inaysan hadda dhismaha Golaha Shacabka ku jirin Xoghayayaal Xildhibaanno ah. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

²⁹ Qodobka 12^{aad} “Guddoomiyaha Ku-meel-Gaarka ah ee Golaha” wuxuu u qornaa “Fadhiga ugu horreeya ee Golaha Shacabka, inta laga dooranaayo Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo labadiisa ku-xigeen ee rasmiga ah, waxaa si

Qodobka 13aad: Doorashada Guddoomiyaha iyo Labadiisa Ku-xigeen³⁰

- 1) Si waafaqsan Qodobka 65^{aad} (1) ee dastuuurka, Golaha Shacabka fadhibiisa koowaad oo uu shir guddoominayo xildhibaanka ugu da'da weyn, waa inuu iska dhexto guddoomiye & labdiisa ku-xigeen.
- 2) Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenadiisa waxaa cod qarsoodi ah oo aqlabiayd ah ku dooranaya xubnaha Golaha Shacabka.
- 3) Marka ay bannaanaato jagada Guddoomiyaha, xilka waxaa sii wadaya ku-xigeennada, goluhuna shaqo kale ma qaban karo ilaa uu doorto guddoomiye, taasoo ku dhaceysyo toban & Shan (15)-cisho gudahood, haddii kalfadhiga furan yahay. Haddii kalfadhiga xiran yahay, fadhiga ugu horeeya ee kalfadhiga xiga ayaa lagu dooranaya.
- 4) Murashaxiinta doonaysa in loo doorto xilka Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeennada, waa in ay yahiin xubno ka tirsan Golaha Shacabka.
- 5) Murashax kasta waa in uu soo gudbiyaa qoraal muujinaaya rabitaankiisa, oo ay la socdaan labo sawir iyo taariikh nololeedkiisa/nololeedkeeda (C.V).
- 6) Murashax kasta wuxuu qoraalkiisa ku soo qeexayaajagada uu u tartamayo haddii ay tahay tan Guuddoomiyaha ama tan Ku-xigeennada (1 & 2).

ku-meel gaar ah u sii Gudooaya Xildhibaanka ugu da'da weyn xubnaha Golaha Shacabka". Waxaa loo baddelay sida kor ku xusan. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018

³⁰ Qodobka 13^{aad} "Doorashada Guddoomiyaha & Labadiisa ku xigeen" cinwaanka wuxuu ahaa "Qaabka loo dooranayo Guddoomiyaha iyo Labadiisa ku xigeen" waxaa loo baddelay sida ku xusan kor. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018

- 7) Xildhibaan kasta warqadda codeynta wuxuu ku ridayaan sanduuq marka hore faaruq ah, dushana ka jeexan, gudihiisana uu muuqdo³¹.
- 8) Codeyntu waxay noqon kartaa ilaa seddex (3) wareeg³².
- a) Wareega koowaad murashaxii hela codadka aqlabiyad tirada guud xubnha Golaha Shacabka aaya ku guuleysanaayo doorashada, sida ku xusan Qodobka 65^{aad}(4) ee Dastuuurka. Haddii la waayo murashax hela tiradaas waxaa loo gudbayaa wareega labaad.
 - b) Wareega labaad waxaa ka qeyb galaya afarta murashax ee hela tirada codadka ugu badan ee wareegga koowaad. Haddii ay jiraan murashaxiin helay cod is la eg oo barbar-dhac ah, waa kawada qayb galayaan wareega labaad, oo tirada tartamayaasha aaya kordhaysa. Murashaxii ku guulaysta codadka aqlabiyad tirada guud xubnaha Golaha Shacabka aaya ku guuleysanaayo doorashada, sida ku xusan Qodobka 65^{aad} (4) ee Dastuuurka. Haddii la waayo waxaa loo gudbayaa wareega seddexaad.

³¹ Qodobka 13^{aad} (7) ee “Doorashada Guddoomiyaha Golaha& Labadiisa Ku xigeen” waxay u qornayd “Xildhibaan kasta warqadda uu ku soo codeeyo wuxuu ku ridayaan sanduuq marka hore faaruq ah, dushana ka jeexan, Gudihiisana uu muuqdo”. waxaa loo baddelay sida ku xusan kor. Golohu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018.

³² Qodobka 13^{aad} (7) ee “Doorashada Guddoomiyaha & Labadiisa ku xigeen” waxay aheyd Faqrada 8aad waxayna u qornayd “Codeyntu waxay noqonaysaa ilaa seddex (3) wareeg”, waxaa loo baddelay sida ku xusan kor. Golohu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018.

- c) Wareega seddexaad waxaa ka qeyb-galaya labada murashax ee ugu cododka badan wareega labaad. Haddii uu jiro murashax seddexaad oo heley tiro la siman mid ka mid ah labada murashax ee isku soo haray, wuxuu isaguna/iyaduna ka qeyb galayaa wareega seddexaad, waxaana doorashada ku guulaysanaya murashaxii hela cod hal dheeri ah ee tirada xubnaha codeeyay.
- d) Haddii ay dhacdo in wareega kowaad ka dib ay isku soo haraan labo murashax oo kaliya, sababtuna ay tahay tanaasul ay ka tanaasuleen tartanka musharaxiinta kale, waxaa si toos ah loogu gudbayaa wareega seddexaad ee ku xusan xarafka (C) ee isla faqradaan, waxaana markaa meesha ka baxay wereegii labaad ee ku xusnaa xarafka (B) ee isla faqradaan. Labada murashax ee isku soo haray waxay ku kala guuleysanayaan cod hal dheeri ah ee tirada xubnaha codeeyay.
- e) Markey codeyntu dhamaato, Guddoomiyaha KMG wuxuu furayaan sanaadiiqda codeynta, waxaana la tirinayaan codadka, ka dibna waxaa Guddoomiyaha KMG ku dhawaaqayaa ciddii ku guuleysatay jagada Guddoomiyaha Golaha³³.
- 9) Ka hor inta aanu xafiiska la wareegin, Guddoomiyuhu waa in uu ka tago xilka uu ka hayo xisbiga siyaasadeed, waana in uu shaqadiisa u guto si dhexdhexaad ah.
- 10) Doorashooyinka Guddoomiye Ku-xigeennada, waxaa la waafajinayaan habraaca doorashada Guddoomiyaha.

³³ Qodobka 13^{ad}, faqrada 8(e) wuxuu ka soo go'ay xarafka (d) ee faqrada 7^{ad} ee "Doorashada Guddoomiyaha & Labadiisa Ku xigeen". Golohu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiiga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

11) Haddii ay wareegga saddexaad u soo gudbaan oo bar-bar-dhac noqdaan in ka badan laba Musharaxiinta u tartamaysa jagada Guddoomiyaha ee galay kaalinta koowaad, waxaa toos loo aadayaa wareeg ama wareegyada xiga inta lagu kala guuleysanayo isla maalintaa³⁴.

Qodobka 14aad: Xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka

- 1) Wuxuu mas'uul ka yahay fulinta iyo dhowrista Xeer-hoosaadka, ilaalinta nidaamka Golaha. Wuxuuna ilaalinayaahabsami u socodka howlaha sida sharci-dejinta, maamulka iyo hab-maamuuska.
- 2) Wuxuu furayaa, xirayaa fadhiyada, wuxuuna sheegayaa saacadaha, barnaamijka iyo ajandaha fadhiga soo socda oo qoraal ahaan lagu wargalinayo Golaha Shacabka.
- 3) Wuxuu hogaminayaah shirarka Golaha.
- 4) Wuxuu kormeerayaa shaqada hab-dhowrayasha iyo Xoghayaha.
- 5) Wuxuu metelaa, kuna hadlaa magaca Golaha Shacabka taas oo aan ka hor-imaanaynin ama wax u dhimaynin hanaanka sharci-dejinta.
- 6) Wuxuu la xiriira Baarlamaannada adduunka.
- 7) Wuxuu saxiixaa/saxiixdaa heshiisyada caalamiga ah ee Golahu la galo Baarlamaanada adduunka iyo hay'adaha kale ee khuseeya howlihiisa, kuwaas oo uu hor keenayo Golaha.

³⁴ Qodobka 13^{aad} (10) waa ku cusub tahay Qodobka “Doorashada Guddoomiyaha & Labadiisa ku xigeen”. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhliga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

- 8) Wuxuu kala tashan karaa Ku-xigeennadiisa arrimaha siyaasadda iyo maamulka Golaha.
- 9) Wuxuu guddoominaya Guddiga Joogtada ah iyo Guddiga Adeegga Baarlamaanka.
- 10) Wuxuu kormeerayaa maamulka Golaha.
- 11) Wuxuu ka qabtaa madaxweynaha istiqaalada, si waafaqsan Qdobka 93^{aad} ee Daskuurka³⁵.
- 12) Wuxuu isugu yeeraa Golaha shir aan caadi aheyn sida ku cad Qdobka 66^{aad} (4) ee Dastuurka³⁶.
- 13) Wuxuu shir guddoomiyaa kulanka Labada Aqal ee BFS oo lagu dooranyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda si waafaqsan Qdobka 89^{aad} (1) ee Dastuurka³⁷

Qdobka 15aad: Xilka Guddoomiye Ku-xigeennada Golaha Shacabka

- 1) Guddoomiyaha Golaha Shacabka marka uu maqan yahay ama uusan qaban karin xilkiisa, sabab kasta ha ahaatee, waxaa dhammaan howshiisii fulinaya Guddoomiye Ku-xigeenka koowaad. Haddii uu Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka koowaad maqnaadaan, waxaa howshiisa qabanaya Guddoomiye Ku-xigeenka labaad ee Golaha³⁸.

³⁵ Qdobka 14^{aad} (11) waa faqro cusub. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

³⁶ Qdobka 14^{aad} (12) waa faqro cusub. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

³⁷ Qdobka 14^{aad} (13) waa faqro cusub. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

³⁸ Qdobka 15^{aad} (1) ee “Xilka Guddoomiye Ku xigeennada Golaha Shacabka” waxey u qorneyd “Guddoomiyaha Golaha Shacabka marka uu maqan yahay ama uusan qaban Karin xilkiisa, sabab kasta ha ahaatee, waxaa dhammaan howshiisii fulinaya Guddoomiye ku-xigeenka koowaad. Haddii uu isaguna maqnaado, waxaa howshiisa

2) Haddii ay dhacdo in Guddoomiyaha iyo labadiisa Ku-xigeen ee goluhu ay ka maqan yihiin ama aysan awoodin in ay soo xaadiraan ama ay guddoomiyaan, waxay xubnaha fadhiya cod hal dheeri ah (50%+1) oo gacan tag ah ku dooranayaan xubin si ku-meel-gaar ah u guddoomisa kulankaas.

Qodobka 16aad: Awoodaha Guddoomiyaha Xilliga Fadhiga³⁹

- 1) Mar kastoo uu Guddoomiyuhu hadlayo waa in uu aamusaa xildhibaanka markaa hadlayay, loona dhageysto Guddoomiyaha si aamusnaan ku jirto.
- 2) Guddoomiyaha ayaa mas'uul ka ah dhaqan gelinta Xeer-hoosaadka Golaha, waana in loo hogansamaa hagistiisa.
- 3) Guddoomiyuhu wuxuu hadalka ka joojin karaa xildhibaanka haddii uu ka baxo ajendaha ama uu ku xadgudbo habsami u socodka fadhiga Golaha.
- 4) Haddii ay jirto fowdo iyo nidaam-darro, guddoomiyuhu wuxuu xiri karaa fadhiga wuxuuna Ajendaha maalinkaas dib ugu dhiga karaa kulanka xiga.
- 5) Goluhu hadduu leeyahay fadhi ay warbaahintu bannaanka ka tahay, guddoomiyuhu wuxuu ku wargelinayaa xildhibaanada & hawl-wadeennada in aysan isticmaali karin qalabka wax duuba.

³⁹ qabanaya Guddoomiye ku xigeenka labaad ee Golaha". Waxaa loo baddelay sida ku xusan kor. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4aad, kulanka 20nd ee 31/10/2018

Qodobka 16nd "Awoodaha Guddoomiyaha Xilliga Fadhiga" waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd, kulanka 21nd ee 3/11/2018

- a) Si warbaahinta loo saaro waxaa soo jeedin ku soo gudbinaya 10-xildhibaan kadibna Golaha ayaa u codeynaya⁴⁰.
- b) In guddoonku go'aan ka qaato isla markaasna amro in warbaahintu ka baxdo Golaha.
- c) Xildhibaanka ku xad-guba faqrada 5^{aad} ee qodobkaan waxaa loo dirayaa Guddiga Anshaxa⁴¹.
- d) Xubin aan xildhibaan aheyn oo martida/howl-wadeenada ah ee fadhida kulanka ee oo ku xadgudba faqrada 5^{aad} ee qodobkaan waxaa loo dirayaa ciidamada nabadvigelyada si ay shaqadooda uga gutaan⁴².
- 6) Haddii uu Guddoomiyaha oo shir guddoominaya kulan oo aysan goob-joog aheyn labadiisa Ku-xigeen, ay ku timaaddo xaalad degdeg ah oo kallifaysa inuu guddoomin waayo kulanka, wuxuu u wakiilanayaa xubin ka mid ah xildhibaanada fadhiya kulankaas inay sii guddoomiso.
- 7) Xaalad degdeg ah oo qabsatay shir-guddoonka awgeed, xubinta loo wakiishay inay sii guddoomiso kulanka guud ee Golaha, ma bilaabi karto ajende cusub, mana go'aamin karto go'aan masiiri ah.

⁴⁰ Qodobka 16^{aad} faqrada 5(a) XH-GSH-B10 si warbahinta loo saaro waxaa soo jeedin ku soo gudbinaya xildhibaan kadibna Golaha ayaa u codeenaya. Goluhu wuxuu ansixiyey wax-ka-badelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

⁴¹ Qodobka 16^{aad}, faqrada 5(c) waa cusub tahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

⁴² Qodobka 16^{aad} Faqrada 5 (d) waa cusub tahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 8) Si looga fogaado xaalad sababi karta in guddoonku banneeyo hogaaminta Golaha, waa xilsaaran Guddoonka inay ugu yaraan laba xubnoood oo Guddoonka ahi mar walba fadhiyaan kulanka guud.
- 9) Guddoomiye ku-xigeennada goluhu kama maqnaan karaan fadhiyada Golaha haddii aysan jirin xaalad maangal ah ama uusan Guddoomiyuhu u xilsaaran howl kale⁴³.

Qodobka 17aad: Xil-waayidda Guddoomiyaha Golaha iyo Labadiisa Ku-xigeen

- 1) Guddoomiyaha iyo labadiisa Ku-xigeen waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:
 - a) Geeri.
 - b) Istiqaalo qoraal ah oo uu u soo gudbiyay Golaha, ama mid oraah oo uu ka sii daayay warbaahinta.
 - c) Maqnaansho cudurdaar la'aan ah oo gaaraysa afartan & shan (45) cisho oo isku xigta.
 - d) Ku xad gudub shareecada islaamka, dastuurka qaranka, Xeer Hoosaadka Golaha, ama shuruucda qaranka.
 - e) Xil gudasho la'aan joogta ah sida:
 - i. Dhimirkiisa oo wax u dhiman (Waali), taasoo loo baahan yahay in uu soo cadeeyo gudi takhaatiir ah oo la aqoonsan yahay laguna kalsoon yahay.
 - ii. Caafimaad daro joogta ah, ama awood beelid uusan xilka la gudan karin, taasoo loo baahan yahay in uu soo cadeeyo gudi takhaatiir ah oo la aqoonsan yahay, laguna kalsoon yahay.

⁴³ Qodobka 16^{aad} (9) waa cusub tahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- iii. Mar walba oo ay muddadu ka dhammaato.
 - iv. Xukun Kama danbeys ah ay ku riday maxkamad awood u leh oo uu ku mutaysanaayo xabsi aan ka yarayn lix (6) bilood.
- 2) Mooshin xil ka qaadis ku saabsan xubin ka mid ah Guddoonka Golaha, kuna salaysan asbaabaha ku xusan Faqradda 1aad ee Qodobkan, waxaa keeni kara xildhibaano aan tiradoodu ka yarayn seddax meelood meel (1/3) tirada guud ee Golaha. Codka xil ka qaadista wuxuu ku ansaxayaa aqlabiyyad seddax meelood laba meel (2/3) ee xubnaha guud ee Golaha.
- 3) Soo jeedin moshin xil ka-qaadis ee ku aaddan Guddoomiyaha/Ku-xigeennadiisa waa inuu ahaadaa mid sababeysan oo ku saleysan sharciga.
- 4) Moshinka xil ka-qaadista waxaa laga doodayaa loona codeynayaa toban (10)-cisho oo maalmo shaqo ah gudahood, laga bilaabo taariikhda moshinka la keeney Golaha⁴⁴.
- 5) Haddii Guddoomiyaha ama mid ka mid ah Ku-xigeennadiisa ay soo wajahdo mooshin ah xilkaqaadis waxaa la marayaa talaabooyinka soo socda:
- a) Guddoomiyaha ama Ku-xigeennada laga keenay soo jeedinta (Motion) xil-ka-qaadida, waa in laga wareejyo guddoominta fadhiyada, inta ay ka dhamaanayso dooda iyo codeynta, codeyntuna waa qarsoodi.

⁴⁴ Qodobka 17^{ad} (4) "Xil-waayidda Guddoomiyaha Golaha& Labadiisa Ku xigeen" waxey u qorneyd "Moshinka xil ka-qaadista waxaa laga doodayaa loona codeynayaa toban (10) cisho oo maalin shaqo ah Gudahood, laga bilaabo taariikhda moshinka la keeney Golaha". Waxaa loo baddelay sida ku xusan kor. Goluhu waxay isla ogolaadseen Kalfadhiqa 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

- b) Haddii Guddoomiyaha ama Guddoomiye Ku-xigeen uu lumiyo xilka, si waafaqsan Faqradda 2aad ee Qodobkan, Goluhu muddo tobant & shan (15) maalmood gudohood waa inuu ku doorto Guddoomiyaha ama Ku-xigeen cusub⁴⁵.
- 6) Soo-jeedin (motion) xil-ka-qaadis xubin ka mid ah Guddoonka waxaa la qabanayaa maalin shaqo, saacadaha shaqada, iyadoo goobta lagu qaban karaa tahay Xafiiska Guddoonka ama xafiiska uu markaas ku shaqeynayo Guddoonka Goluhu, waana in si rasmi ah loo geliyo diwaanka qabashada soojeedinada Golaha⁴⁶.

Qodobka 18aad: Xilka Hab-Dhowraha iyo Ku-xigeennadiisa

Habdhwraha iyo Ku-xigeennadiisa iyagoo raacaya awaamirta Guddoomiyaha waxay u xilsaaran yihiiin.

- a) Dhowrista nidaamka Golaha.
- b) Nabad-galyada, xasiloonida goobta iyo xubnaha Golaha.
- c) Kormeerka iyo hubinta dhaqan-gelinta jadwalka safarrada xubnaha Golaha.
- d) Kormeeriida & xanaanada hantida Golaha.
- e) Kormeerridda xafladaha, dhowrista hab-maamuuska, ilaalinta qaab fadhiga Golaha iyo martida.
- f) Wixii kale oo howl ah ee guddoonku u xilsaaro.

Qodobka 19aad: Nidaamka Fadhiga Golaha

- 1) Guddoomiyaha ayaa ilaalinya nidaamka Golaha. Guddoomiyaha wuxuu fari karaa inuu nidaamka ilaliyo xubin Golaha ah ama wasiir ka tirsan xukuumadda markii:

⁴⁵ Qodobka 17^{aad}, faqrada 5^{aad} (b) waxey u qorneyd “Guddoomiyaha ama ku-xigeenada laga keenay soo jeedinta (Motion) xilkaqaadida, waa in laga wareeqiyo Gudoota fadhiyada, inta ay ka dhamaanayso arrinta la xiriita soo jeedinta, codeyntuna waa qarsoodi”. Waxaa loo baddelay sida ku xusan kor. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018

⁴⁶ Qodobka 17^{aad} “Xil-Waayidda Guddoomiyaha Golaha iyo Labadiisa Ku-xigeen”, waa faqro cusub. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

- a) Xubin hadleysa ay ka baxdo arrintii dooda u furneyd.
 - b) Xubin ay ku kacdo fal carqaladeynaya nidaamka shaqada Golaha.
 - c) Xubin ku kacda anshax xumo ama dhaqan aan habooneyn.
 - d) Xubin isticmaasha luqad hadal ahaan iyo qoraalba aan ku habooneyn Golaha Shacabka.
 - e) Xubin hurisa colaad, isticmaasha luqad ay ku dheehan tahay anshax-xumo, gef, sharaf-dil, hanjabaad iwm.
 - f) Xubin garab marta ama ixtiraami waayo awooda xil-gudashada Guddoomiyaha Golaha.
 - g) Xubin si ula kac ah ku gardarroota ama hor istaagto habdhowraha oo fulimayo amarka Guddoomiyaha Golaha.
- 2) Xubin ama Wasiir waa inay u hogaansanaato amarka uu bixiyo Guddoomiyaha ee ku saabsan hab dhaqanka loogu baaqay xubintaas ama wasiirkaas inay dhowrto, kaasoo ay ka mid yihiin tallaabooyinka soo socda:
- a) Ka noqoshada isticmaalka luuqad aan ku habooneyn.
 - b) In uu isla marakaas soo afjaro hadalka.
 - c) Fadhiyada Golaha Shacabka oo laga saaro, oo ay ka mid yihiin kulamada Guddiga uu ka tirsan yahay inta maalintaas ka harsan⁴⁷.
 - d) In la demiyo ama codka la xiro telefoonada gacanta waqtiga uu socdo fadhiga Golaha, sidoo kale laguma hadli karo⁴⁸.

⁴⁷ Qodobka 19^{ad}, faqrada 2(c) ee ee “Nidaamka Fadhliga Golaha” waxay u qornayd “Fadhiyada oo laga saaro oo ay ka mid tahay kulammada Guddiga inta maalintaas ka harsan”. waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhliga 4aad, kulanka 20aad ee 31/10/2018.

⁴⁸ Qodobka 19^{ad}, faqrada 2(d) ee ee “Nidaamka Fadhliga Golaha” waxay u qornayd “in la demiyo telefoonada gacanta waqtiga uu socdo fadhiga Golaha”, waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhliga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018.

- e) Haddii goluhu dhexdiisa ka dhasho nidaam darro aad u baaxad weyn, guddoomiyahu wuxuu isla-markaaba dib ugu dhigi karaa fadhiga maalinta xigta.

Qodobka 20aad: Xil-Wareejinta Guddoonka & Guddiyada⁴⁹

A. Howlaha Guddiyada xilliga kala-guurka

- 1) Guddi walba waa in u diyaariyaa wax qabadka howlihiisa laga soo bilaabo kalfadhigii koowaad, inta lagu gudajiro kalfadhiga ugu danbeeya, waxaana ka mid ah qoraalada looga baahan yahay inay diyaariyaan:
 - a) Sharciyada Guddigu ka shaqeeyay.
 - b) Dhammaan war-bixinnada Guddigu u gudbiyay si looga doodo.
 - c) Soo-jeedinada iyo su'aalaha gudigu soo-jeediyay.
 - d) Howlaha kormeerka gudigu sameeyay.
 - e) Warbixin kooban, oo ah go'aanada iyo taloooyin ku aadan war-bixinta Guddiga.
 - f) Caqabadaha iyo dhibaatooyinka soo wajahay Guddiga ee ku aadan gudashada waajibaadkiisa.
 - g) Go'aanada xukuumada ee ku aadan tala-bixinta Guddiga.
 - h) Howlaha qabyada ee Guddiga iyo asbaababaha loo qaban waayay.
 - i) Talo-soojeedinta gudigu siinayo Guddiga imaan doona.
- 2) Guddoomiyaha Guddi waliba waa inuu u soo jeediyya warbixinta gudigiisa isbuuca ugu danbeeya ee muddada xilheyn ta Golaha, si loo ansixiyo.

⁴⁹ Qodobka 20^{aad} "Xilwareejinta Guddoonka & Guddiyada" waa cusub yahay. Goluhu waxay isla ogolaadseen Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

- 3) Guddoomiyaha gudi walba ee xilka la wareegaya waxa la siinayaa nuqulka warbixinta Guddiga uu Guddoomiyaha u noqonayo.

B. Howlaha Xoghayaha Guud Xilliga kala Guurka

- 1) Waa inuu u qeybiyaa warbixinada xubnaha ugu yaraan ka hor afar iyo tobant (14) maalmood muddada xilheynta Golaha.
- 2) Waa inuu ka diyaariyaa afar nuqul dhamaan warbixinada gudiyada ee goluhu ansixiyay.
- 3) Waa in uu ka diyaariyaa howlaha fadhiga guud (Plenary) ee nuqulo ka kooban arrimaha soo socda:
 - a) Qaraarada goluhu ansixiyay oo ay ku saxiixaan yihiin Guddoomiyaha iyo Xoghayaha Guud.
 - b) Hadaljeedinnada Madaxweynuhu ka jeediyey Golaha.
 - c) Liiska sharciyada la hor keenay Golaha mudada xil heyniisa.
 - d) Liiska warbixinada gudiyada u soo gudbiyeen.
 - e) Liiska warbixinada wufuuda dibadda u soo gudbiyeen Golaha.
 - f) Liiska su'aalaha (faafaahinada su'aasha) ee la hor keenay.
 - g) Liiska codsi wadareedyada (petition) loo soo bandhigay Golaha.
 - h) Liiska qoraalada (papers) ee la hor keenay Golaha.
 - i) Liiska soo-jeedinada la hor keenay Golaha.
 - j) Liiska howl-wadeenada, hantida & deymaha haddii ay jiraan.

- 4) Xoghayaha Guud waa in uu ka diyaariyaa afar nuqul qoraallada lagu tilmaamay faqrada 3^{aad}, oo mid kamid ah

Guddoomiyaha xilka ka dagaya ku wareejinayo
Guddoomiyaha xilka qabanaya.

C. Habraaca Xil-wareejinta Guddoomiyaha

- 1) Isbuuca ugu danbeeeya ee mudada xil-heyntra Golaha, mid kamid xildhibaanada waa in uu soojeediya soojeedin lagu sharfayo Guddoomiyaha.
- 2) Dooda waxaa shir guddoominaya mid ka mid ah ku-xigeenada Guddoomiyaha.
- 3) Doodu waxay ku saabsanaaneysaa wax qabadka & caqabadaha uu wajahay xafiiska Guddoomiyaha ee la xiriira maamulka iyo sharci dejinta.
- 4) Guddoomiyaha ayaa hadlaya gaba-gabada soojeedinta, guddoomiyuhu waa in uu war-bixin yar oo kooban ka bixiyaa isticmaalka qalabka.
- 5) Xoghayaha Guud ayaa ka sameynaya keyd howsha soojeedinta kana diyaarinaya qaraar gabagabada soojeedinta.
 - a) Keydka iyo qaraarka waxa ay qeyb ka noqonayaa qoraallada loo gudbinayo Guddoomiyaha xilka la wareegaya.
 - b) Gebagebada xafilada xil-wareejinta Guddoomiyaha xafiiska ka tagaya ayaa nuqlu war-bixinta ah ku wareejinaya Guddoomiyaha xilka qabanaya.

CUTUBKA 3AAD: KALFADHIYADA & FADHIYADA GOLAHA

Qodobka 21aad: Kalfadhiyada iyo Fadhiyada Golaha Shacabka

- 1) Sida ku cad Qodobka 66^{aad} (2) ee dastuuurka, Golaha Shacabka wuxuu sanadkiiba yeelanayaa labo kalfadhi oo caadi ah. Kalfadhi kasta ee Baarlmaanka wuxuu soconayaa muddo afar bilood ah.
- 2) Kalfadhiga ugu horeeya ee Golaha Shacabka wuxuu furmayaa maalinta la dhaariyo xubnaha Golaha, wuxuuna xirmayaa marka ay u dhamaato mudada 4-bilood ah ee dastuuurka dalka & xeerhoosaadka ku cad. Kalfadhiga 2^{aad} ee sanadka wuxuu furmayaa laba bilood ka dib marka kalfadhiga hore xirmo⁵⁰.
- 3) Kalfadhi kasta marka uu dhamaado, wuxuu goluhu qaadanayaa laba bilood oo fasax ah.
- 4) Haddii sababo jira awgood, kalfadhiyada ay raaci waayaan qaabka kor ku xusan, markaas waxaa kalfadhiga laga dhigayaa taariikhda ugu horeysa ee suurta galka ah.
- 5) Fadhiyada ama kalfadhiyada waxaa ay soconayaan ilaa laga dhammeeyo ajendaha hor yaalla iyo hindisa sharchiyeedyada degdegga ah.
- 6) Goluhu wuxuu qaban karaa kalfadhiyo aan caadi aheyn.

⁵⁰ Qodobka 21^{aad} (2) ee “Kalfadhiga /Fadhiyada Golaha Shacabka” waa faqrud cusub oo lagu soo kordhiyey Qodobka . Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3^{aad}, kulankii 19^{aad} ee 22/10/2013.

Qodobka 22aad: Kalfadhiyada Aan Caadiga Aheyn ee Golaha

Golaha Shacabku wuxuu yeelan karaa kal-fadhiyo aan caadi aheyn haddii⁵¹:

- 1) Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalku isugu yeero, ka dib marka uu helo codsi ka yimaada Golaha Wasiirrada⁵².
- 2) Guddoomiyaha Goluhu isugu yeero⁵³.
- 3) Haddii ay codsi qoraal ku weydiistaan ugu yaraan boqolkiiiba labaatan (20%) xubnaha Golaha Shacabka ee federaalku⁵⁴.
- 4) Guddoonku waa in uu u qaybshaa Golaha lifaaqyada codsigii Golaha Wasiirrada iyo Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka ka hor inta aan Golahu furmin.

Qodobka 23aad: Xaadiridda Fadhiyada Golaha

- 1) Xildhibaan kasta waxaa waajib ku ah inuu soo xaadiro fadhiyada Golaha.

⁵¹ Qodobka 22^{aad} XH-GSH-B10 “Sida ku cad Qodobka 66^{aad} (4) ee Dastuurka, Kalfadhiyada aan caadiga aheyn waxaa isugu yeeri kara Guddoomiyaha Golaha”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhliga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

⁵² Qodobka 22^{aad} (1) ee Kalfadhiyada Aan Caadiga Aheyn Ee Golaha oo markii hore u qornaa “marka uu Madaxweynaha Soomaaliya soo dalbado isagoo tiixgelinay codsiga uga yimid Golahawasiirrada” waxaa loo baddelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhliga 3^{aad}, kulankiisi 19^{aad} ee 23/10/2013

Qodobka 22^{aad} (1) XH-GSH-B10, “Marka uu madaxweynaha JFS, ka soo dalbado, isagoo tiixgelinaaya codsiga uga yimid Golaha wasiirradada, isla markaasna uu guddoonku ku soo lifaaqaa codsigii Golaha wasiirradada iyo madaxwaynaha loona qaybiyaa Golaha”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhliga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

⁵³ Qodobka 22^{aad} (2) XH-GSH-B10, “Guddoomiyaha Golaha Shacabka”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhliga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

⁵⁴ Qodobka 22^{aad} (3) XH-GSH-B10, “Marka uu helo codsi qoraal ah oo ka yimid boqolkiiiba labaatan (20%) xubnaha Golaha Shacabka”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhliga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 2) Xilliga shaqada waxay bilaabaneycaa 09:00 subaxnimo waxayna ku egtahay marka uu dhamaado ajendaha shaqo ee maalin kasta oo maalin shaqo ah⁵⁵.
- a) Waqtiga salaadda goluhu waa saacadda 12:30 duhurnimo wuxuuna shaqada dib ugu soo laabanayaa 1:00 galabnimo. Goluhu wuxuu xaq u yeelanayaa soddon (30)-daqiiqo oo salaadda casar uu tukado.
 - b) Maalmaha Sabti ilaa Khamiis waa maalmo shaqo.
 - c) Maalmaha Sabti, Isniin & Arbaco waxaa jira fadhiyada caadiga ah ee Golaha.
 - d) Maalinta Axad, goluhu wuxuu la xisaabtamayaa xukuumadda iyo hay'adaha madaxbannaan ee dowladda.
 - e) Maalinta Talaado ah waxaa qabsoomaya kulamada gudiyada, sidoo kale xubnaha goluhu waxay u adeegayaan bulshada ay matelaan.
 - f) Maalinta Khamiis ah waxaa dhacaya shirka Guddiga Joogtada ah.
- 3) In guddoonka baarlamaanku soo fadhiisto halkii loogu tala galay 10:00- subaxnimo shirkuna uu furmo.
- 4) Haddii aan la helin guntanka (quorum), in guddoonka baarlamaanka uu dib u dhigo furitaanka fadhiga muddo hal saac ah.
- 5) Guntanka haduu buuxsami waayo saacaddaas kadib, guddoonku fadhiga wuu xirayaan.

⁵⁵ Qodobka 23nd (2 ilaa 12) ‘Xaadididda Fadhiyada Golaha’ waa faqrado cusub oo lagu soo kordhiyey. Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3rd, kulankii 18th ee 22/10/2013.

Qod23nd Faqrada 2(a ilaa f) ee “Xaadididda Fadhiyada Golaha” waa ku cusub yihiin faqrada Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4nd, kulanka 20th ee 31/10/2018

- 6) Haddii la gaaro 10:30 subaxnimo waxaa la joojinayaa diiwaangelinta xildhibaannada waxaana buuga (liiska) loo gudbinayaa xafiiska guddoonka Golaha Shacabka⁵⁶.
- 7) Mudanayaasha ka soo dabamara 10:30 subaxnimo, waxaa lagu qori doonaa liis gaar ah, si loogula xisaabtamo, sida ku cad faqrada 8^{and} ee qodobkaan⁵⁷.
- a) Xoghayaha Golaha ayaa mas'uul ka ah inuu diyaariyo foomka soo daahayaasha imaada 10:30 subaxnimo ka dib⁵⁸.
- b) Xoghayahu waa inuu xiro foomkii hore marka la gaaro 10:30 subaxnimo, isla markaasna foomka soo daahayaasha lagu qoro imaanshaha dadka ka dambeynaya 10:30 subaxnimo⁵⁹.
- c) Mid ka mid ah hab-dhowrayaashu waa inuu hubiyo in la xiray foormkii hore marka la gaaro 10:30, lana howlgeliyey foomka soo daahayaasha⁶⁰.
- 8) Soo daahidda saddex (3) maalmood waxay la mid tahay maqnaansho hal maalin, waxaana la xisaabinayaa dhamaadka bil-kasta⁶¹.

⁵⁶ Qodobka 23^{ad} (6) ee “Xaadiridda Fadhiiyada Golaha” waxay u qornayd “Haddii la gaaro 11:00Am waxaa la joojinayaa diiwaangelinta Xildhibaannada waxaana buuga (liiska) loo Gudbinayaa Xafiiska Guddoonka Golaha Shacabka”. Waxaa loo badalay sida kor ku xusan, Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

⁵⁷ Qodobka 23^{ad} (7) ee “xaadiridda fadhiiyada Golaha” waxay u qornayd “Mudanayaasha ka soo dabamara 11:00Am, waxaa lagu qori doonaa liis gaar ah”. Waxaa loo badalay sida kor ku xusan, Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

⁵⁸ Qodobka 23^{ad} faqrada 7 (a) waa cusub yahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

⁵⁹ Qodobka 23^{ad} faqrada 7 (b) waa cusub yahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

⁶⁰ Qodobka 23^{ad} faqrada 7 (c) waa cuxub yahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

⁶¹ Qodobka 23^{ad} (8) XH-GSH-B10 “Soo daahidda shan (5) maalmood waxay la mid tahay maqnaansho hal maalin, waxaana la xisaabinayaa dhamaadka kal-fadhi kasta”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 9) Tirada ugu badan ee mar kaliya fasax ku maqnaan karta, waa in aysan ka badan sodon (30) xildhibaan⁶².
- 10) In fasaxa guddoonka uu bixinayo uusan ka badnaanin soddon (30) cisho oo (teel-teel ama xiriir ah) halkii kalfadhi.
- 11) Xildhibaankii fasax la'aan ama cudurdaar la'aan ka maqnaado fadhiyada saddex (3) maalin shaqo oo isku xiga ama teelteel ah, waxaa la siinayaa wargelin qoraal ah. Haddii uu xildhibaan fasax la'aan ama cudurdaar la'aan maqnaado muddo gaareysa todoba (7) cisho shaqo oo xiriir ama teelteel ah hal-bil gudaheed, waxaa loo gudbinayaa Guddiga anshaxa, si loogu ganaaxo in laga jaro gunnadiisa guud shan meelood meel (1/5) bishaas⁶³.
- 12) Maqnaansho sabab la'aan ah oo ka badan mudada ku xusan faq.11^{aad} ee qodobkaan, waxaa loo gudbinayaa guddoonka Golaha, si loo hordhigo Guddiga anshaxa.
- 13) Haddii xildhibaanku soo xaadiro bilowga fadhiga, kadibna iska baxo fasax la'aan iyadoo fadhigii weli socdo, wuxuu la mid yahay lana xukun yahay xildhibaan ka maqan fadhiga.

⁶² Qodobka 23^{aad} (9) XI-GSH-B10 Tirada ugu badan ee mar kaliya fasax ku maqnaan karta, waa in aysan ka badan konton (50) Xildhibaan. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

⁶³ Qodobka 23^{aad} (12) ee "Xaadiridda fadhiyada Golaha" waxay u qorneyd "Xildhibaankii fasax la'aan ama cudurdaar la'aan ka maqnaado fadhiyada (3) maalmood shaqo oo isku xiga, wuxuu mutesanayaa diguun qoraal ah, hadduu misna cudurdaar la'aan maqnaado muddo gaareysa todoba (7) Cisho oo xiriir ah ama teel-teel ah soddon Cisho Gudahood, waxaa lagu ganaaxayaa 1/5 Gunno fadhiyeedkiisa. Wixii maqnaasho ah ee ka badan muddada la soo sheegay waxaa loo Gudbinayaa warbibinteeda Guddoonka Golaha loo hordhigo Guddiga Hubinta iyo Anshaxmarinta". Waxaa loo baddelay sida ku xusan kor. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiiga 4^{aad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

Qodobka 23^{aad} (12) XI-GSH-B10 "Xildhibaankii fasax la'aan ama cudurdaar la'aan ka maqnaado fadhiyada Saddex (3) maalin shaqo oo isku xiga, waxaa la siinayaa wargelin qoraal ah. Haddii uu Xildhibaan fasax la'aan ama cudurdaar la'aan maqnaado muddo gaareysa Todoba (7) cisho shaqo oo xiriir ama teelteel ah hal-bil gudaheed, waxaa lagu ganaaxayaa in laga jarayo Gunnadiisa guud shan meelood meel (1/5) bishaas". Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

Haddii loo baahdo in la caddeeyo xildhibaanada iskaga baxay fadhiga socda waxaa la sameynayaa xaadirin labaad.

- 14) Haddii xildhibaanka uu codeeyey ama goluhu go'aan qaatay intuusan ka bixin fadhiga, maqnaan ku xukumiddiisu ma saameynayso codeynta iyo howlaha sharci ee uu go'aankooda wax ka qaatay⁶⁴.
- 15) Xildhibaanka yimaada kulanka oo ka baxa codeyn dhaceysa sabab la'aan, wuxuu muteysanayaa ganaax gunno oo dhan 15% gunada bishaas⁶⁵.
- 16) Haddii xubin ama xubno xildhibaanno iyagoo soo xaadiray, ay ku caddaato inay si ku talagal ah u hor istaagaan guntanka, habdhowrayaasha ayaa u gudbinaya guddoonka si loogu gudbiyo Guddiga anshaxa, waxaana laga jarayaan shan meelood meel (1/5) gunno-bileedkooda⁶⁶.
- 17) Warbixinta imaanshaha iyo maqnaanshaha xubnaha ee xilliga shaqada waxaa si kalgal (Periodical) ah, kalfadhi kasta markuu xirmayo lagu soo bandhigayaa war-baahinta Golaha, si ay deegaanadooda ula socdaan xogta metelaadda wakiilkooda ee mudada shaqada⁶⁷.
- 18) Lacagaha ganaaxa ah ee ka go'aysa xildhibaanada waxay ku dhaceysaa khasnadda daryeelka Golaha, waana in saddexdii

⁶⁴ Qodobka 23nd (15) ee “ Xaadiridda fadhiyada Golaha” waa ku cusub tahay Qodobka . Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiiga 4nd, kulanka 20nd ee 31/10/2018

⁶⁵ Qodobka 23nd (16) ee “ Xaadiridda fadhiyada Golaha” waa ku cusub tahay Qodobka . Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiiga 4nd, kulanka 20nd ee 31/10/2018

⁶⁶ Qodobka 23nd (17) ee “ Xaadiridda fadhiyada Golaha” waa ku cusub tahay Qodobka . Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiiga 4nd, kulanka 20nd ee 31/10/2018

⁶⁷ Qodobka 23nd (18) ee “ Xaadiridda fadhiyada Golaha” waa ku cusub tahay Qodobka . Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiiga 4nd, kulanka 20nd ee 31/10/2018

biloodba mar loo soo bandhigaa dakhliga xisaabtaas iyo sida loo isticmaalay⁶⁸.

- 19) Xoghayaha Golaha ayaa ka mas'uul ah inuu bil walba dhammaadkeeda, afar (4) nuqul oo foomamka xaadirinta ah oo habdhowruhu saxiixay geeyo xafiisyadaan⁶⁹:
- a) Xafiiska Guddoonka.
 - b) Xafiiska Guddiga Xeerhoosaadka iyo Anshaxa.
 - c) Xafiiska Keydinta Dokumeentiyada (Archive).
 - d) Xafiiska Habdhowraha.
- 20) Xildhibaan kasta oo lagu xad-gudbo xuquuqdiisa iyo xasaanadiisa, wuxuu xaq u leeyahay⁷⁰:
- a) Inuu u soo gudbiyo qoraal uu kaga hadlayo xad-gudubkaas Guddiga xeerhoosaadka, asagoo nuqul siinaya guddoonka Golaha.
 - b) Waa in Guddiga xeerhoosaadka iyo guddoonka goluhu ku siiyaan jawaab celin qoraal ah muddo aan ka badneyn afar iyo tobant (14) maalmo shaqo.
- 21) Xildhibaan kasta oo ka mid ah Golaha wasiirada, waa inuu saxiixaa guntanka (quorum), xildhibankii saxiixi waaya shaqo ama safar awgii waa in uu bil walba dhamaadkeeda u soo gudbiyaa habdhawraha warqad qoraal ah oo cadaynaysa sababihii shaqo/Safar usuurtgalin waysay saxiixa guntanka, habdhawruhuna waa in uu wafajiyaa habraaca faqrada 19^{aad} isla qodobkan⁷¹.

⁶⁸ Qodobka 23nd (19) ee " Xaadiridda fadhiyada Golaha" waa ku cusub tahay Qodobka . Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4nd, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

⁶⁹ Qodobka 23nd (19) waa faqro cusub. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022..

⁷⁰ Qodobka 23nd (20) waa faqro Cusub. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

⁷¹ Qodobka 23nd (21) waa faqro Cusub. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

Qodobka 24aad: Guntanka (Quorum)

- 1) Aqlabiyadda tirada guud ee xubnaha ayaa noqonaysa guntanka (quorum).
- 2) Go'aannada ka soo baxa shirarka waa sax/sharci haddii guntan uu jiray xilligii codka la qaadayay. Guddoomiyaha ayaa xaqijinayo guntanka (quorum) inta aan codka la qaaadin, isaga ayaana go'aan ka gaaraya goor walba ee la hubinayo guntanka.
- 3) Ka hor intuusan codeyn, xubin kasta oo ka tirsan Golaha waxay codsan kartaa in la hubiyo guntanka taasoo guddoonka ku khasbeysa inuu hubiyo guntanka.
- 4) Cod-bixin kasta oo u baahan tiro cayiman, oo aan ka aheyn kuwa u baahan cod hal dheeri ah ee xubnaha jooga, inta aysan cod bixinta dhicin, Guddoomiyaha waa in uu hubiyyaa in ay fadhiyaan tirada loo baahan yahay ee ay ku ansaxeysyo cod bixintaas.
- 5) Haddii ansixinta mooshin ama qodob ajendaha uu u baahan yahay tiro sadex meelood labo meel, ugu yaraan sadex meelood labo ee xubnaha Golaha Shacabka waa in ay xaadir yihiin codka ka hor.
- 6) Xildhibaanku kama maqnaan karo kulanka ajende u baahan codeyn guntan gaar ah⁷².

⁷² Qodobka 24^{aad} (6) ee "Guntanka" waa cusub tahay. Goluhu waxay isla ogolaadeen Kalfadhiga 4aad, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018

Qodobka 25: Ajendaha Fadhiyada Golaha

- 1) Guddiga Joogtada waa inuu diyaariyaa ajendaha fadhiyada Golaha. Ajendaha waxaa loo qeybinayaa xildhibaanada ugu yaraan 24-saac ka hor fadhiga loo dhan yahay⁷³.
- 2) Guddoomiyayaasha gudiyadu waa inay gudiyada kala tashadaan sameynta ajendaha ka hor fadhiga Guddiga Joogtada ah⁷⁴.
- 3) Ajendaha waxaa loo tix-galinayaa in la ansaxiyay, haddii aysan ugu yaraan toban (10) xildhibaan, inta uusan soo galin fadhiga Guddoomiyaha u gudbinin mooshin qoraal ah oo wax lagaga bedelayo ajendaha, iyagoo soo jeedinayo arrin deg-deg ah⁷⁵:
 - a) Xad-gudub arrimaha diinta.
 - b) Xad-gudub xaquuqda aadamaha ee hay'adaha dowlada ama hay'ado kale.
 - c) Dhibaato dabiiiciya.
 - d) Xasillooni darro.
 - e) Xad-gudub xasaanada iyo sumcada xildhibaanada.

⁷³ Qodobka 25nd (1) ee “Ajendaha Fadhiyada Golaha” waxay u qornayd “Guddiga Joogtada Arrimaha wuxuu diyaarin doonaa ajendaha fadhiyada soo socda ee Golaha. Ajendaha waxaa loo qeybinayaa Xildhibaanada ugu yaraan 48saacadood ka hor fadhiga loo dhan yahay”. Waxaa loo sida kor ku xusan. Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhiga 4nd kulanka 20nd ee 31/10/2018.

⁷⁴ Qodobka 25nd (2) ee “Ajendaha fadhiyada Golaha” waa cusub tahay. Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhiga 4nd kulanka 20nd ee 31/10/2018.

⁷⁵ Qodobka 25nd faqrada 3(a-ilaa-e) ee ee “Ajendaha Fadhiyada Golaha” waa cusub yihiin. Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhiga 4nd kulanka 20nd ee 31/10/2018.

Qodobka 25nd (3) (XH-GSH-B10 “Ajendaha waxaa loo tixgalinayaa in la ansaxiyay, haddii aysan ugu yaraan toban (10) Xildhibaan bilowga fadhiga, Guddoomiyaha u gudbinin mooshin qoraal ah oo wax lagaga bedelayo ajendaha, iyagoo soo jeedinayo arrin deg-deg ah. Mooshinkana waa in ay ku saxiyan yihiin xubnaha taageeraya. Arrin deg deg ah waxaa noqon kara arrimaha soo socda”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

- 4) Ajendaha haddii ay codsadaan toban (10) xildhibaan, in wax cusub lagu daro ama wax laga badalo waxaa guddoonka laga doonayaa in uu ku soo daro ajendaha isla fadhigaas haddii ay u codeeyaan (50%+1) ee tirada fadhida⁷⁶.
- 5) Ajende hore oo ansax ah oo doodiiisana socoto ansixin 2^{aad} Golaha looma hor keeni karo⁷⁷.
- 6) Ajende kasta oo u baahan codeyn waa in lagu sheegaa wargelinta kulanka ee loo dirayo xubnaha, iyadoo la caddeynayo guntanka codeynta ee loo baahan yahay⁷⁸.
- 7) Inta aan goluhu aadin fasaxa waa in la dhameeyaa ajenda kasta oo doodiiisu socoto hadaan goluhu si kale u go'aansan⁷⁹.

Qodobka 26aad: Xushmada Istaaga iyo Fadhiga Golaha

- 1) Xubnaha waa inay istaagayaan marka dadka hoos ku qoran soo galaan Golaha:
 - a) Madaxweynahay Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.
 - b) Guddoomiyaha ama sii hayaha xilka Guddoomiyaha.
 - c) Madaxweyne shisheeye ee lagu martiqaaday ama wakiilkiisa.
 - d) Guddoomiye barlaamaan ee dal kale.

⁷⁶ Qodobka 25^{aad} (4), markii hore waxay aheyd faq. 3^{aad} oo u qornayd: “Guddoomiyaha ayaa go'aan ka gaaraya waqtiga Golahaloogu yeerayo inay u codeeyaan mooshinka wax looga baddelayo Ajendaha” waxaa loo baddelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhliga 3^{aad} Kulankiisi 19^{aad} ee 23/10/2013.

⁷⁷ Qodobka 25^{aad} (5) ee “Ajendaha fadhiyada Golaha” waa cusub tahay. Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhliga 4^{aad} kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

⁷⁸ Qodobka 25^{aad} (6) ee “Ajendaha Fadhiyada Golaha” waa cusub tahay. Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhliga 4^{aad} kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

⁷⁹ Qodobka 25^{aad} (7) waa cusub tahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhliga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

- 2) Marka la fadhiyo Golaha, Guddoomiyaha, labada guddomiye kuxigeen iyo xubin kasta oo uu Guddoomiyaha ku marti-qaaday fadhiga, waxaa ay fadhiisanayaan xubnaha hortooda. Hab-dhowraha, ku-xigeenadiisa iyo Xoghayaha Guud, waxay fadhiisanayaan meel ka hooseysa meesha uu fadhiyo Guddoomiyaha. Xubnaha dowlada waxaa ay fadhiisanayaan dhinaca bidix ee ka soo horjeeda Guddoomiyaha.

Qodobka 27aad: Kala Horreynta Hawlaha Golaha⁸⁰

Marka uu qabanayo howshiisa, goluhu wuxuu raacayaa nidaamkan hoos ku qoran:

- 1) Guddoomiyaha ayaa shirka furaaya sheegayana tirada joogta ee (guntanka).
- 2) Akhrinta aayadaha quraanka kariimka iyo xasuusinta Allah.
- 3) Ansixinta ajendaha maalintaas.
- 4) Dhaarinta xubnaha cusub haddii ay jiraan.
- 5) Waqtiga su'aalaha weydiinta (question time).
- 6) Su'aal wadareed (interpellation debate).
- 7) Soo-jeedinta Guddoomiyaha.
- 8) Hindisa sharchiyeedka marayo akhrinta koowaad.

⁸⁰ Qodobka 27nd "Kala Horreynta Howlaha Golaha" ciwaanku wuxuu ahaa "Siday Isugu Xigaan Howlaha Golaha". Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhliga 4nd kulanka 20nd ee 31/10/2018.

- 9) Hindisa sharchiyeedka marayo akhrinta labaad.
- 10) War-bixinta Guddiyada.
- 11) Hindisa sharchiyeedka marayo akhrinta sadexaad.
- 12) Mooshinada la keenay.
- 13) Wixii kale ee howl soo kordha (AOB).

Qodobka 28aad: Habka Doodda iyo Anshaxaa ee Xubnaha

- 1) Xildhibaan walba wuxuu xaq u leeyahay in si xor ah u cabiro lana xurmeeyo ra'yigiiisa marka laga dhex doodayo.
- 2) Xildhibaan kama hadli karo dooda haddii uusan fasax ka helin Guddoomiyaha.
- 3) Xildhibaankii la hadlaya Golaha waa in uu istagaa, haddii uusan awoodin Guddoomiyaha ayaa u ogolaan kara in uu fadhiba ku hadlo.
- 4) Dhamaan xildhibanada kale waa in ay aamusaan markii xildhibaan uu la hadlayo Golaha, Guddoomiyaha ayaana ogalaan kara in laga dhexgalo hadalka (point of order).
- 5) Iyadoo la fulinaayo amarka faqradaaha kor ku xusan, xubnaha waa in ay si hagaagsan ugu dhaqmaan qodobada soo socda:
 - a) Xubin kasta waxaa laga doonaya in ay fekerkeeda u cabirto si kooban oo cad, iyadoon ka baxayn qodobka laga hadlayo, laguna celcelin ereyo isku mid ah, ilaalinaysana waqtiga loo qarriray.

- b) Xubin walba waxaa waajib ku ah in ay run ka sheegto qodobka ay ka hadlayso.
- c) Waxaa waajib ku ah xubin kasta in uusan hadalkeedu xiisad kicineyn, khalkhalna gelineyn wadanka iyo shacabka.
- d) Xubin kasta waa in ay ilaalisaa sharafta iyo xasaanada aqalka, xubnaha iyo hay'adaha kale.

- e) Soo-jeedinta xubin walba waa in ay ku salaysan tahay mabaadiida iyo fekerada uu tageeraayo ama kaga hor imaanaya, iyadoo la dhawraayo xubnaha kale.
- f) Xubinta cabiraysa fekerkeeda laguma samayn karo gunuuunuc, qaylo, sacabbin, foori iyo wixii kale ee dhaqan xumo ah. Sidoo kale Golaha waxaa ka reebban sacab, qeylo, foori iyo wixii la mid ah gebi ahaanba⁸¹.
- g) Xubinna Golaha ma hor keeni karto ra'y'i aan waafaqsanayn ajendada xiliga fadhiga hortaal, hadaanu ogolaan guddomiyuhu.
- h) Xubinna kama bixi karto fadhiga, ka dib markii ay jeediso fekerkeeda.
- i) Xubinna kuma qaybin karto Golaha, qoraal uusan fasaxin guddomiyuhu.
- j) Waxaa ka reebban xubnaha in ay qalalaaso ka sameeyaan Golaha & agagaarkiisa.
- k) Waxaa reebban in xubnuhu u tanaagoodaan ama u il-jebiyaan martida fadhida.
- l) Waxaa reebban in laga baxo fadhiga marka guddomiyuhu hadlayso ama ay socoto cod bixin. Xildhibaanka ay ku

⁸¹ Qodobka 28nd, faqrada 5(0) XH-GSH-B10 "Xubinta cabiraysa fekerkeeda laguma samayn karo gunuuunuc, qaylo, sacabbin, foori iyo wixii kale ee dhaqan xumo ah". Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

caddaato arrintaasi wuxuu mutaysanayaan ganaaxa ku cad Qodobka 23 (15, & 16)⁸².

- m) Waxaa reebban in lala yimaado, calaamado, qoraalo, halkudhigyo (slogans) & dhawaaq muujinaya is hortaag howlaha Golaha.
 - n) Xilliga uu hogaaminayo guddomiyuhu shirka looma tegi karo waxna looma sheegi karo, xoghaynta aaya wixii qoraal ah loo marinayaan.
- 6) Xubintii rabta in ay hadal jeediso waxay raacaysaa talaabooyinkaan:
- a) Xubin walba waxay ku bilaabaysaa hadalkeeda “mahadsanid guddomiyeye”.
 - b) Waxay isticmaalaysaa “xildhibaan” marka ay tilmaamayso xubin kale, ama “mudane/murwo” marka ay sheegayso qof kale oo madaxda ka mid ah.
 - c) Xubintii rabta in ay hadasho waxay taageysaa gacanta iyadoo aan qaylin, kicin ama ficiil kale sameyn.
 - d) Xubinna ma hadli karto, calaamadna kuma muujin karto ra'yigeeda haduuusan guddomiyuhu u oggolaan.
 - e) Xubintii hadasha ayadoon guddomiyuhu u oggolaan wuu ka joojinayaan hadalka, wuxuuna hadalka siinayaan cidii ku xigtay.
- 7) Markii uu xildhibaan dhameeyo la hadlida waa in uu fadhigiisa ku noqdaa.
- 8) Xildhibaankii ku adkeysta in uu hadlo, ayadoon guddoomiyuhu fasixin oo uu xildhibaan kale la hadlaayo, guddoomiyuhu wuxuu amri karaa in uu ka baxo fadhiga.

⁸² Qodobka 28nd faqrada 5(l) XH-GSH-B10 “Waxaa reebban in laga baxo fadhiga marka guddomiyuhu hadlayo ama ay socoto cod bixin”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 9) Xildhibaankii caadeysta qas waxaa loo gudbinayaa Guddiga anshaxa.

Qodobka 29aad: Soo Bandhigidda Qoraalada (Laying of Papers)⁸³

- 1) Qoraal khuseeya arrimo khaas ah (sida warbixinada deegaamada, talo soo jeedin la xiriirta xaalad waddanka ku soo siyaadday, iwm) waxaa Golaha u soo bandhigi kara xildhibaan ama xildhibaanno.
- 2) Nuqulka qoraalka la soo bandhigayo, waa in loo qeybiyaa xildhibaanada ka dib marka uu guddoomiyuhu ogalaado.
- 3) Haddii shaqsiga soo bandhigaya qoraalka uu codsado inuu faafahin kooban ka sameeyo waa in loo ogalaadaa.
- 4) Warqadda la soo bandhigo waxaa loo diiwaan galinayaa in la soo bandhigay.

Qodobka 30aad: Daah-Furnaanta Fadhiyada Golaha

- 1) Fadhiyada waxay u furan yahiin dadweynaha haduusan goluhu si kale u go'aamin. Fadhiyada waa laga baahin karaa warbaahinta iyadoo la tixgalinayo go'aanka Golaha⁸⁴.
 - a) Qeybaha kala duwan ee bulshada (culimaa-u-diin, aqoonyahanka, dhalinyarada, haweenka, xisbiyada ama koox gaar ah), ayaa codsan kara inay goob-joog ka

⁸³ Qodobka 29^{aad}, “Soo Bandhigidda Qoraalada” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

⁸⁴ Qodobka 30^{aad} (1) ee “Daah-furnaanta fadhiyada Golaha” waxay u qornayd “Fadhiyada Golahawaxay u furanyahiin dadweynaha haduusan Golahasi kale u go'aamin. Fadhiyada waa laga baahin karaa warbaahinta iyadoo la tixgalinayo go'aanka Guddiga Arrimaha Golaha”. Waxaa loo badclay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018

ahaadaan fadhiyada arrin si gaar ah u khuseysa, ama fadhiyada arrimaha xasaasiga ah ee taabanaya mustaqbalka dadka, dalka, & diinta⁸⁵.

- b) Waxaa codsiga ka qeyb-galayaasha go'aan ka gaaraya Guddoomiyaha, isla markaasna faraya in lagu soo daro ajendaha⁸⁶.
- 2) Dadka kale ee loo ogolaaday in ay ka qeyb-galaan, waa in ay fadhiistaan meel khaas ah, oo ka soocan kuraasta xubnaha, waana in ay aamusnaadaan, mana muujin karaan calaamad aqbalaad ama diidmo. Habdhawraha ama ku xigeenadiisa ayaa markuu guddoomiyahu amro ka dib dibbeda u saaraya cidii u hogaansami wayda nidaamka Golaha.
- 3) Dadka loo ogolaaday in ay dhageysataan doodaha waa in ay haystaan kaarka martida, oo ay muujiyaan waqtii kasta, lagana aruuriyo dhamaadka fadhiga ama haddii dibedda loo saaro, sida ku xusan faqrada 2^{aad} ee qodobkaan.
- 4) Marti/dhageyste kasta oo u gefa sharafta iyo karaamada xubin ka tirsan Golaha, waxaa lagu wareejinaya saraakiisha amniga, si tallaabo sharciga waafaqsan looga qaado.
- 5) Goluhu wuxuu soo saari karaa xeer ku aadan hab-dhaqanka dadweynaha, wakiilada ka socda saxaafada iyo ciddii kale oo dhageysanaysa fadhiga⁸⁷.

⁸⁵ Qodobka 30^{aad} ee faqrada 1(a) ee “Daah-furnaanta Fadhiyada Golaha” waa cusub yihiin. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

⁸⁶ Qodobka 30^{ad}, faqrada 1(b) ee “Daah-furnaanta Fadhiyada Golaha” waa cusub yihiin. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

⁸⁷ Qodobka 30^{ad} (5) ee “Daah-furnaanta Fadhiyada Golaha” waxay u qornayd “Guddiga Joogatada Arrimaha wuxuu soo saari karaa xeer ku aadan hab-dhaqanka dadweynaha, wakiilada ka socda saxaafada iyo ciddii kale oo dhageysanaysa fadhiga Golaha. Guddoomiyaha Golahawuxuu ku amriyaa cidii u hogaansami waydo xeerkani in ay ka baxdo dhismaha Golaha. Hey'ada amniga ee Golaha Shacabka waa in ay islmarkiiba fuliyaan amar kasta ee kasoo baxa Guddoomiyaha Golahace arrintan kusaabsan”. Xarfaha (a&b) waxay ka sameymeen isla faqradaan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018

- a) Guddoomiyaha wuxuu ku amrayaa cidii u hogaansami weydo xeerarkani in ay ka baxdo dhismaha Golaha.
- b) Hay'adda amniga ee Golaha Shacabka waa in ay islamarkiiba fuliyaan amar kasta ee ka soo baxa Guddoomiyaha ee arrintan ku saabsan.

Qodobka 31aad: Noocyada Codeynta Golaha

- 1) Cod-bixinta waxay u dhaceysaa siyaabaha soo socda:
 - a) Cod-bixin gacan taag ah.
 - b) Cod-bixin qarsoodi ah.
 - c) Cod-bixin qoraal ah (magac u yeerid).
- 2) Cod-bixinta qarsoodiga waxaa loo sameynayaa sida soo socota:
 - a) Guddoomiyaha waa inuu diyaariyaa sanduuqa cod-bixinta.
 - b) Guddoomiyaha waa in uu sharxaa habraaca codeynta.
 - c) Guddoomiyaha waa inuu amraa u yeerista magacyada xubnaha iyo u qeybinta xubnaha xaashida lagu codeeyo.
 - d) Guddoomiyaha waa inuu xaqijiyyaa xubnaha codeeyey, kuwa ka aamusey iyo kuwa xumaaday, kadibna wuxuu ku dhawaaqaa natijjada cod-bixinta.
- 3) Cod-bixin qoraal (magac u yeerid) ah, waxaa la qabanayaa markuu Guddoomiyaha ama ugu yaraan 10-xubnood sidaas codsadaan, golahuna go'aankaas qaato. Marka la qaadayo cod-bixin qoraal ah (magac u yeerid), xubin kasta oo codeysa magaceeda hortiisa ayaa lagu qorayaa codkeeda (haa/maya) ama maqmaanshaheeda waana in lagu hor qoraa magaciisa/magaceeda oo buuxa.

- 4) Sharci ahaan, haddii codeynta mooshin la hor keenay Golaha ay barbar dhac noqoto, mooshinkaas ma meel marayo. Haddii cod-bixinta ay gacan taag tahay, Guddoomiyaha ayaa codeynayo si uu u kala saaro labada dhinac markay is bar bar dhac noqdaan.
- 5) Marka laga reebo cod-bixinta ku cad dastuurka ku-meel-gaarka ah & xeerhoosaadka, codeynta Golaha waa gacantaag, haddaan xildhibaan codsan in cod-bixinta laga dhigo qarsoodi ama magac-u-yeeris, goluhuna ogolaan sidaas⁸⁸.
- 6) Xubnaha jooga fadhiga, balse aan ka qeyb qaadan cod-bixinta waxaa loo xisaabinaya sida codadka xubnaha aamusay oo kale.
- 7) Inta looga dhawaaqayo natijada cod-bixinta, xubin ka tirsan looma ogola inay hadal u jeedisa Golaha.
- 8) Haddii la ogaado in ay jiraan khalad ku yimid cod-bixinta qarsoodiga ah, ama codadka la riday ay ka badan yihiin tirada xubnaha jooga, Guddoomiyaha wuxuu burinaya natijada cod-bixinta, wuxuuna isla markiiba qabanaya cod-bixin kaloo cusub. Natijada cod-bixin kasta waxaa ku dhawaaqaya Guddoomiyaha, isagoo sheegaya tirada codadka ogolaaday ama diiday iyo codadka hallaabay.

⁸⁸ Qodobka 31st (5) XH-GSH-B10 “Marka laga reebo cod-bixinta qarsoodiga ah iyo cod bixin magac u yeerid ah oo Goluhu ogolaaday sida ku qeexan dastuurka ama Xeer-hoosaadkan, dhammaan cod-bixinnaa kale ee caadiga ah waa gacan taag, waxaana la tiriyaaf safba mar”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

Qodobka 32aad: Keydinta & Xafidaada (Records) Kalfadhiyada Golaha

- 1) Hadal qoraalka (minutes) ayaa noqonaya keydinta rasmiga (official record) ah ee waxa uu qabtay goluhu, waxaana diyaarinayo Xoghayaha Guud⁸⁹.
- 2) Hadal qoraallada fadhiga waxaa saxiixaya xoghayaha Golaha Shacabka ee shaqada leh si u uu xaqiijiyo hadal qoraalka in uu saxan yahay.
- 3) Hadal qoraalada waxaa lagu xusayaa:
 - a) Lambarka kal-fadhiga⁹⁰
 - b) Lambarka fadhiga.
 - c) Waqtiga iyo goobta fadhiga lagu qabtay.
 - d) Cidda guddoominaysay fadhiga.
 - e) Xubnaha ka soo qeyb galay, haddii ay joogeen ilaa gabagabada fadhiga ama ay ka joogeen qeyb kaliya.
 - f) Xubnaha maqan ee fasax qaataay.
 - g) Xubnaha maqan ee aanan fasax qaadan.
 - h) Ajendaha maalintaas.
 - i) Soo koobidda arrimaha laga hadlay iyo go'aamada la qaataay fadhiyada.
 - j) Waqtiga la xiray fadhiga.
 - k) Go'aamada Guddoomiyaha ee la xiriira habraaca ogolaashaha soo-jeedimada inta uu fadhibgu socday.

⁸⁹ Qodobka 32aad (I) ee “Keydinta & Xafidaada (Records) Kalfadhiyada Golaha” waxay u qornayd “adal qoraalka (minutes) ayaa noqonaya keydinta rasmiga ah (official record) ee waxa uu qabtay waxaana diyaarinayo Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka. Waxaa loo badeloy sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiiga 4aad, kulanka 20aad ee 31/10/2018.

⁹⁰ Qodobka 32nd faqarda 3 (a) ee “Keydinta & xafidaada Kalfadhiyada Golaha” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiiga 4th, kulanka 20th ee 31/10/2018.

- 4) Hadal qoraalka fadhigaas, goluhu wuxuu ku ansixinayaan fadhiga xiga. Haddii la waayo xubin ka soo horjeeda, hadal qoraalka waxaa loo qaadanayaan in si wada jir ah loo ansixiyey. Kaliya xubnaha soo jeedinaya wax ka badal ama faahfaahin fikradooda ayaa ka hadli karo hadal qoraalka.
- 5) Nuqulka rasmiga (original copy) ah ee hadal qoraalka waxaa keydinayo Xoghayaha Guud ee Golaha.
- 6) Hadal qoraalka waxaa loola jeedaa keyd qoraal oo koobaya waxa laga hadlay.
- 7) Duubista codka ama muuqaalka waxaa loola jeedaa dhamaan duubista waxa laga yiraahdo fadhiyada buuxa iyo kuwa gudiyada.
- 8) Gaba-gabada fadhi kasta, hadal qoraallada iyo qoraallada kale (other records) waxaa lagu keydinayaan keydka iyo bogga internetka, loona fasaxaya dadweynaha sida uu sharciga farayo.

CUTUBKA 4AAD: GUDDIYADA GOLAHA

Qodobka 33aad: Xeerarka Guud Ee Guddiyada

- 1) Sida ku cad Qodobka 68^{aad} (2) ee dastuuurka, Golaha Shacabka ayaa samaysanaya gudiyada uu lagama maarmaan u arko si uu waajibaadkiisa u guuto⁹¹.

⁹¹ Qodobka 33^{ad} (1) ee “Xeerarka Guud ee Gudiyada” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulanka 21^{ad} ee 3/11/2018.

- 2) Golaha shacabku waxaa uu dhisayaa gudiyo, ayna ku jirin madaxda gudiyadu, isla markaana waxaa uu qeexaa waajibaadka shaqo ee gudiyadaas, kadib marka uu Guddoomiyaha Golaha shacabku soo jeediyoo asagoo la tashanaya ku xigeenadiisa, si waafaqsan xeer-hosaadka Golaha⁹².
- 3) Gudi kasta, wuxuu arrin khaas ah oo leh waqtii cayiman awgeed, ugu soo darsan karaa xubniiisa xildhibaan ama xildhibaanno aan horey uga mid ahayn Guddiga, kadib marka xubnaha gudigu arrintaas iskula qaataan codeyn aqlibayadda ah. Xubinta lagu soo daray gudi marxalad gaar ah awgeed, way ka qeyb gali kartaa fadhiyada Guddiga laakiin malaha xuquuqda codeynta ee arrimaha uu gudigu go'aanada ka gaarayo⁹³.
- 4) Marka ay jiraan duruufo, gudiyadu waxaa ay isla isticmaali karaan qalabka iyo adeegyada kale ee la heli karo.
- 5) Guddoomiyaha goluhu, asagoo la tashanaya ku xigeenadiisa, waxa uu magacaabaa gudiyo u xilsaaran in ay qabtaan howlo gaar ah, war-bixintoodana u soo gudbiya guddoonka Golaha Shacabka, si loo horgeeyo Golaha⁹⁴.

⁹² Qodobka 33nd (2), XH-GSH-B10 “Golaha Shacabku waxaa uu dhisayaa gudiyo, (ayna ku jirin madaxda gudiyadu), isla markaana waxaa uu qeexaa waajibaadka shaqo ee gudiyadaas, kadib marka uu Guddoomiyaha Golaha shacabku soojeediyoo asagoo la tashanaya ku xigeenadiisa”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

⁹³ Qodobka 33nd (3) ee “Xeerarka Guud ee Gudiyada” waxay u qorneyd “Gudi kasta, wuxuu arrin khaas ah oo leh waqtii cayiman awgeed ugu soo darsan karaa xubniiisa xildhibaan ama Xildhibaamno aan horey uga mid ahayn Guddiga, kadib marka xubnaha Gudigu arrintaas isla aqbalaan. Xubinta lagu soo daray Gudi marxalad gaar ah awgeed, way ka qeyb gali kartaa fadhiyada Guddiga laakiin malaha xuquuqda codeynta ee arrimaha uu Gudigu go'aanada ka gaarayo Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd kulanka 21st ee 3/1/2018.

⁹⁴ Qodobka 33nd, faqrada 5 (a&b) ee “Xeerarka Guud ee Gudiyada”, waxay ka sameysmeen faqrada 5nd Gudaheeda oo loo kala jaray si xigashada iyo fahamku u fududaado.

- a) Haddii hal shaqo ay ka wada dhaxayso dhowr gudi, Guddiga arrinka masuulka ka ah iyo gudiyada hawshu kala dhaxayso waa inay isku waafaqaan waqtii xaddidan oo ku haboon gudbinta aragtiyadooda.
- b) Haddii ayna gaarin waqtii xaddidan, waxaa waqtiga go'aaminaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka, isla guddoonka ayaana sidaas ku wargalinaya gudiyada.
- c) Haddii shaqo awgeed la isku daro gudiyo kala madaxbanaan, guddoomiyuhu wuxuu u xilsaarayaa mid ka mid ah ku xigeenadiisa inuu guddoomiyo kulamada gudiyada la isku daray⁹⁵.
- d) Xubin kasta oo ka mid ah Golaha wasiirada waa in ay ku jirtaa Gudi ka mid ah gudiyada joogtada ah ee Golaha, balse aan ahayn Guddiga toos u kor joogteeya wasaarada uu wasiir/wasiirudawle/wasiir ku xigeen ka yahay. Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa u dooraya Guddiga uu galayo asagoo tix galinaya doorashaddiisa isla markaasna inta uu xilka hayo qasab kuma aha in uu si joogta uga soo qayb galo kulamada Guddiga⁹⁶.
- 6) Dhismaha xubnaha gudi waxaa lagu salaynaya aqoonta, khibradda, dheellitirka & metelaadda bulshada (deegaamada & qeybaha bulshada), iyadoo xubnaha ka dhimanaada uu dhameystirayo Guddoomiyaha oo kala tashan kara labadiisa ku xigeen⁹⁷.

⁹⁵ Qodobka 33nd, faqrada 5 (c) waa ku cusub yahay ee "xeerarka Guud ee Gudiyada" wuxuuma Goluhu ansixiyey kalfadhiga 4nd kulankiisa 21nd ee 3/11/2018.

⁹⁶ Qodobka 33nd, faqrada 5 (d) waa cusub yahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

⁹⁷ Qodobka 33nd (6) ee "Xecarka Guud ee Gudiyada" Waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd kulankiisa 21nd ee 3/11/2018

7) Gudiyada xiriirada baarlamaanada dunida & saaxiibtinimada⁹⁸:

- a) Golaha shacabku wuxuu abuuraya Gudiyada xiriirada golayaasha baarlamaanada dunida iyo baarlamaanada dalalka saaxiibka ah.
- b) Gudiyada xiriirada baarlamaanada dunida iyo dalalka saaxiibka ah waxay ku dhaqmayaan xeerka iyo nidaamka u degsan gudiyada joogtada ah ee Golaha Shacabka sida ku cad xeerhoosaadka Golaha.
- c) Guddoonka goluhu wuxuu xaq u leeyahay inuu kala diro Gudiyada xiriirada baarlamaanada dunida iyo saaxiibtinimada, isla markaana dib-u-dhiso iyo inuu wax ka baddel ku sameeyn karo xilli kasta.
- d) Gudiyada xiriirada baarlamaanada dunida iyo saaxiibtinimada waa inay Golaha keenaan warbixino howleed oo la xiriira kulamada iyo safarada ay u baxaan.
- e) Gudomiyaha oo la tashanaya ku-xigreenadiisa, tixgalinaya faqrada 6^{aad} isla qodobkan waxuu magacabay qofka hogaminaya Guddigaas oo leh aqoon iyo khobarad kuna hadlaya ugu yaraan mid ka mid ah luqadaha looga hadlayso baarlamaankaas.

Qodobka 34aad: Waajibaadka Gudiyada Golaha Shacabka

Waajibaadka shaqo ee gudiyada Golaha Shacabka, marka lagu daro shaqooyinka ayaga u khaaska ah ee xeer-hoosaadkani farayo, waxay ahaanayaan sida soo socota.

1) Inay fuliyaan shaqo kasta oo uu Golaha shacabku u xilsaaro.

⁹⁸ Qodobka 33^{ad} (7) waa cusub tahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 2) Inay baaraan, ka doodaan, talana ka soo bixiyaan sharchiyada qabyada ah ee la hor keeno Golaha Shacabka.
- 3) Inay keenaan sharci kasta oo qabyo ah, ama qaraaro qabyo ah, oo ku saabsan waxyabaha ay shaqadoodu tahay, marka laga reebo hindise sharchiyeed la xiriira miisaaniyadda sanadlaha ah, iyadoo ay isku raaceen aqlabiyyada Guddiga⁹⁹.
- 4) Inay Golaha Shacabka u soo jeediyaaan sharchiyo qabyo (hidiso sharchiyeed) ah, oo ay tahay in xukuumada loo faro in ay kafaalo qaado.
- 5) Inay talo siiyaan Guddiga misaaniyada iyo maaliyadda, lacagta iyo illaalinta hantida qaranka arrimaha ku saabsan mudnaanta miisaniyadeed ee wasaaradaha ama hay'adaha kale ee shaqadooda hoos timaado.
- 6) Inay baaraan talana ka bixiyaan siyaasadaha saameynta ku leh wasaaradaha gudiyada shaqadu kala dhaxeyso.
- 7) Inay ka talo bixiyaan ama ay caddeeyaan arrimaha Golaha shacabku u soo gudbiyo.
- 8) Inay keenaan dodo barlamaanku ka yeesho oo ah arrimaha faa'idadu ugu jirto umadda.
- 9) Inay qiimeeyaan, kormeeraana habka loo qabto iyo habka loo hirgaliyo sharchiyada iyo qorshayaasha xukuumadda iyo hay'adaha ama koox kasta oo ay sharci ahaan shaqo kala dhaxeyso.

⁹⁹ Qodobka 34nd, (3) XH-GSH-B10 “In ay keenaan sharci kasta oo qabyo ah, ama qaraaro qabyo ah, oo ku saabsan waxyabaha ay shaqadoodu tahay, marka laga reebo hindise sharchiyeed la xiriira miisaaniyadda sanadlaha ah, iyadoo ay isku raaceen ugu yaraan10-xubnood oo Guddiga ah”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 10) Inay dib-u-eegis ku sameeyaan qorshaha kharashaadka waqtiga dhow, dhexe iyo kan fog-ba ee ha'yadda ama ha'yadaha loo xilsaaray.
- 11) Inay bilaabaan baaritaan la xiriira shaqada gudi kasta u xilsaaran yahay.
- 12) Inay sameeyaan cilmi baaris ku saabsan shaqada gudi kasta u xilsaaran yahay.
- 13) Inay sameeyaan dadaal kasta oo ay kula falgelayaan kuna kasbanayaan bulshada rayidka ah.
- 14) Inay Golaha Shacabka ku wargaliyaan shaqooyinkooda.
- 15) Si loo ilaaliyo hufnaanda wada shaqaynta gudiyada iyo wasaradaha ama hayadaha kale ee shaqadu kala dhaxayso, waa in xirirku noqdaa mid qoraal ah oo¹⁰⁰.
 - a) Ay ku caddahay waxa gudigu dalbanayo.
 - b) Guddoonka loo sii marsiiyaa oggaysiin.
 - c) Haddii ay jirto gudi kale ee Golaha ama hay'ad /wasarad ay muhiim tahay in la sii ogaysiyo.
 - d) Guddoomiyaha gudigu ku saxiixan yahay ama qofkii markas jooga booska gudomiyaha si wafaqsan Xeerhoosadka Golaha.

¹⁰⁰ Qodobka 34nd (1.5) waa faqro cusub. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

Qodobka 35aad: Guddoona Guddiyada

- 1) Gudi kasta ee Golaha Shacabka waa inuu yeeshaa guddoomiye, guddoomiye ku xigeen iyo xoghayn oo ah hoggaanka Guddiga.
- 2) Xubin kasta oo ka mid ah guddoonka Guddiga, waa in laga dhix doortaa xubnaha Guddiga dhixdooda, laguna doortaa cod aqlabiyyad ah oo ka yimid xubnaha Guddiga.
- 3) Guddoomiyaha Guddiga ayaa saxiixaya go'aanada Guddiga. Haddii Guddoomiyaha maqan yahay waxaa shaqadiisa qabanaya guddoomiye ku-xigeenk, haddii labadooda maqanyihii waxaa howshooda qabanaya xoghayaha Guddiga, haddii isana maqan yahay, gudigu qof ayay iska dooranayaan oo sii wada howsha Guddiga, waxaana la ogaysiinaya Guddoomiyaha Guddiga.
- 4) Haddii Guddoomiyaha Guddigaasi uu soo gudbiyo istiqaalo qoraal ah, haddii uu dhinto, haddii ay ku timaado xil gudasho la'aan joogto ah, ama uu si joogto ah uga maqnaado kulamada, gudigu waxaa uu arrinkaas ku wargalinaya Guddoomiyaha Golaha si ay u u doortaan guddoomiye cusub.
- 5) Faqradda 4^{aad} ee qodobkaan, waxay sidoo kale saameeynasaa guddoomiye ku-xigeenk, iyo xoghaynta Guddiga.

Qodobka 36aad: Guddiga Joogtada ee Golaha

- 1) Guddiga Joogtada ee goluhu wuxuu ka koobnaanayaa: Guddoomiyaha, labada guddoomiye-ku-xigeen, habdhowraha iyo labadiisa ku-xigeen iyo guddoomiyayaasha gudiyada joogtada ah.
- 2) Guddoomiyaha ayaa guddoominaya Guddiga Joogtada ah.
- 3) Xilka iyo waajibaadka Guddiga Joogtada ah waa sida soo socota:
 - a) Wuxuu diyaariyaa isla markaana maamulaa barnaamijyada iyo howlaha kalfadhiyada Golaha.
 - b) Wuxuu diyaariyaa isla markaana maamulaa jadwal-qorsheedka fadhiga Golaha.
 - c) Guddiga Joogtada ahi waxuu u gudbiyaa Guddoomiyaha iyo ku xigeenadiisa waxii war bixin ah ee ku saabsan wax qabadka iyo baahida gudiyada Golaha Shacabka, sidoo kale waxay u gudbiyaan Guddiga waxii qorsho howleed ah ee ka soo baxa guddoonka, ayadoo loo marsiinayo guddoomiya kasta gudigiisa in uu gaarsiyo ama ka warbixiyo¹⁰¹.
 - d) Illaa iyo inta laga dhisayo xafiiska Guddiga Adeegga Baarlamaanka (PSC), wuxuu diyaarinayaa miisaniyadeedka sanadeedka Golaha Shacabka, una gudbinayaa Golaha Shacabka si loo ansaxiyo, islamarkaana xakameyn miisaaniyadeed loogu sameeyo hawlaho dhaqaale ee Golaha.

¹⁰¹ Qodobka 36^{aad} 3 (c) oo u qornayd sidatan “wuxuu xiriiriyaa howlaha iyo Gudiya Golaha” waxaa loo baddelay sida kor ku qoran, Goluhuna wuxuu ansixiyey kalfadhiigii 3^{aad}, kulankii 18^{aad} ee 22/10/2013.

- e) Wuxuu go'aan ka gaaraa, qeybiyaana miisaaniyad sanadeedka shaqo ee gudiyada Golaha.
 - f) Wuxuu tixgaliyaa barnaamijka shaqo ee gudiyada, oo ay ka mid yihiin haddii loo baahan yahay socdaal iyo kulamo lagu qabanayo meelo ka baxsan dhismaha Golaha.
 - g) Wuxuu ka doodaa, go'aanna ka gaaraa warbixinta gudiyada ee looga doodi doono Golaha.
 - h) Guddoomiyaha ayaa magacaabaya Xoghayaha Guud ka dib markuu kala tashto ku-xigeenadiisa.
- 4) Marka Guddiga Joogtada ahi codeynayo, gudi kasta wuxuu leeyahay hal cod, waxaana u codeynaya Guddoomiyaha, haddii guddoomiyuhu maqan yahay guddoomiye ku-xigeenka, haddii isna maqan yahay waxaa codeynaya xoghayaha, haddii ay wada maqan yihiin, xubinta Guddiga ah ee uu guddoomiyuhu u soo wakiisho inuu kulanka ku matelo Guddiga ayaa codeynaya¹⁰².

Qodobka 37aad: Guddi Hoosaadyada

- 1) Guddigu waa inuu abuurtaa gudi-hoosaadyo, marka uu u arko in ay tahay muhiim, si ay howshu ugu fududaato.
- 2) Gudi-hoosaadku waa inuu helo awood buuxda, ayadoo la eegayo waajibaadka uu faray gudigu.
- 3) Xubnaha gudi-hoosaadku waa xubno ka mida Guddiga caadiga ah.

¹⁰² Qodobka 36^{aad} (4) ee "Guddiga Joogtada ah" waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

- 4) Iyadoo la tixraacayo howl khaas ah ee gudi-hoosaadku leeyahay, gudigu waxaa uu u caddayn karaa taariikhda ay tahay in gudi-hoosaadku uu ku soo celiyo war-bixintiisa.
- 5) Marka gudi-hoosaad loo xilsaaro inuu arrin cayiman daraaseeyo, gudi-hoosaadkaan jiritaankiisu waxaa uu ku egyahay kadib, markuu keeno warbixintiisa ugu danbeysa.
- 6) Marka gudigu ka helo Guddi-hoosaadka warbxinta ugu danbeysa, gudigu waa inuu darsaa, ansixiyaana warbixintaa kama-danbeysta ah, isla mar ahaantaana waa in Guddoomiyaha gudigu u gudbiyaa Golaha Shacabka. Gudi-hoosaadyadu awood uma laha in ay toos ugu gudbiyaan Golaha Shacabka war-bixintooda.
- 7) Gudi-hoosaadku kama garab furi karo kulan ayadoo uu socdo kulankii Guddiga.

Qodobka 38aad: Qorsheyaasha Shaqo iyo Qoondeynta Miisaaniyadda Guddiga

- 1) Guddoomiyuhu asaga oo la tashanaya xubnaha kale ee Guddiga, waa inuu diyaariyo bilowga sanad kasta, ugu danbeyn bisha sadexaad kowdeeda (1-maарso), qorshaha shaqo iyo howlaha Guddiga, tasoo ay ka mid noqon karto abuurista gudi-hoosaadyada, qorshaha shaqada waa inuu ansixiyaa gudigu.
- 2) Gudigu waa inuu qiimeeyaa qorshaha shaqo ee wasaaradda shaqadu kala dhexeyso seddexdii biloodba mar, haddii ay muhiim noqotana wax bey ka badali karaan qorshahooda.

- 3) Gudigu waa inuu diyaariyaa oo ansixiyaa qorshe-howleed sanadle ah oo lagu kor-joogteynayo in wasaaradda ama hay'adda kale ee qaranka ay dhaqan gelisay sharciyada, oo ay ku jiraan la socoshada dhamaan howlaha wasaaradda, taasoo qeyb ka ah qorshaha hawleedka Guddiga¹⁰³.
- 4) Gudiyada waa in ay helaan adeegyada khubarada, xirfadlayasha, shaqaalaha farsamada iyo kaaliyeyaasha xafisiyada, hadba sidi u gudigu u arko in ay tahay muhiim, hadba inta ay awood u siinayso miisaaniyadda uu u ansixiyey Golaha shacabku.
- 5) Gudiyada waa in awood loo siiyo in ay u safraan meel ka baxsan xarunta Golaha Shacabka, si ay u soo dhageystaan caddaymo, u sameeyaan la-tashiyo ama ay booqdaan goobo la xiriira baaristooda.
- 6) Xoghayaha Guddiga, waxaa uu u xilsaaran yahay diyaarinta dhamaan safarrada Guddiga, sida uu ugu sheego Guddoomiyaha guddigu.
- 7) Guddoomiyaha gudi kasta, asagoo la tashanaya xubnaha kale ee Guddiga, waa inuu diyaariyaa miisaaniyadda sanadka soo socda oo ku saleysan qorshahooda shaqo, waana inuu u soo gudbiyaa xafiiska Guddiga Joogtada Golaha Shacabka, si loo ansixiyo. Gudigu waa inuu ansixiyo miisaaniyadiisa ugu danbeyn bisha sedexaad kowdeeda (1-Maарso).
- 8) Miisaniyadda waa in ay ku jiraan, aanayse ku xadidnaan:

¹⁰³ Qodobka 38nd (3) ee "Qorsheyaasha Shaqo & Qoondeynta Miisaaniyadda Guddiga" waxay u qorneyd "Gudigu waa inuu diyaariyaa oo ansixiyaa qorshe-howleed sanadle ah oo lagu kor-joogteynayo in wasaaradda ama hay'adda kale ee qaranka oo arrinta shaqada ku leh ay dhaqangelisay sharciyada, oo ay ku jiraan la socoshada dhamaan howlaha wasaaradda, taasoo qeyb ka ah qorshaha hawleedka Guddiga". Waxaa loo qoray sida kor ku xusan waxaana Goluhu ansixiyey kalfadhliga 4th kulanka 21st ee 3/11/2018.

- a) Kharashka helida adeegyada khubarada, xirfadlayaasha, shaqaalaha farsamada iyo kaaliyayaasha xafiisyada, hadba sida loo arko in ay muhiim u yihiin.
 - b) Kharashka safarrada xubnaha Guddiga ama xubanaha shaqaalaha ee la xiriira shaqada Guddigaan sida sharcigu u ogol yahay.
 - c) Kharashyadaas waxaa kamid ah, kan raacista gaadidka, cuntada, gunno maalmeedka, hoyga xubnaha, kirada qolalka shirarka, adeegayada tarjumaadda, iyo kharashaadka kale sida saadka, dirista dhambaallada iyo waraaqaha, iibsashada qoraallada iyo qalabka kombuyutarrada (IT), & adeega cabitaanka/qaboojiyeyaasha.
- 9) Kharashaadka gudigu waa in aysan ka hor imaan xadeynta cayiman ama sharciyada.
- 10) Codsiga ogolaanshaha safarka waa in hab qoraal ah loogu soo gudbiyyaa xafiiska isagoo caddeynaya:
- a) Ujeedada safarka;
 - b) Taariikhda safarka;
 - c) Meesha loo safrayo;
 - d) Magacyada xubnaha safraya;
 - e) Qiimaha ku baxaya Safarka
- 11) Gudigu waa inuu diyaariyaa, Golaha Shacabka-na u gudbiyyaa warbixin qoran oo ku saabsan safar kasta oo gudigu galoo ee ku xusan qodobkaan. Warbixintu waa in ay ku jirto faahfaahinta safarka, kharashaadka, howlaha, warbixinada la helay iyo go'aanada lagu gaaray safarka.

- 12) Tixgalinta sharchiyada qabyada ah waa in ay lahaadaan mudnaanta koowaad ee gudiyada oo dhan, waana in ay ka hormaraan daraasadaha iyo baaritaanada kale oo dhan.

Qodobka 39aad: Shaqaalaha Guddiyada

- 1) Golaha Shacabka waa inuu siiyaa gudiyada shaqaale maamul iyo mid farsamoba.
- 2) Marka Guddiga la siiyo shaqaale taageera, xoghayaha Guddiga ayaa kormeeraya shaqaalalahaa maamulka ee Guddiga.

Qodobka 40aad: Qoraallada Guddiga

- 1) Xeerarka khuseeya qoraallada Golaha Shacabka, marka lagu sameeyo is-beddello (adjustment) laga maarmi waayo, waxay saameyn ku yeelanayaan qoraalada gudiyada.
- 2) Hadal qoraalka shirarka (Minutes) gudiyada waa in loo qoraa hab la mida kuwa shacabka. Waxaa u sii dheer arrimaha hoos ku xusan.
 - a) Haddii shirka uu ahaa mid furan ama mid xiran.
 - b) Magacyada shaqaalaha goob-joog ka ahaa.
 - c) Magacyada marqaatiyaalka, masu'uliyadooda iyo hay'adaha ay ka kala socdaan, haddii ay jiraan.
- 3) Hadal qoraalka waa in ay ku saxiixan yihiin xoghayaha iyo xogheynta Guddiga.

- 4) Warbixinnada Guddiga ee loo gudbinayo Golaha Shacabka waxay noqonayaan kuwa kooban, markasta waa inay daabacan yihiin, mid walba isku dheggantahay, iyada oo gaarkeeda ah¹⁰⁴.
- 5) Hadal qoraalka shirarka gudiyada oo maqal iyo muqaal ah waa la sameyn karaa haddii sidaas gudigu go'aansado.

Qodobka 41aad: Kulamada Guddiyada

- 1) Gudiyadu waa in ay si joogto ah u kulmaan ugu yaraan labo jeer bishiiba, waqtiyada lagu jiro kalfadhiyada Golaha Shacabka, waqtiyada kulamada waxaa goynaya Guddoomiyaha, ama waxaa tala ka soo jeedinaya Golaha.
- 2) Guddi walba xaq buu uu leeyahay in uu kulmo xitaa marka kalfadhiga ay xiran yihiin.
- 3) Guddi kulan kale ma yeelan karo (kama garab furi karo kulan kale), ayada oo uu socdo kulan Golaha Shacabka, haddii uuna ka helin ogolaansho Guddoomiyaha Golaha.
- 4) Marka uu helo codsi ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan saddex meelood meel (1/3) xubnaha Guddiga, guddoomiyuhaha Guddiga waa inuu qabtaa kulanka mudo ku siman tobantoban (10) maalmood gudahood oo maalmo shaqa ah, ayadoo xubnaha Guddiga lagu wargalinayo jiritaanka kulankaa ugu yaraan 48-saacadood ka hor. Sababta loo qabanayo kulankaana waa in lagu cadeeyaa wargalinta.

¹⁰⁴ Qodobka 41^{aad} (4) ee "Qoraallada Guddiga" waxay u qorneyd "Warbixinnada Guddiga ee loo Gudbinayo Golaha Shacabka waxay noqonayaan kuwa kooban, ooh al bog ah, waana ay ka badnaan karaan, markasta waa inay daabacan yihiin mid walbina isku dheggantahay iyada oo gaarkeeda ah" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

- 5) Kadib marka uu Guddoomiyaha gudigu amro, xoghayuhu waa inuu siiyaa xubin kasta oo ka mid ah Guddiga ogaysiin ku saabsan kulankaas ugu yaraan afartan iyo sideed (48) saacadood ka hor kulanka, ogaysiiskaasi waa inuu ku cad yahay ajendaha shirka, waqtiga iyo goobta lagu kulmayo.
- 6) Xoghayuhu waa inuu shir walba oo gudigu leeyahay qoraal ahaan ugu wargeliyo guddomiya Golaha Shacabka.
- 7) Guddoomiyaha gudigu waa inuu siiyaa xubin kasta oo kamid ah Guddiga wax alaale wixii qoraallo ah (documents) ee la xiriira ajendaha kulanka.
- 8) Markasta oo ajenda kamid ah ajendayaasha kulanka uu quseeyo wasaarad, Guddoomiyaha gudigu waa inuu xaqqiiyiha in wasaarada shaqada ku leh, la gaarsiyyay ogaysiin ku saabsan kulanka Guddiga, ugu yaraan afartna iyo sideed saacadood (48) ka hor, haddii ayna gudigu go'aansan si kale (sida inaan la ogeysiin wasiirka jiritanka kulanka).

Qodobka 42aad: Kulamada Khaaska ah iyo Kuwa Guud¹⁰⁵

Shirarka gudiyadu waxay noqonayaan mabda' ahaan kuwa u furan dadweynaha marka laga reebo xilliyada uu gudigu:

- 1) Ka doodayo arrimo qarsoodi ah oo taabanayo amniga dalka.
- 2) Ka doodayo faafaahin ku saabsan qandaraas ganacsi oo ay ku lug-leeyihii hay'adaha Jamhuuriyada Soomaalia iyo cid seddexaad oo looga hadlayo arrimo qandaraas oo qarsoodi ah.

¹⁰⁵ Qodobka 42nd "kulamada Khaaska ah & Kuwa Guud" waa qodob Jumlo ahaan uga tirsanaa Qodobka "Kulamada Gudiyada". Waa la qodobceyey oo waxaa la siiyey Lambar si xigashada iyo fahamku u fududaado. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd kulankiisa 21nd ee 3/11/2018

- 3) Diyaarinayo talo soo-jeedin qabyo qoraal ama dhameystiran oo ay ka mid yihiin qoritaanka warbixinta muhiimka u ah Golaha.
- 4) Uu sidaa go'aansado iyadoo lagu saleynayo codka aqlabiyyadda xubnaha Guddiga.

Qodobka 43aad: Ajendaha Kulamada Guddiyada¹⁰⁶

- 1) Guddoomiyaha gudigu asagoo la tashanaya xubnaha Guddiga waa inuu go'aamiyaa ajenda kulanka.
- 2) Guddoomiyuhu waa inuu qoraa ajendaha kulanka, asagoo tixraacaya qorshaha shaqo ee Guddiga iyo kan Golaha Shacabka.
- 3) Gaba-gabada kulan kasta oo uu yeesho gudigu, waa in gudigu ka doodaa waxa uu ku saabsan yahay kulanka xiga ee gudigu yeelan doono, waana in ay diyaariyaan nuqulka ajendaha ee kulankaas.
- 4) Kadib marka uu guddoomiyuhu helo codsi ku aadan arrin ay tahay in laga dodo oo ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan saddex meelood meel (1/3), xubnaha Guddiga, waa in uu guddoomiyuhu arrintaas ku daro ajendaha.
- 5) Guddigu waxaa uu ku badali karaa ajendaha cod aqlabiyyad ah.

¹⁰⁶ Qodobka 43aad “Ajendaha Kulamada Gudiyada” waa qodob Jumlo ahaan uga tirsanaa Qodobka “Kulamada Gudiyada”. Waa la qodobceyey oo waxaa la siiyey Lambar si xigashada iyo fahamku u fududaado. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018.

Qodobka 44aad: Soo Xaadrista Kulamada Gudiyada¹⁰⁷

- 1) Haddii xubinta oo aan fasax ka helin Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiyaha Golaha Shacabka, uu ka maqnaado saddex (3) kulan oo isku xiga ama teel teel ah, ama uuna kasoo qeyb galin kulamada Guddiga oo dhan muddo laba (2) bilood ah, waxaa xubintaas loo gudbinaya Guddiga xeer hoosaadka, daryeelka, anshaxa iyo xasaanadda¹⁰⁸.
- 2) Haddii guddoomiye ku-xigeenka Guddiga iyo xoghayulu, ayagoo aan ogolaansho ka haysan Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Guddoomiyaha Guddiga ay ka maqanaadaan afar kulan oo isku xiga ama teelteel ah, ama kulamada gudigu yeesho oo dhan, labo biloood, waxaa si dhaqso leh loogu gudbinaya Guddiga xeer hoosaadka, daryeelka, anshaxa iyo xasaanadda¹⁰⁹.

¹⁰⁷ Qodobka 44^{aad} “Soo Xaadrista Kulamada Gudiyada” waa qodob Jumlo ahaan uga tirsanaa Qodobka “Kulamada Gudiyada”. Waa la qodobceyey oo waxaa la siiyey Lambar si xigashada iyo fahamku u fududaado. Goluhu wuxuu isla ogoladay kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

¹⁰⁸ Qodobka 44^{aad} (1), XH-GSH-B10 “Haddii xubinta oo aan fasax ka helin Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiyaha Golaha Shacabka, uu ka maqnaado lix kulan oo isku xiga, ama uuna kasoo qeyb galin kulamada Guddiga oo dhan muddo ka badan sadex bilood, waxaa xubintaas loo gudbinaya Guddiga xeer hoosaadka, daryeelka, anshaxa iyo xasaanadda”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

¹⁰⁹ Qodobka 44^{aad} (2), XH-GSH-B10 “Haddii Guddoomiye ku-xigeenka Guddiga iyo xoghayulu, ayagoo aan ogolaansho ka haysan Guddoomiyaha Golaha shacabka iyo Guddoomiyaha Guddiga ay ka maqanaadaan afar kulan oo isku xiga, ama kulamada gudigu yeesho oo dhan, waqtii ka badan labo biloood, waxaa si dhaqso leh loogu gudbinaya Guddiga xeer hoosaadka, daryeelka, anshaxa iyo xasaanadda”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 3) Haddii Guddoomiyaha Guddiga asagoo aan ka haysan ogolaansho Guddoomiyaha Golaha Shacabka, uu ka maqnaado laba (2) kulan oo isku xiga ama kulamada uu yeesho gudigu waqtii ka badan hal (1) bil, waxaa si dhaqso leh loogu gudbinayaa Guddiga xeer hoosaadka, daryeelka, anshaxa iyo xasaanadda¹¹⁰.
- 4) Xoghayaha Guddiga waxaa laga doonayaa inuu ku wargaliyo Guddiga marka ay jiraan ama ay muuqdaan arrimaha ku xusan (1, 2 &3) ee qodobkaan.
- 5) Xubintii lumisa xilka ay Guddiga u heysay wuxuu noqonayaa xubin Guddiga ka tirsan, waana inuu soo xaadiraa kulamada Guddiga, haddii aan guddoonka goluhu go'aan kale ka qaadan isagoo la tashanaya Guddiga xeerhoosaadka¹¹¹.
- 6) Xoghayaha gudigu waa inuu bil walba u gudbiyo foomamka xaadiridda Guddiga xafiisyada ay khuseyso isagoo waafaqaya habraaca, faqrada 19^{aad}, ee qodobka 23^{aad} ee xeerhoosaadka¹¹².

Qodobka 45aad: Habka Kulamada Guddiyada

- 1) Kulamada gudiyada waa inuu guddoomiyo Guddoomiyaha gudigu.

¹¹⁰ Qodobka 44^{aad} (3), XH-GSH-B10 “Haddii Guddoomiyaha Guddiga asagoo aan ka haysan ogolaansho Guddoomiyaha Golaha Shacabka, uu ka maqnaado afar kulan oo isku xiga ama kulamada uu yeesho gudigu waqtii ka badan laba bilood, waxuu weynayaa xilkii guddoomiyenimada”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

¹¹¹ Qodobka 44^{aad} (5) ee “Soo Xaadirista Kulamada Guddiga” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

Qodobka 44^{aad} (5), XH-GSH-B10 “Xubintii lumisa xilka ay Guddiga u heysay wuxuu noqonayaa xubin Guddiga ka tirsan, haddii aan guddoonka goluhu go'aan kale ka qaadan, waana inuu soo xaadiraa kulamada gudiyada”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

¹¹² Qodobka 44^{aad} (6), waa cusub tahay, Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 2) Haddii uu maqanyahay Guddoomiyaha gudigu, guddoomiye-ku-xigeenka ayaa qabanaya shaqadii Guddoomiyaha.
- 3) Guddoomiyaha waa inuu maamulaa doodaha Guddiga, asagoo xaqiisnaya (afoon sanaya) qof kasta oo hadlaya, xaqiijinayana in waxyaabaha laga doodayo ay waafaqsan yihin sharchiyo iyo xeerar jira.
- 4) Guddoomiyuhu waa inuu xaqiisadaa qofka uu yahay, ka hor inta aaney hadlin xubnaha Guddiga.
- 5) Guddoomiyuhu waa inuu u ogolaado xubnaha, in ay u hadlaan sida ay ugu kala horeeyaan codsiga ah in ay hadlaan.
- 6) Haddii nidaamka kulanka aan la ilaalim, guddoomiyuhu waxaa uu joojin karaa kulanka.
- 7) Xubnaha Guddiga waxay iska-dhex-dooranyaan guddoomiye haddii guddoonku ka maqnaadaan shirka Guddiga.
- 8) Karraaniga Guddiga ayaa ka mas'uul ah qaadista qoraallada (minuts-ka) kulanka, galeynta/xifidida, helidda iyo ka qaadista qoraallada xafiiska Guddiga, fududeynta xiriirkha Guddiga iyo xukuumadda. Guud ahaana xoghayaha ayaa la soconaya hirgalinta go'aamada gudigu gaaro.
- 9) Xogheynta Guddiga ayaa u xilsaaran kormeerka karraaniga (clerk) ee Guddiga.

Qodobka 46aad: Guntanka Guddiyada¹¹³

- 1) Inta badan ee xubnaha Guddiga ayaa ah kooramka.

¹¹³ Qodobka 46^{aad} ee “Guntanka Gudiyada” waa qodob Jumlo ahaan uga tirsanaa Qodobka “Habka Kulamada Gudiyada”. Waa la qodobceyey oo waxaa la siiyey Lambar si xigashada iyo fahamku u fududaado. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

- 2) Waxaa loo baahan yahay in uu kooramku dhan yahay marka gudigu go'aan gaarayo¹¹⁴.

Qodobka 47aad: Codeynta Guddiyada¹¹⁵

- 1) Go'aanada Guddiga waxaa la gaaraa, ayadoo la raacayo ansixinta mooshin ku yimaada cod aqlabiyyad ah, oo ay ku codeeyaan inta badan xubnaha jooga oo codeynaya.
- 2) Haddii uu codku nodqo bar-bar dhac, halka uu Guddoomiyaha codkiisu raaco ayaa la ansixinayaa.
- 3) Gaba-gabada dooda ee arrin laga doodi karo, haddii talo la soo-jeediyo, Guddoomiyaha ayaa u aqrinaya Guddiga qodobka la soo-jeediyay, waxaa uuna weydiinayaa in ay aqbalaan in laga doodo iyo in kale.
- 4) Haddii uu jiro khilaaf cad oo ku saabsan ka-doodis soo-jeedin la keenay oo u dhixeyya Guddiga, guddoomiyuhu waxaa uu ugu baaqayaa Guddiga inay cod u qaadaan arrinkaas.
- 5) Xubnaha gudigu waxay u codeynayaan ayagoo taagaya gacanta, tirada codadkaas dhinac kastana waa in lagu qoraa ama lagu sheegaa hadal-qoraalka kulanka Guddiga.
- 6) Xubin ka mid ah Guddiga waxa ay codsan kartaa cod bixinta oo qoran/diwaangashan, waa haddii codsigaasu yimaado ka hor intii aan loo guda gelin codeynta.

¹¹⁴ Qodobka 46^{ad} (2) ee “Guntanka Gudiyada” waxay u qornayd “Waxaa loo baahan yahay inuu Kooramku dhan yahay marka Gudigu go'aan ka gaarayo cod, Qaraar ama go'aan. Waxaa loo badel sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiisa 21^{ad} ee 3/11/2018

¹¹⁵ Qodobka 47^{ad} “Codeynta Gudiyada” waa qodob Jumlo ahaan uga tirsanaa Qodobka “Habka Kulamada Gudiyada”. Waa la qodobceeyey oo waxaa la siiyey Lambar si xigashada iyo fahamku u fududaado. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiisa 21^{ad} ee 3/11/2018

- 7) Haddii xubin kamid ah Guddiga ay codsato in codeynta la qoro, xoghayaha Guddiga waa inuu yeeriyaan ama aqriyaa magacyada xubnaha, sida ay ugu kala horeeyaan xaraf ahaan, xubin kasta waxaa uu ku jawaabayaa “haa” ama “maya”, natijada codkana waxaa ku dhawaaqa xoghayaha Guddiga. Guddoomiyaha Guddiga, waxaa uu cadeeyaa in soo jeedintaas (motion kaas) la ansixiyey (la aqbalay) iyo in la diidey. Natijada iyo magacayada xubnaha ogolaaday iyo kuwa diidayba waxaa lagu sheegayaa ama lagu qorayaa hadal qoraalka (minutes) kulanka.
- 8) Xoghayuhu waa inuu xaqiijiyaan in go'aamada gudigga loo diro guddoonka Golaha.

Qodobka 48aad: Dhageysiga Dadweynaha¹¹⁶

- 1) Si loo helo warbixino la xiriira arrinta gudigu ka doodayo, gudigu waxaa uu qaban karaa kulamo furan oo ay dhageysanayaan khabbiiro, wakiillo ka socda ururrada bulshada rayid ka ah, iyo shaqsyaad kale ee keeni kara warbixino muhiim ah.
- 2) Marka shaqo loo xilsaaro gudi, si uu uga dodo, Guddiga arrintaa masuulka ka ahi waa inuu ogolaadaa inuu qabto kulan dadweynuhu dhageysanayaan, haddii afar-meelood (1/4) oo meel xubnaha Guddiga ay sidaa dalbadaan.

¹¹⁶ Qodobka 48^{aad} “Dhegeysiga dadweynaha” waa qodob Jumlo ahaan uga tirsanaa Qodobka “Habka Kulamada Gudiyada”. Waa la qodobceyey oo waxaa la siiyec Lambar si xigashada iyo fahamku u fidudaado. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

- 3) Haddii dhageysiga dadweynaha ay dalbadaan xubno laga tiro badan yahay oo Guddiga ka mid ah, dadka ay magacaabeen kooxdaas yari waa in la dhageysto.

Qodobka 49aad: Warbixinta Safarada Dibadda Ee Wufuudda Golaha Shacabka¹¹⁷

- 1) Madaxa wafdiga ama xildhibaan ku hadlaya magaciisa, waa inuu afar iyo tobant maalmoood gudahood oo ka bilaabaneysa maalinta wafdiga dib ugu soo noqdo dalka, u soo bandhigaan warbixinta howlaha wafdiga.
- 2) Ka dib soo bandhigidda warbixinta si waafaqsan faqradda 1^{aad}, Guddoomiyaha goluhu waa inuu cayimaa waqtiga dooda haddii loo baahdo.

Qodobka 50aad: Guddiyada Golaha Shacabka

1) Guddiga Joogatada ee Golaha:

Xubnaha Guddigaan waxay ka kooban yihiiin:

- a) Guddoomiyaha iyo labadiisa Ku-xigeen.
- b) Habdhooraha iyo labadiisa Ku-xigeen.
- c) Guddoomiyayaasha Guddiyada Joogtada ah ee Golaha.

2) Guddiga Xeer-Hoosaadka, Daryeelka, Anshaxa iyo Xasaanadda:

Arimaha hoos imaanaya Guddigaan waxaa ka mid ah:

- a) Guddigaan waa in ay ku jiraan ugu yaraan labo (2) qareen oo Xildhibaanno ah¹¹⁸.

¹¹⁷ Qodobka 49^{aad} “Warbixinta Safarada Dibadda ee Wufuudda Shacabka” waa cusub yahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiisa 21^{ad} ee 3/11/2018

¹¹⁸ Qodobka 50^{aad}, faqrada 2 (a) ee Guddiga Xeer Hoosaadka ee “Gudiyada Golaha Shacabka” waxay u qormeyd “Guddigaan waa in ay ku jiraan ugu yaraan labo (2) qareen”. Waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabaddelka xarafka (a) kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 21^{ad} ee 3/11/2018.

- b) Haddii aysan jirin duruuf khasbaysa in dib-u-eegista iyo wax ka baddelka Xeer-hoosaadka Golaha Shacabka sanadkasta kalfadhiga 2^{aad} bilowgiisa¹¹⁹.
- c) Guddigaan wuxuu tix-galinayaarrimaha la xariira xasaanadda xubnaha wixii talo soo-jeedin ahna u gudbiyaa Golaha.
- d) Guddigaan wuxuu talo bixin ka jeediyaarrimaha la xariira luminta xubinnimada ee Golaha Shacabka, sida ku cad Qodobka 59^{aad} ee dastuurka ku-meel-gaarka.
- e) Guddigaan wuxuu talo bixin ka jeediyaarrimaha la xariira tallaboooyinka anshax-marinta ee laga qaadayo xubin ka tirsan Golaha Shacabka, sababo ay kamid yihii anshax xumo ama ku xad-gudubka xeer-hoosaadka Golaha.
- f) Guddigaan wuxuu soo jeediyaatallaaboooyinka maamul ee lagu xoojinayo hab-dhaqanka iyo anshaxa xubnaha.
- g) Guddigaan wuxuu mas'uul ka yahay dabagalka & maamulka arrimaha daryeelka xubnaha Golaha¹²⁰.

3) Guddiga La Socodka Dib-u-eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka:

Iyadoo la tixgalinayo Qodobka 133^{aad} ee dastuurka, Guddiga la socodku wuxuu:

¹¹⁹ Qodobka 50^{aad}, faqrada 2 (b&c) ee Guddiga Xeer Hoosaadka ee “Gudiyada Golaha Shacabka”, waxaya ahayd laba faqradood oo u qoran”. (a) Lixdan (60) cisho Gudahood xilliga la dhiso Guddigaan ka dib ee lagu jiro kal-fadhiga kowaad, waqtii waa in loo qoondeeyo tixgalinta Xeer Hoosaadka sida uu Guddigaan soo jeediyoo. (b) Sodon (30) cisho Gudahood ee bilawga kal-fadhi kasta ee Golaha Shacabka, Guddigaan wuxuu ka doodayaa hindisaha wax ka bedel ee xeerka wuxuuna u Gudbinayaa talo soo jeedintiisa Golaha Shacabka si loo ansaxiyo”. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

¹²⁰ Qodobka 50^{aad}, faqrada 2 (g) ee Guddiga Xeerhoosaad ee “Gudiyada Golaha Shacabka” waa cusub yahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

- a) Kormeerayaa, faraya, ansaxinayaana hawlaha Guddiga dib-u-eegista iyo dhaqangalinta dastuurka iyo guud ahaanba ku dhaqanka dastuurka.
 - b) Killiyada qaarkood fari karaa Guddiga dib-u-eegista iyo dhaqan-galinta dastuurka mashruuc qoraal sharci, iyadoo lagu saleynayo baahida dastuurka ku-meel-gaarka ah.
 - c) Dib-u-eegayaa qabyo qoraalada wax ka bedelka dastuurka, ama hindise-sharchiyeedyada iyo warbixinadda ku lifaaqan ee ka timid Guddiga dib-u-eegista iyo dhaqan galinta dastuurka.
 - d) Ogeysiyyaa dadweynaha wixii soo jeedin ah.
 - e) Intii suurtogal ah, sugayaa/xaqijinayaa inay jiraan fursado ku filan oo ah ka qeyb-galka dooda dadweynaha.
 - f) La tashanayaa xubnaha ka socda dadweynaha.
 - g) Hubinayaa in xubnaha ka socda dadweynaha ay haystaan fursado ku filan oo ay ugu soo bandhigi karaan fikirkooda iyo aaraadooda Guddiga isku-dhafka ah.
 - h) La hadlayaa baarlamaanka maamul-goboleedyada xubnaha ka ah federaalka, isla markaana ku biiryo fikirka qoraallada ka yimaado xubnaha maamul-goboleedyada federaalka ka midka ah, talo soo jeedinta wax ka bedel haddii ay arrinta khuseyso danaha maamul-goboleedka xubinta ka ah federaalka.
 - i) Kormeerayaa dhaqan gelinta mabaadii'da federaalka Soomaaliya.
 - j) Warbixin siinayaa Golaha Shacabka ugu yaraan halmar sedexdii biloodba.
 - k) Qabanayaa wixii hawl kale ah ee dastuurka ku-meelgaarka ah iyo sharciga federaalka ah farayo.
- 4) Guddiga Garsoorka, Awqaafta iyo Arrimaha Diinta:**

Wuxuuna yeelanayaa Gudi-hoosaadyada soo socda:

- a) Guddi-hoosaadka arrimaha garsoorka.
- b) Guddi-hoosaadka arimaha diinta & awqaafta

Guddi-hoosaadka arrimaha garsoorka, wuxuu u xilsaaran yahay:

- a) Hubinta madaxbannanida garsoorka.
- b) Ka baaraan-degista shuruucda la xiriirta hay'adaha garsoorka & garsoorayaasha.
- c) La socodka cabashooyinka bulshada ee la xiriira arrimaha garsoorka iyo gardoona.
- d) La socdka arrimaha xabsiyada iyo maamulkooda.

Guddi-hoosaadka arimaha diinta & awqaafta wuxuu u xilsaaran yahay:

- a) Ka tala-bixinta iyo u kuur-gelidda arrimaha la xariira faafinta diinta Islaamka.
- b) Ka tala-bixinta hawlahaa la xiriira maamulka masajidda, xajka & cimarada iyo hawlahaa kheyriga ah.

5) Guddiga Arrimaha Gudaha, Maamullada Gobollada iyo Amniga:

Wuxuuna yeelanaya gudi-hoosaadyada soo socda:

- a) Guddi-hoosaadka arrimaha gudaha iyo maamullada gobollada.
- b) Guddi-hoosaadka arrimaha amniga.

Guddi-hoosaadka arrimaha gudaha iyo maamullada gobollada wuxuu u xilsaaran yahay;

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda.

- b) Ka tala-bixinta iyo la socodka arrimaha maamul goboleedyada si waafaqsan dastuurka.
- c) Ka tala-bixinta xiriir wanaaga hoggaanka dhaqameedyada iyo maamuladda gabolada iyo degmooyinka.

Guddiga-hoosaadka arrimaha amniga wuxuu u xilsaaran yahay:

- a) La socodka arrimaha ciidanka booliska iyo hay'adaha amniga.
- b) La socodka arrimaha socdaalka iyo jinsiyidda.
- c) La socodka qorshaha qaran ee amniga iyo xasilinta dalka.

6) Guddiga Xaqiqa Raadinta, Dib-u-Heshiisiinta, iyo Hanti isucelinta

Wuxuu u xilsaaran yahay:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda.
- b) Xaqiqa raadinta ku saabsan xad-gudbyada ka dhanka ah xuquuqda bani'aadamka.
- c) Ka tala-bixinta arrimaha caddaalada xilliga kala guurka ah. (Transitional justice) iyo tacaddiyaada la geystay iska raalli-gelintooda.
- d) Wuxuu la shaqeynayaa Guddiga madaxa bannaan ee runta, xaqiiqo raadinta iyo dib u heshiisiinta ee ku xusan dastuurka.
- e) Wuxuu daraasad ku soo sameynayaa talana ka soo bixinayaa dhulka iyo hantida qaranka iyo midda gaarka ah ee sharci darrada lagu kala haysto.

7) Guddiga Miisaaniyadda, Maaliyadda, Qorsheynta & Iskaashiga Caalmiga iyo La-xisaabtanka Hay'adaha Dawladda:

Wuxuuna yeelanayaayaa Gudi-hoosaadyada soo socda:

- a) Guddi-hoosaadka miisaaniyadda & maaliyadda
- b) Guddi-hoosaadka qorsheynta iyo tira-koobka
- c) Guddi-hoosaadka la-xisaabtanka dhammaan hayadaha dawladda

Guddi-hoosaadka miisaaniyadda & maaliyadda wuxuu qabanayaayaa:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.
- b) Wuxuu ka baaraan-dagaa soo jeedinta xukuumadda ee ku aadan ku tala-galka miisaaniyadda sanad kasta.
- c) Wuxuu tix-galiyaa hindiso sharchiyeedyada uu u xilsaaro ee arrimaha Misaaniyadda iyo Maaliyadda.
- d) Wuxuu dib u eegaa siyaasada lacageed ee dawlada federaalka.
- e) Wuxuu ka baaraan-dagaa kharash-miisaaniyadeedka hay'adaha iyo wakaaladaha heerka federaalka.
- f) U kuurgalka siyaasadda canshuuraha iyo dakhliga.

Guddi-hoosaadka qorsheeynta & tirakoobka, wuxuu u xilsaaran yahay:

- a) Wuxuu talo ka bixiyaa tallaaboooyinka maamul ee sare loogu qaadayo siyaasadda dhaqaale ee dowladda.
- b) Wuxuu talo ka bixiyaa, una kuur-galaa tirakoobka guud ee dhaqan-dhaqaale iyo bulshada.
- c) Wuxuu tix-galiyaa hindiso sharchiyeedyada ee la xiriira arrimaha qorsheynta & tirakoobka

Guddi-hoosaadka la-xisaabtanka dhammaan hay'adaha dawladda, wuxuu u xilsaaran yahay:

- a) Wuxuu ka baaraan-dagaa war-bixinta hanti-dhawrka guud, soona jeediya tallaabooyinka ku haboon hab-raaca maamul wanaagga ee dawladda.
- b) Wuxuu tix-galiyaa hindiso sharchiyeedyada ee la xiriira arrimaha la-xisaabtanka hayadaha dawladda.

8) Guddiga Arrimaha Dibedda:

Arrimaha hoos imaanaya waajibaadka Guddigaan waxaa ka mid ah:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.
- b) Xariirka caalamiga ah, heshiisyada iyo axdiyada caalamiga ah.
- c) Arrimiha safaaradaha iyo qunsuliyyadaha.
- d) Qurbo-joogta & qaxootiga

9) Guddiga Difaaca:

Wuxuuna leeyahay Gudi-hoosaadyada soo socda:

- a) Guddi-hoosaadka gaashandhigga iyo arrimaha ciidanka xoogga dalka Soomaaliyeed.
- b) Guddi-hoosaadka hub-ka dhigista iyo dhaqan celinta maleeshiyaadka.

Awoodaha Guddigaan waxaa ka mid ah:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.

- b) Arrimaha ciidanka xooga dalka.
 - c) Hub ka dhigista & dhaqan celinta maleeshiyoyinka.
 - d) Illaalinta xuduuda dalka & la dagaalanka burcad badeedka.
 - e) Guddigaan wuxuu la shaqeynayaan Guddiga madaxabanaan ee amniga qaranka, iyo xafiiska gardoona sida ku xusan dastuurka kumeel gaarka ah iyo xeerka federaalka.
- 10) **Guddiga Xuquuqul Insaanka, Haweenka iyo Arrimaha Bani'aadanimada:**

Wuxuuna ka kooban yahay:

- a) Guddi-hoosaadka xuquuqul insaanka.
- b) Guddi-hoosaadka haweenka iyo arrimaha qoyska.
- c) Guddi-hoosaadka arimaha bani'aadanimadda iyo barakacayaasha (IDPs).

Hawlaha ay qabanyaan waa:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.
- b) Arrimaha Xuquuqul insaanka.
- c) Dadka naafada/curyaanka ah.
- d) Arrimaha jinsiga (lab/dheddig).
- e) Dadka gudaha ku barakacay.
- f) Gargaarka bani'aadanimo oo ay ka mid yihiin sida loo maareynayo abaaraha iyo masiibooyinka kale
- g) Guddigaan wuxuu la shaqeynayaan Guddiga madaxa banaan ee xuquuqul-insaanka iyo xafiiska gardoona sida ku xusan dastuurka kumeel gaarka ah iyo xeerka federaalka.

11) Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada:

Wuxuuna yeelanaya:

- a) Guddi-hoosaadka caafimaadka.
- b) Guddi-hoosaadka waxbarashada.
- c) Guddi-hoosaadka shaqada.
- d) Guddi-hoosaadka dhaliyarada iyo isbortiska.

Arrimaha hoos imaanaya gudi-hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.
- b) Caafimaadka bulshada & siyaasada caafimaadka qaran.
- c) Daryeelka caafimaad iyo caymiska.
- d) Waxbarashada hoose iyo sare.
- e) Tababarka xirfadaha iyo waxbarashada aan rasmiga aheyn.
- f) Sayniska & arrimaha tiknoolajiyada.
- g) Arrimaha shaqada &ururada bulshada.
- h) Arrimaha dhalinyarada & arrimaha isboortiga.

12) Guddiga Kheyraadka Dabiicigaa Iyo Bii'ada:

Wuxuuna yeelanaya:

- a) Guddi-hoosaadka macdanta, biyaha iyo shidaalka.
- b) Guddi-hoosaadka bii'ada iyo ilaalinta duur-joogta

Arrimaha hoos imaanaya gudi hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.

- b) Ilaalinta bii'ada; bad, berri iyo hawada sare.
- c) Ilailnta duur-joogta.
- d) Shidaalka & kheyraadka macdanta & biyaha

13) Guddiga Beeraha, Horumarinta Reer-miyiga, Xoolaha iyo Khayraadka Badda:

Wuxuuna yeelanaya:

- a) Guddi-hoosaadka beeraha & siyaasadda dhulka.
- b) Guddi-hoosaadka horumarinta reer-miyiga, xannanada xoolaha, dhirta & daaqa.
- c) Guddi-hoosaadka kheeraadka badda.

Arrimaha hoos imaanaya gudi hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.
- b) Dalagga, dhul beereedka & waraabka.
- c) Kalluunka iyo kheyraadka badda.
- d) Hormarinta reer miyiga & xannanada xoolaha

14) Guddiga Warfaafinta, Wacyigelinta, Dhaqanka, Boostadda iyo Isgaarsiinta:

Wuxuuna yeelanaya gudi hoosaadyada soo socda:

- a) Guddi-hoosaadka warfaafinta, wacyigelinta iyo dhaqanka.
- b) Guddi-hoosaadka boostadda iyo isgaarsiinta.

Arrimaha hoos imaanaya gudi hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.

- b) Warfaafinta iyo wacyigalinta.
- c) Siyaasada warbaahinta.
- d) Warbaahinta qaranka (SNTV, radio mogadishu).
- e) Xuquuqda daabacaada iyo xuquuqda lahaansho fikir.
- f) Guddigaan wuxuu la shaqeynayaa Guddiga madaxa banaan ee xuquuqul insaanka iyo xafiiska gardoona, sida ku xusan dastuurka iyo xeerarka federaalka.

15) Guddiga Waddooyinka, Dekedaha, Garoomada, Tamarta iyo Gadiidka:

Wuxuu leeyahay:

- a) Guddi-hoosaadka waddooyinka iyo gaadiidka dhulka.
- b) Guddi-hoosaadka dekedaha & gaadiika badda.
- c) Guddi-hoosaadka garoomada & gaadiidka cirka.
- d) Guddi-hoosaadka tamarta.

Arrimaha hoos imaanaya gudi hoosaadyadan waxaa ka mid ah:

- a) Ka baaraan-degista iyo ka tala-bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda.
- b) Dhisida iyo ilaalinta wadooyinka, & dhismayasha dowlada,
- c) Dhismaha gegada diyaaradaha & dekadaha.
- d) Gaadiidka noocyadiisa kala duwan.
- e) Tamarta

16) Guddiga Dhaqaalah, Ganacsiga, Warshadaha iyo Maalgashiga¹²¹

Arrimaha ka mida ha hawlahiisa:

- a) Ka tala-bixinta iyo u kuurgelidda siyaasadda ganacsiga dalka.
- b) Ka tala-bixinta iyo u kuur-gelidda siyaasadda horumarinta warshadaha.
- c) U Kuur-galka shuruucda ilaalinta xuquuqda gaarka ah ee ganacsiga (Patent rights).
- d) U Kuur-galka shuruucda ilaalinta tayada ganacsiga la soo waarido iyo nooca wax soo saarka warshadaha (quality control laws).

CUTUBKA 5AAD: GOLAHA SHACABKA & XUKUUMADDA

Qodobka 51aad: Kalsooni-Siinta Xukuumadda¹²²

- 1) Sida ku cad Qodobka 69^{aad}(2) xarafka (d) ee dastuurka, goluhu wuxuu cod kalsooni ah siin karaa, kalana noqon karaa ra'isul-wasaaraha, wasiirada iyo barnaamijka xukuumadda.
- 2) Golaha shacabku wuxuu go'aankiisa ah kalsooni-siinta ku meel marinaya, codeyn gacan taag ah ee aqlabiyyad hal dheeri ah tirada guud xubnaha (50 %+1).

¹²¹ Qodobka 50^{aad}, (15), XII-GSH-B10 “Guddiga Dhaqaalah, Ganacsiga iyo Warshadaha” . Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disceember 31, 2022.

¹²² Qodobka 51^{aad} (1& 2) ee “Kalsooni siinta Xukuumaddu” waxaa la siiyey lambareyn, kala goyn iyo dib u siiqeyn lagu sameeyey. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

- 3) Ra'isul-wasaaruuhu markii uu helo codka kalsonida Golaha Shacabka, waa in uu horkeeno liiska golihiiisa wasiirada iyo barnaamijka xukuumadiisa muddo aan ka badneyn soddon (30)-cisho, si goluhu u siiyo kalsoonida codeyn gacan-taag ah oo aqlabiyadda guud (50%+1) ee tirada Golaha¹²³.

Qodobka 52aad: Dhaarta Ra'iisul Wasaaraha & Wasiirrada

Si waafaqsan Qodobka 104^{aad} ee dastuurka ku-meel-gaarka, kadib marka la helo codka kalsooni siinta, ra'isul-wasaaraha iyo wasiirada ayaa inta aysan xilka qaban, dhaar ku maraya fadhi gaar ah, ee Golaha Shacabka ee federaalka, Waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamada Sare, loona akhrinayo sida hoos ku cad:

“Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkeyga u guto si daacad ah, oo danta dalka, dadka & diinta ku jirto, dhawrana dastuurka qaranka iyo shuruucda kale ee dalka u yaalo”.

Qodobka 53aad: U Yeeridda Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasiirrada

- 1) Sida ku cad Qodobka 69^{aad} (2), xarafka (c) ee dastuurka, goluhu wuxuu u yeeri karaa ra'isul-wasaaraha, Golaha wasiirada, guddoomiyayaasha gudiyada qaranka & xafiisyada madax-bannaan¹²⁴.
- 2) Golaha Shacabka waxaa uu awood u leeyahay in uu dib u eegid ku sameeyo xilka masuul kasta ee aqbali waayo u yeeridda Golaha¹²⁵.

¹²³ Qodobka 51^{aad} (3) waa ku cusub tahay “Kalsooni siinta Xukuumadda”. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanku 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹²⁴ Qodobka 53^{aad} (1), ee “U Yeeridda Ra'iisulwasaaraha & Wasiirada” waa isla nuxurkii qodobku ka hadlayey iyadoo xigashada dastuurka la soo raaciyeey. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

¹²⁵ Qodobka 53^{aad} (2) ee ‘U Yeeridda Ra'iisulwasaaraha & Wasiirada” waa qeybta dambe ee sidii ay markii hore u gornayd. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

Qodobka 54aad: Codka Kalsooni Kala Noqoshada Xukuumadda

- 1) Xildhibaano aan ka yareen shan meelood meel (1/5) tirada guud ee xildhibaanada Golaha, ayaa soo jeedin kara mooshin kalsooni kala noqosho xukuumadda, waxaana doodeedu furmeysaa ugu badnaan 5-maalin oo maalmo shaqo ah & saacad shaqo, kana bilaabanaysa maalinta loo soo gudbiyo soo-jeedinta Golaha, waana in guddoonku isla maalinkaasba u gudbiyaa ra'isul-wasaaraha eedaymaha ku qoran soo-jeedintaas¹²⁶.
- 2) Mooshinkaasi waxaa lagu ansixinaya tiro hal dheeri (50%+1) ee xubnaha iyadoo tirada xubnaha laga reebayo kuraasta bannaan (Vacant Seats).
- 3) Soo jeedin (mooshin) la xiriira, Qodobka 17^{aad} (2), Qodobka 67^{aad} (1), Qodobka 54^{aad} (1), Qodobka 62^{aad} (1) iyo Qodobka 105^{aad} (3), ee xeer-hoosaadka lagumia faafin karo Golaha iyo meel kale toona ka hor maalinta ay furmaysi dooda soo jeedintaas. Waxaana maalintaas loo qaybinaya oo kaliya Golaha¹²⁷.
- 4) Xildhibaan kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro ama ka baxo soo-jeedin (mooshin) inta aan guddoonka loo gudbin, mar haddii loo gudbiyo guddoonka saxiixayaasha motionka ka ma noqon karaan saxiixooda motion-ka.

¹²⁶ Qodobka 54^{aad} (4) ee “Codka Kalsooni Kala Noqoshada Xukuumadda” waxay u qorneyd “Xildhibaano aan ka yareen shan meelood meel (1/5) tirada guud ee xildhibaanada Golahaayaan soo jeedin kara mooshin kalsooni kala noqosho Xukuumadda, waxaana doodeedu furmeysaa 5-maalimood kadib oo maalmo shaqo ah kana billaabanaysa maalinta soo jeedinta la keenay Golaha”. Waxa loo qoray sida kor ku xusan waxaana Goluhu ansixiyey kalfadhiga ^{aad}, kulanku 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹²⁷ Qodobka 54^{aad} (3 ilaa 6) ee “Codka Kalsooni Kala Noqoshada Xukuumadda” waa faqrooyin Cusub oo lagu soo daray Qodobka an. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhigii 3^{aad}, kulankuusi 19^{aad} ee 23/10/2013.

- 5) Marka soo-jeedin (mooshin) la keeno, loona codeynayo xildhibaanku soo jeedin uu marki hore soo jeediyay wuu ka codeyn karaa.
- 6) Marka soo-jeedin (mooshin) loo keeno guddoonka, waa in uu hubiyo sharcinimada mooshinkaas, go'aanna ka gaaro qabashada soo jeedinta mooshinka loo soo gudbiyay.
- 7) Codeynta waxaa laga dhigayaa mid gacan taag ah.
- 8) Dooda mooshinka kalsooni kala noqoshada xukuumadda, waxaa aqrinaya mid kamid ah saxiixayaasha mooshinka mudo aan ka badnayn 10-daqiiqo, asaga oo sheegaya sababaha mooshinka, kadibna waxaa mudo aan ka badnayn 7-daqiiqo taageeraya mooshinka xubin kale ee ka tirsan saxiixayaasha¹²⁸.
- 9) Marka mooshinka loo aqriyo si waafaqsan faq.^{8^{aad}} ee qodobkaan, waxaa hadlaya ra'isul'wasaaraha mudo aan ka badnayn 60-daqiiqo si uu isaga difaaco eedeymaha¹²⁹.
- 10) Xubin kasta oo doonaysa in ay dooda ka qayb qaadato waxay hadli kartaa ugu badnaan 5-daqiiqo, kadibna waxaa hadalka ugu dambeeyaa yeelanaya ra'isulwasaaraha oo hadlaya muuddo aan ka badnayn 30-daqiiqo¹³⁰.

¹²⁸ Qodobka 54^{aad}(8) waa faqro cusub "Codka Kalsooni Kala Noqoshada Xukuumadda" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹²⁹ Qodobka 54^{aad}(9) waa faqro cusub "Codka Kalsooni Kala Noqoshada Xukuumadda" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹³⁰ Qodobka 54^{aad}(10) waa faqro cusub oo lagu soo kordhiyey "Codka Kalsooni Kala Noqoshada Xukuumadda" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

- 11) Haddii soojeedintu (Motion)-ka ansixi waayo, ra'isulwasaaruuhu wuxuu si hufan u sii wadanayaa howlihiisa dastuuriga ah¹³¹.
- 12) Haddii mooshinka la ansaxiyo guddoomiyuhu waa in uu ku wargeliya madaxwaynaha natijjada codeynta, si uu u fuliyo waajibadka dastuuriga ah ee ka saaran, sida ku cad qodobada 90^{aad} iyo 103^{aad} ee dastuurka¹³².

Qodobka 55aad: Diidmada Kalsooni Kala Noqosho¹³³

Haddii soo-jeedin (motion) kala noqosho kalsooni, oo xukuumadda lid ku ah uu goluhu ansixin waayey, lama soo celin karo soo-jeedintaas kalsooni-darro, ilaa ay ka gudbeyso muddo 6-bilood ah.

Qodobka 56aad: Kor-Joogteynta Guddiyada Golaha

- 1) Si loo xaqijiyo dhaqan-galinta shuruucda qaranka, gudiyada golahu waxaa ay la xisaabtamayaan, ayna kormeerayaan howlaha waaxyaha dowladda iyo hey'adaha kale ee hoos yimaada xilkooda, sida waafaqsan Qodobka 69^{aad} (2) ee dastuurka.
- 2) Haddii wasaarad, ama hey'ad kale ee hoos timaadda shaqada gudi Golaha Shacabka aysan warbixin keenin ama warbixinteedu aysan dhameystirneyn, marka uu gudigu

¹³¹ Qodobka 54^{aad}(11) waa fagro cusub oo lagu soo kordhiyey "Codka Kalsooni Kala Noqoshada Xukuumadda" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹³² Qodobka 54^{aad}(12) waa fagro cusub oo lagu soo kordhiyey "Codka Kalsooni Kala Noqoshada Xukuumadda" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹³³ Qodobka 55^{aad} Cinwaanka wuxuu u qornaa "Soo Jeedinta Kala noqosho Kalsooni". Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

codsiga sameeyey kadib, waxaa arrintaasi lagu dari karaa ajendaha Golaha.

- 3) Gudiyadu waxay ka soo war-bixinayaan dhaqan-galka shuruucda ay shaqada ku leeyihiiin, war-bixintooduna waxay noqoneysa qoraal iyo hadal labadaba, sanadkiiba hal mar.

Qodobka 57aad: Xiriirka Guddiyada iyo Xukuumadda

- 1) Wada shaqaynta ka dhaxeysa gudiyada Golaha Shacabka iyo xukuumaddu waxaa ay ku salaysan tahay mabda'a ah istexgalin iyo isla xisaabtan.
- 2) Waa in ay jiraan kulamo joogto ah oo uu la yeesho gudigu wasiirada ugu yaraan hal mar saddexdii biloodba, si wasiiradadu Guddiga ula socodsiyaan howsha wasaaradaha.

Qodobka 58aad: Barnaamijyada Shaqo ee Wasaaradaha & Guddiyada¹³⁴

- 1) Hay'adaha dowladdu waa in ay usoo gudbiyaan gudiyada Golaha barnaamijyada shaqo ee sannadkaas, ajendaha sharciyed ee u qorsheysan inay soo bandhigaan, iyo ujeedooyinka ay tahay in lagu guuleysto sanadkaas¹³⁵.

¹³⁴ Qodobka 58^{aad} "Barnaamijyada Shaqo ee wasaaradaha & Gudiyada" waxay aheyd jumlo ka mid aheyd qodobka "Xiriirka Gudiyada & Xukuumadda" waxaa la siiyey lambar si ay u fududaato xigashada iyo fahamku. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd kulankiisa 21nd ee 3/11/2018

¹³⁵ Qodobka 58^{aad} (I) ee "Barnaamijyada Shaqo ee wasaaradaha & Gudiyada" waxay u qornayd "Bilowga sannad kasta Gudi kasti waxaa uu ka doonayaa wasaarad shaqadu kala dhaxeyso ama hay'adaha kale in ay usoo Gudbiso Guddiga barnaamijyada shaqo ee sannadkaa, ajendaha sharciyed ee wasiiradadu soo bandhigaan, iyo ujeedooyinka ay tahay in lagu guuleysto sannadkaa" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd, kulanka 21nd ee 3/11/2018.

- 2) Gudi kasta waa inuu kormeeraa Lana socdaa hirgalinta barnaamijiyada shaqo ee hay'adda dowladdu u soo gudbisay¹³⁶.

Qodobka 59aad: Xog Raadinta Guddiga¹³⁷

- 1) Iyadoo sharciga la raacayo wuxuu Guddiga weydiisan karaa xukuumadda, hay'adaha ama dhinac kale, in ay siyyaan Guddiga tafaasiil ama warbixin ama qoraal gudigu uu ugu baahan yahay inuu ku guuto shaqadiisa.
- 2) Ayadoo aan la khilaafeyn faq.1aad ee qodobkaan, ugu yaraan saddex meelood meel (1/3) xubnaha gudigu waxaa ay qoraal ku codsan karaan in wasaarad, hay'ad ama dhinac kale ay siyyaan Guddiga warbixin iyo qoraallo la xiriira barnaamijiyadda shaqo ee Guddiga.
- 3) Guddoomiyaha gudigu waa inuu si dhaqso ah ugu gudbiyaa madaxa wasaaradda, hay'adda ama qolada kale ee ku shaqada leh codsiga uu helay oo ay ku saxiixan yihiin saddex meelood meel (1/3) xubnaha guddigu¹³⁸.
- 4) Hay'adaha dowladdu ee ku shaqada leh waa in ay ugu badnaan todoba (7) maalin shaqo gudahood ugu gudbiyaan Guddiga warbixinta iyo qoraalada uu ka codsaday, haddii aysan ka horimaanayn sharciga¹³⁹.

¹³⁶ Qodobka 58^{aad} (2) ee "Barnaamijiyada Shaqo ee wasaaradha & Gudiyada" waxay u qornayd "Gudi kasta waa inuu kormeeraa Lana socdaa hirgalinta barnaamijiyada shaqo ee hay'adda dowladdu u soo Gudbisay" waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu asníxiyeh kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 21^{ad} ee 3/11/2018.

¹³⁷ Qodobka 59^{aad} "Xog Raadinta Guddiga" waxay ahayd jumilo ka mid ahayd qodobka "Xiriirkha Gudiyada & Xukuumadda" waxaa la siiyey lambar si ay u fududaato xigashada iyo fahamku. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiiha 21^{ad} ee 3/11/2018.

¹³⁸ Qodobka 59^{aad} (3) ee "Xog-Raadinta Guddiga" waxaa laga soo jaray faqrada 2^{ad} ee ka horreysa waxna lagama baddelin siday u qormeyd. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018.

¹³⁹ Qodobka 59^{aad} (4) horey waxay u ahayd faqrada 3aad, waxaa baddelay faqrada ka dhex sameysantay faqrada 2aad ee "Xog Raadinta Gudigu" waxayna u qormeyd "Xukuumaddu, Hay'adda iyo Laamaha kale ee ku shaqada leh waa

- 5) Sida ku cad; Qodobka 69^{aad}, (2) ee dastuurka, Qodobka 2^{aad} (7, 8, 9 & 10) ee xeerhoosaadka, Golaha shacabku wuxuu xaq u leeyahay kor-jogteynta iyo la xisaabtanka xukuumadda, sidaa daraadeed xukuumadda, hay'adaha iyo gudiyada madaxbannaan waa inay u dhega-nuglaadaan oo la shaqeeyaan gudiyada¹⁴⁰.
- 6) Wasaaradaha, hay'adaha, iyo laamaha kale ee ku shaqada leh, haddii ay ugu gudbin waayaan Guddiga warbixinta iyo qoraalada uu ka codsaday muddada ku xusan faqrada 4^{aad} ee qodobkaan, Guddoomiyaha Guddiga waa inuu u diraa qoraal uu ku xasuusinaayo ka soo jawaabidda codsiga Guddiga¹⁴¹.
- 7) Wasaaradda, hay'adda, iyo laamaha kale ee ku shaqada leh, marka ay soo gaarto warqada xasuusinta ee codsiga Guddiga, waa inay ugu badnaan labo (2) maalin shaqo gudahood ugu gudbiyaan warbixinta iyo qoraalada uu ka codsaday Guddiga ama codsi muddo kordhin ah oo aan ka badneyn laba (2) maalin shaqo & qoraal cudurdaarasho ah¹⁴².
- 8) Wasaaradaha, hay'adaha iyo laamaha kale ee ku shaqada leh, haddii aysan codsiga Guddiga uga soo jawaabin muddada ku xusan faqradaha 4^{aad} iyo 7^{aad} iyadoo aysan soo gudbin cudur-

in ay si dhakhsii ah ugu Gudbiyaan Guddiga warbixinta iyo qoraalada uu ka codsaday, haddii aysan ka horimaanayn sharciga". Waxaa loo baddelay sida kor ku xusan, Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹⁴⁰ Qodobka 59^{aad} (5) waa cusub tahay "Xog raadinta Guddiga" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹⁴¹ Qodobka 59^{aad} (6) waa cusub tahay "Xog raadinta Guddiga" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹⁴² Qodobka 59^{aad} (7) waa cusub tahay "Xog raadinta Guddiga" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

daar maangal ah, gudigu wuxuu arrinka ugu gudbinayaa Golaha qaab warbixin gaar ah¹⁴³.

- 9) Haddii warbixinta gudigu u gudbiyay Golaha, dalbanayso taageeridda u yeerida wasiir ama mas'uulka hay'adda, Guddoomiyaha aaya ogolaanaya in qaab soojeedin (mooshin) looga doodo maalinta shaqo ee ugu soo horeysa¹⁴⁴.
- 10) Haddii Goluhu taageero go'aanka u yeerida ee gudigu codsaday, guddoonku wuxuu ku wargelinayaa ra'isulwasaaraha xukuumadda inuu faro wasiirka ay khuseyso inuu hor-yimaado galaha shacabka¹⁴⁵.
- 11) Sida ku cad Qodobka 69^{aad} Faq.2^{aad}, Xarafka (c), ee dastuurka JFS, mas'uul kasta oo u dhega-nuglaan waaya u yeerista, goluhu wuxuu dib-u-eegis ku sameeyo xilkiisa¹⁴⁶.

Qodobka 60aad: Baaritaannada uu Sameeyo Guddigu¹⁴⁷

Si loo helo xog dheeraad ah, waqtiga gudigu baarista ku wado hay'adaha dawladda, waxay qaban qaabin karaa kulan ay dhageysanayaan dadweynaha (kulan furan), waxaa uuna ku marti galin karaa khubaro iyo shakhsiyaad kale oo keeni kara xog wax ku-ool ah. Ku dhawaaqista kulanka dhageysiga

¹⁴³ Qodobka 59^{aad} (8) waa cusub tahay "Xog raadinta Guddiga" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹⁴⁴ Qodobka 59^{aad} (9) waa cusub tahay "Xog raadinta Guddiga" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹⁴⁵ Qodobka 59^{aad} (10) waa cusub tahay "Xog raadinta Guddiga" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹⁴⁶ Qodobka 59^{aad} (11) waa cusub tahay "Xog raadinta Guddiga" Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

¹⁴⁷ Qodobka 60^{aad} "Baaritaanada uu Sameeyo Gudigu" waxay aheyd jumlo ka mid aheyd qodobka "Xiriirkha Gudiyada & Xukuumadda" waxaa la siiyey lambar si ay u fududaato xigashada iyo fahamku. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

dadweynaha ah iyo arrimaha ay tahay in warbixintooda la kulmiyo waxaa lagu baahin karaa warbaahinta. Gudigu wuxuu ka codsan karaa shaqsiyaadka lagu marti galiyey kulanka furan in ay ku keenaan fikradahooda hab qoraal ah.

Qodobka 61aad: Warbixinta Guddiga ee Arrimaha La Baaray¹⁴⁸

- 1) Dhammaan warbixinnada waa in ay ku cadyihiin awoodda lagu samaynayo barista.
- 2) Warbixinnada waa inay ku cad yihiin magacyada xubnaha Guddiga ee ka qeybqaatay war-bixintaas.
- 3) Warbixintu waa in ay cadayso arrinka ama arrimaha laga shaqeeyey iyo xogaha uu gudigu helay, waxaa sidoo kale warbixintu leedahay, tixraaca qeybaha ku haboon ee waxyaabaha la soo gudbiyey ee gudigu ku helay hab qoraal ah iyo hab hadal ahba.
- 4) Qoraalka warbixinta waa in lagu daraa talo-soo-jeedinta Guddiga ee arrinta la daraaseeyey oo taxan.
- 5) Warbixintu waa in ay leedahay lifaaq ay ku taxan/qoran yihiin, goob-joogayaasha la dhageystay, iyo warbixinnada la soo gudbiyey intii ay daraasaddu socotay, marka uu codsado xubin ka mid ah Golaha Shacabka.
- 6) Dhammaan qoraallada la xiriira warbixinta Guddiga waa in la keydiyaa (xereeyaa) uuna heli karaa xildhibaan kasta oo soo codsada.

¹⁴⁸ Qodobka 61^{aad}, “Warbixinta Guddiga ee Arrimaha La Baaray” waxay aheyd jumlo ka mid aheyd qodobka “Xiriirka Gudiyada & Xukuumadda” waxaa la siiyey lambar si ay u fududaato xigashada iyo fahamku. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

- 7) Haddii gudigu rabo inay hay'ad dawladeed jawaab ka bixiso warbixin, gaar ahaan tan la xiriirta talo-soo-jeedinta Guddiga, codsiga waa in uu saxiixa Guddoomiyaha Guddiga ama cidda guddoomisay¹⁴⁹.
- 8) Xukuumadda ama hayadaha dawladdu waa inay jawaab celin qoraal ah u gudbiyaan gudiyada muddo aan ka badneen soddon (30) maalmood oo maalmo shaqo ah, ka dib markii warbixinta guddoontay¹⁵⁰.

Qodobka 62aad: Su'aal-Wadareedka (Interpellation)

- 1) Toban (10) xildhibaan ayaa soo gudbin kara mooshin ay ku codsanayaan su'aalwadareed looga doodayo arrin la xiriirta howsha ra'isul-wasaaraha ama wasiir.
- 2) Ajendaha fadhiga waxaa lagu dari karaa hal su'aal-wadareed, taasoo aan ka dheereyn mudo hal fadhi maalmeed ee Golaha.
- 3) Haddii su'aal-wadareedyo ka badan hal ay u dhiman tahay Golaha, Guddoomiyaha ayaa siinaya koox kasta in ay yeelato su'aal-wadareedkeeda, iyadoo loo kala hormarinayo sida ay soo gudbintooda u soo kala horeysay¹⁵¹.

¹⁴⁹ Qodobka 61^{aad} (7) ee “Worbixinta Guddiga ee Arrimaha La Baaray” waxay u qormayd “Haddii Gudigu rabo inuu ka codsado Xukuumadda inay jawaab ka bixiso warbixinta, gaar ahaan tan la xiriirta talo soo jeedinta Guddiga, codsiga waa in lagu qoraal war bixinta ka hor saxiixa Guddoomiyaha”. waxaa loo badelay sida kor ku xusan, Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 21 ee 3/11/2018.

¹⁵⁰ Qodobka 61^{aad} (8) ee “Worbixinta Guddiga ee Arrimaha La Baaray” waxay u qormayd “Xukuumaddu waa inay jawaab celin qoraal ah u Gudbisaa Gudiyadamuddo aan ka badneen lixdan (60) maalmood, ka dib markii warbixinta Guddoontay”. Waxaa loo qoray sida kor ku xusan, Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 21 ee 3/11/2018

¹⁵¹ Qodobka 62^{aad} (3) ee “Su'aal wadareedka” waxay u qormeyd “haddii su'aal wadareedyo ka badan hal ay u dimantahay Golaha, Guddiga arrimaha ayaa siinaya koox kasta inay yeelato su'aal wadareedkeeda iyadoo loo kala hormarinayo sida ay soo gudbintoodu u soo kala horeysay mudada fadhiyada soo socda”. Waxaa loo badelay sida kor ku xusan, Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 21^{ad} ee 3/11/2018.

- 4) Su'aal-wadareedku waxaa lagu soo gudbinayaa qoraal ahaan, waxaana lagu cadeynayaa arimahan¹⁵².
- a) Nuxurka su'aasha oo kooban.
 - b) Sababta keentay mooshinka.
 - c) Magacyada iyo saxiixa xubnaha soo jeedinaya.
- 5) Su'aal-wadareedka waxaa loo gudbinayaa guddoonka Golaha. Guddoonku marka uu helo qoraalka, wuxuu u sii gudbinayaa Xukuumadda, iyadoo lagu war-gelinayo in ay ku soo jawaabto muddo aan ka badneyn laba (2) usbuuc¹⁵³.
- 6) Su'aal wadareedka waxaa lagu darayaajendaha todobo (7) maalin gudaheed kadib maalinka jawaabta laga helo xukuumadda. Guddiga Joogtada ah ma diidi karo ku daridda su'aal wadareedka ajendaha Golaha, marka laga reebo haddii Su'aal wadareedka aaney buuxin shuruudaha rasmiga ee ku xusan faqrada 4^{aad}.
- 7) Haddii xukuumadda ka soo jawaabi waydo su'aal-wadareedka, sida ku xusan faq.^{5aad}, Su'aal-wadareedkaasi waa in la geliyo ajendaha, waxayna ahaaneysaa qodobka ugu dambeeya ee ajendaha maalinkaasi socda, markaasoo xildhibaanada soo-jeedinta su'aal-wadareedka wada ay soo jeedinayaan in go'aan digniin ama canaan ah laga soo saaro xukuumadda. Haddii goluhu uu fasax ku maqan yahay,

¹⁵² Qodobka 62nd (4) ee "Su'aal Wadareedka (Interpellation)" waxaa laga baddelay xarafka (a) oo markii hore u qornayd "Koobnaanta qaab Jeedinta arinkaas". Waxaa loo qoray sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3rd kulankiisi 19nd ee 23/10/2013.

¹⁵³ Qodobka 62nd (5) ee "Su'aal Wadareedka" waxay u qornayd "Su'aal-wadareedka waxaa loo gudbinayaa Guddiga Arrimaha Golaha. Islamarka gudigu uu helo qoraalka, wuxuu u sii gudbinayaa Xukuumadda, taasoo ku khasbeyas inay ku soo jawaabto 30-mal mood gudaheed. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, Kulanka 21nd ee 3/11/2018.

Qodobka 62nd (5), XH-GSH-B10 "Su'aal-wadareedka waxaa loo gudbinayaa guddoonka Golaha. Guddoonku marka uu helo qoraalka, wuxuu u sii gudbinayaa Xukuumadda, iyadoo lagu war-gelinayo in ay ku soo jawaabto Soddon (30)-mal mood gudahood". Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- su'aashaas waxaa ay ka mid noqoneysaa qodobada ajendaha ugu horeeya ee fadhiba xiga¹⁵⁴.
- 8) Xildhibaanada soo jeediyey su'aal-wadareedka waxay xaq u leeyihii in su'aasha ay dood ka furaan mudo aanan ka badneyn labaatan (20) daqiiqo¹⁵⁵.
- a) Isla xildhibaanadaas ayaa xaq u leh in ay dooda soo afjaraan mudo aan ka badneyn tobant (10) daqiiqo.
 - b) Xubnaha kale waxaa ay xaq u leeyihii inay ka doodaan su'aal-wadareedka, si waafaqsan xeer hoosaadka.
- 9) Ra'isul-wasaaraha ama wasiirka ay ku wajahan tahay codsiga, wuxuu ku qasban yahay in uu soojeediyo fikrada xukuumadda ay ka qabto arrinta ay su'aal wadareedka ku saabsan tahay.
- 10) Xildhibaanada soo jeediyey su'aal-wadareedka waxay codsan karaan in mooshinka loo codeeyo gabagabada su'aal wadareedka, taasoo aan ka baxsaneyn mudada loo qoondeeyey doodaasi, mar haddii mooshinkaas ay kusii dareen codsigoodi hore ee su'aal-wadareedka¹⁵⁶.
- 11) Su'aal-wadareedka looma gudbin karo kalfadhiga xiga ee Golaha, laakin soo-jeedin kale oo hor leh waa laga sameyn karaa.

¹⁵⁴ Qodobka 62nd (7), "Su'aal wadareedka" Haddii xukuumadda ka soo jawaabi waydo su'aal-wadareedka sida ku xusan faqrada kore, su'aashaasi waaa wali ahaaneysaa qodobka ugu dambeeyaa ee ajendaha maalinkaasi socda, markaasoo kooxda soo-jeedinta su'aalwadareedka wada ay soo jedinayaan in go'aan digniin ama canaan ah laga soo saaro xukuumadda. Haddii goluhu uu fasax ku maqanyahay su'aashaas waxaa ay ka mid noqoneysaa qodobada ajendaha ugu horeeya ee fadhiba xiga. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd, kulanka 21st ee 3/11/2018.

¹⁵⁵ Qodobka 62nd (8) ee "Su'aal wadareedka" waxay u qorneyd "Kooxda soo jeediyey su'aal-wadareedka waxay xaq u leeyihii in su'aasha ay dood ka furaan mudo aanan ka badneyn labaatan (20) daqiiqo. Isla xildhibaanadaas ayaa xaq u leh in ay dooda soo afjaraan mudo aan ka badneyn tobant (10) daqiiqo. Xubnaha kale waxaa ay xaq u leeyihii inay ka doodaan su'aal wadareedka, si waafaqsan xeer hoosaadka" waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd, kulanka 21st ee 3/11/2018.

¹⁵⁶ Qodobka 62nd (10) ee "Su'aal wadareedka" waxay u qorneyd "Kooxda soo jeediyey su'aalwadareedka waxay codsan karaan in mooshinka loo codeeyo gabagabada su'aal wadareedka, taasoo aan ka baxsaneyn mudada loo qoondeeyey doodaasi, mar haddii mooshinkaas ay kusii dareen codsigoodi hore ee su'aal-wadareedka". Waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd kulanka 21st ee 3/11/2018.

12) Codsi ka doodid su'aal-wadareed ee ku saabsan isla arrin kaliya lama keeni karo in ka badan labo (2) jeer sanad gudhiisa.

Qdobka 63aad: Su'aal-Oraaheed oo Xukuumadda Looga Codsanayo Jawaab Oraah ah

- 1) Inta uu fadhigiisa socdo, ajendaha maalin kasta oo Axad ah waa in ay ku jirtaa waqtiga su'aalaha xukuumadda la weydiinayo, oo aan ka badnaaneyn sagaashan (90) daqiiqo.
- 2) Maalmaha shaqo oo aan Axada ahayn, xubin kasta oo ka tirsan Golaha wuxuu weydiin karaa su'aalo, taasoo uu ka jawaabayyo xubin ka tirsan Golaha xukuumadda waqtiga su'aalaha, mar haddii ujeedada guud ee su'ashaashi loo gudbiyey Xoghayaha Guud iyadoo qoraal ah mudo aan ka yareyn afartan & sideed (48)-saacadood ka hor fadhigaas¹⁵⁷.
- 3) Qaabka su'aasha waa in lagu ixtiraamaa shuruudaha luqada anshaxa leh.
- 4) Xubinta su'aasha weydinayso ayaa isla su'aashaas akhrinaysa waqtiga su'aalaha.
- 5) Su'aashaas waa in aysan ka badan mudo hal (1) daqiiqo ah.

¹⁵⁷ Qdobka 63^{aad} (2) ee "Suaal Oraaheed oo xukuumadda looga codsanayo jawaab Oraah ah" waxay markii hore u qornayd "Xubin kasta oo ka tirsan Golahawaxaa uu weydiin karaa su'aalo, taasoo uu ka jawaabayyo xubin ka tirsan Xukuumadda waqtiga su'aalaha, marba haddii su'aashaasi loo Gudbiyey Xoghayaha Guud iyadoo qoraal ah muddo aanan ka yareyn 72 (laba Todobaatan) Saacadood ka hor fadhigaas" waxaa loo badelay sida ku xusan kor. Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhiigii 3^{ad} kulankiisi 19^{ad} ee 23/10/2013.

Qdobka 63^{aad} (2), XH-GSH-B10 "Maalmaha shaqo oo aan Axada ahayn, xubin kasta oo ka tirsan Golaha wuxuu weydiin karaa su'aalo, taasoo uu ka jawaabayyo xubin ka tirsan Golaha xukuumadda waqtiga su'aalaha, mar haddii ujeedada guud ee su'ashaashi loo gudbiyey Xoghayaha Guud iyadoo qoraal ah mudo aan ka yareyn todobaatan & laba (72)-saacadood ka hor fadhigaas". Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhalacy Disember 31, 2022.

- 6) Jawaabta su'aasha waa in aysan ka badnaan sadex (3) daqiiqo.
- 7) Xildhibaanadu su'aal dheeraad ah oo quseeya ujeedadaas waa ay weydiin karaan xubinta xukuumada ka socota, waana ineysan qaadan muddo aan ka badneyn seddax (3) daqiiqo¹⁵⁸.
- 8) Jawaab dheeri ah ayaa laga sameyn karaa hadal ahaan, waana inaysan ka badneyn mudo labo (2) daqiiqo.
- 9) Ra'isul-wasaaraha waa loo soo jeedin karaa su'aal, isaguna wuxu u gudbin karaa su'aal kasta mid ka mid wasiirradiisa haduu isagu go'aansado¹⁵⁹.
- 10) Haddii su'aal laga jawaabi waayo labo fadhi gudahood, su'aashaasi waxaa lagu soo daabacayaa warbaahinta ama waxaa loo baddelayaa codsi su'aal-wadareed¹⁶⁰.
- 11) Iska-dhega tirida joogta ah ee ka jawaabidda su'aasha ee la xiriirta faqradaha kore, waxaa ay keeni kartaa codsi su'aal-wadareed.

¹⁵⁸ Qodobka 63^{ad} (7) ee "Suaal Oraheed oo xukuumadda looga codsanayo jawaab Oraah ah" waxay u qorneyd "Su'aal dheeraad ah waa la weydiin karaa xubintaas xukuumadda ka socota, waana inaysan qaadan muddo aan ka badneyn laba (2) daqiiqo" waxaa loo badalay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3^{ad} kulankiisi 19nd ee 23/10/2013.

¹⁵⁹ Qodobka 63^{ad} (9) ee "Suaal Oraheed oo xukuumadda looga codsanayo jawaab Oraah ah" waxay u qornayd "xubinta soo Gudbisay su'aal waafaqsan Xeer Hoosaadka, waxay xaq u lahaaneysaa inay su'aashaasi weydiiso xukuumadda xitaa haddii Xukuumaddu aysan soo diyaarin jawaab" waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3^{ad} kulankiisi 19nd ee 23/10/2013.

¹⁶⁰ Qodobka 63^{ad} (10) ee "Su'aal Oraheed Xukuumadda Looga Codsanayo Jawaab Oraah Ah" waxay u qornayd "Haddii su'aal laga jawaabi waayo labo fadhi gudahood, su'aashaasi waxaa lagu soo daabacayaa Madbacadda ama waxaa loo baddelayaa codsi su'aal-wadareed". Waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 21nd ee 3/11/2018.

Qodobka 64aad: Su'aasha Xukuumadda Looga Codsanayo Jawaab Qoraal ah

- 1) Xubnaha Golaha waxaa ay su'aal codsi qoraal ah u gudbin karaan ra'isul-wasaaraha ama wasiir arrimaha la xiriira howlahooda. Jawaabta waa in lagu soo gudbiyaa muddo aanan ka badneyn labo (2) isbuuc kadib maalinka su'aashaasi la soo gudbiyey, waxaana lagu xusayaa qoraallada shirarka maalinka laga jawaabayo, ama maalinka ugu xigta ee uu goluhu fadhligiisa buuxo yeelanayo.
- 2) Liiska su'aalaha aan laga jawaabin mudadii loogu talo galay waxaa lagu daabacaya warbaahinta loona qeybinayaa xubnaha Golaha.

Qodobka 65aad: Hadal-jeedinta Wasiirrada

Codsi uu ogolaaday Guddoomiyaha ka dib, wasiir kasta wuxuu kala hadli karaa fadhiyada Golaha arrin kasta oo hoos imaanleysa xeen-daabka waajibaadkiisa. Kadib markuu hadalka jeediyo, Guddoomiyaha wuxuu ogolaanayaa wixii fikir ku biirin ah ama su'aal ah ee uu qabo xubin ka mid ah Golaha. Wasiirka hadalka jeediyay wuxuu xaq u leeyahay inuu jawaab kooban ka yiraahdo wixii fikir ku biirin ah ama su'aal ee loo soo jeediyay.

CUTUBKA 6AAD: GOLAHA SHACABKA & MADAXWEYNAHA

Qodobka 66aad: Doorashada Madaxweynaha

- 1) Sida ku cad Qodobka 111G (2), xarafka (a) ee dastuurka & Qodobka 4^{aad} ee "sharciga soo buuxinta kursiga ka

bannaanaada Golaha Shacabka soomaaliya”, ee ka soo baxay Golaha, kuna taariikheysan 19/april/2017, loona gudbiyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya 20/April/2017, “Guddiga Qaranka Madaxbannaan Ee Doorashooyinka” aaya maamulaya doorshada madaxweynaha. Habraaca doorashada madaxweynaha waxaa la raacayaa talaabooyinka ku cad Qdobka 89^{aad} ee dastuurka¹⁶¹.

- 2) Wadajirka labada gole ee baarlamaanka jamhuuriyadda federaalka soomaaliya waa inuu doorto madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka.
 - a) Toban iyo Shan (15)-maalmood kaddib marka uu qabsoomo fadhiga ugu horeeya ee Baarlamaanka cusub ee la doortey, ama
 - b) Soddon (30) maalmood gudahood, kaddib marka ay bannaanaato jagada madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka Soomaaliya.
- 3) Sida ku cad, Qdobka 89aad (2), ee dastuurka ugu yaraan saddex meelood labo (2/3) tirada guud ee golayaasha baarlamaanka, waa inay joogaan u codeynta doorashada madaxweynaha federaalka, waxaana guddoominaya Guddoomiyaha Golaha Shacabka. Haddii uu Guddoomiyaha maqan yahay, waxaa guddoominay ku-xigeenka kowaad ama kan labaad haddii ku-xigeenka kowaad maqan yahay.

¹⁶¹ Qdobka 66^{aad} (1) ee “Doorashada Madaxweynaha” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018.

Qdobka 66^{aad} “Doorashada Madaxweynaha” waxaa laga tiray Faqradiisii 2nd oo u qornay “Goluhu wuxuu dhisayaa Gudi doorashoo ku-meel-gaar ah oo si qoto dheer u eegaya buuxinta shuruudaha buuxinta murashaxnimo una kormeeraya diyaarinta & Maamulka doorashada madaxweynaha”. Goluhu waxay isla ogolaadeen kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 20^{aad} ee 31/10/2018.

- 4) Ka hor doorashada Madaxweynaha, JFS, Guddoomiyuhu wuxuu u yeerayaa xubnaha, in ay soo bandhigaan musharaxiinta xilka madaxweyne.
- 5) Ugu yaraan labaatan (20)-xubnood ee Golaha Shacabka, ama ugu yaraan hal (1) dowlad goboleed ayaa taageeri kara musharax madaxweyne iyaga oo u soo gudbinaya mooshin sheegaya magaca, taariikh nololeedka iyo khibrada masharaxa xilka madaxweyne.
- 6) Murashaxa jagada madaxweynaha waa inuu buuxiyaa shuruudaha ku qeexan Qodobka 88^{aad} ee dastuurka.

Qodobka 67aad: Eedeyn iyo Xil ka Qaadista Madaxweynaha JFS.

Eedaynta & xilka qaadista madaxweynaha JFS, waxaa loo marayaa habraaca ku xusan Qodobka 92aad ee dastuurka KMG¹⁶².

Qodobka 68aad: Dhaarinta Madaxweynaha JFS

Inta uusan xilka bilaabin, madaxweynaha jamhuuriyadda federaalku wuxuu Golaha Shacabka federaalka hortiisa ku marayaa dhaar, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha maxkamadda sare, dhaartaas oo ah sidan.

“Waxaan ku dhaaranyaa magaca Ilaalay inaan xilkayga u gudanaayo si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, dhawrana dastuurka qaranka iyo shuruucda kale oo dalka u yaalla”.

¹⁶² Qodobka 67^{aad} “Eedeynta & Xil-ka Qaadista Madaxweynaha, JFS” waxaa lagu soo gaabiyeey in la waafajiyoo Dastuurka KMG. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiqa 4^{aad}, kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

Qodobka 69aad: Bannaanaanta Xafiiska Madaxweynaha JFS

- 1) Maareynta bannaanaanta xafiiska madaxweynaha JFS, waxaa loo raacayaa habraaca ku xusan Qodobka 95^{aad}, dastuurka KMG¹⁶³.
- 2) Haddii uu bannaanaado xafiiska madaxweynaha, waxaa qabanaya xilka Guddoomiyaha Golaha Shacabka ilaa laga soo dooranayo madaxweynaha cusub muddo aan ka badnayn soddon (30) maalmood gudahood.
- 3) Haddii madaxweynaha JFS, uu ku dhaco xanuun aan karaysasho lahayn muddo ka badan seddex (3) bilood, oo ay caddeeyeen xeeldheerayaal caafimaad waxaa sharcian bannaanaanaya xilka xafiiska madaxweynaha.
- 4) Doorashada madaxweynaha JFS, beddelaya madaxweyne mansabkiisi bannaanaaday sida ku xusan faqrada 3^{aad}, waxaa loo marayaan habraaca doorashada Madaxweynaha ee ku xusan Qodobka 89^{aad} ee dastuurka.
- 5) Madaxweynaha JFS, ee lagu doorto si waafaqsan faqrada kore, wuxuu dhameystirayaan muddada xilhaynta ee u harsaneyd madaxweynahii ka horeeyey.

¹⁶³ Qodobka 69^{aad} (1) ee Bannaanaanta xafiiska Madaxweynaha, JFS, waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulankiisa 21^{aad} ee 31/10/2018

Qodobka 70aad: Maamuuska Madaxweynaha & Golaha Shacabka¹⁶⁴

- 1) Sida ku xusan Qodobka 90^{aad} ee dastuurka, xarfahiisa (g, h & i), madaxweynaha JFS, wuxuu hadal ka jeedin karaa Golaha Shacabka munaasabadaha.
 - a) Furitaanka kal-fadhiyada Golaha.
 - b) Wuxuu la hadlayaa fadhi gaar ah ee Golaha Shacabka sanadkiiba mar.
 - c) Wuxuu la hadli karaa Golaha Shacabka mar kasta oo kale.
- 2) Madaxweynaha waxaa ka reeban inuu ka qeyb galoo fadhiyada caadiga ah ee Golaha.
- 3) Waa in uu jiraa kursi u gaar ah madaxweynaha.
- 4) Waa in la aamusaa loona istaagaa madaxweynaha marki uu soo galayo kana baxayo.
- 5) Madaxweynaha waxaa u soo raaci kara sarkaal sharafeedkiisa (Aide-de camp).
- 6) Markuu Madaxweynuhu yimaado, waa inuu jeedinayaan qudbadiisa iyadoo loo dhageysanayo si xushmadi ku jirta lagana keenin wax su'aal ah ama faallo ah.

¹⁶⁴ Qodobka 70^{aad} “Maamuuska Madaxweynaha & Golaha Shacabka” ciwaanku wuxuu ahaa “Madaxweynaha & Golaha Shacabka”. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiiga 4^{aad}, kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

Qodobka 71aad: Fadhiyada Wadaaga Labada Aqal Ee Uu Madaxweynuhu Codsado¹⁶⁵

Hagidda fadhiyada wadaagga ah ee madaxweynuhu codsado waxaa loo marayaa habraaca ku xusan Qodobka 57^{aad} ee dastuurka KMG.

Qodobka 72aad: Ku Dhawaaqidda Xaaladda Deg-deg Ah

- 1) Sida ku cad; Qodobka 131^{aad} (1), ee dastuurka, xaalad degdeg ah waxaa la soo rogi karaa oo kaliya haddii ay lagama maarmaan u tahay wax-ka-qabashada xaalad ba'an oo ka dhalatay dagaal, weerar, fallaaganimo, kala-dambeyn la'aan, musiibo dabiici ah, ama arrin kale oo degdeg ah oo ba'an¹⁶⁶.
- 2) Xaalad degdeg ah waxaa looga dhawaaqi karaa guud ahaan ama qeyb ahaan dalka, laakiin waa inaanu ka badnaan inta looga baahan in wax looga qabto xaaladda.
- 3) Sida ku cad; Qodobka 131^{aad} (4), ee dastuurka KMG, baarlamaanku wuu ogolaan karaa ama waxa uu kordhin karaa waqtiga xaalad degdeg ah, isagoo gaarsiinaya muddo aan ka badneyn saddex (3) bilood. Haddii baarlamaanka federaalku uusan ogolaan ama uusan waqtii ku darin xaaladda degdeggaa ah, markaa xaalad degdeg ah ma jireyo¹⁶⁷.

¹⁶⁵ Qodobka 71^{aad} “Fadhiyada wadaagga labada Aqal ee Madaxweynuhu codsado” waa cusub yahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulankiisa 21st ee 3/11/2018

¹⁶⁶ Qodobka 72^{aad} (1 & 2) ee “ku dhawaaqidda xaalad degdeg ah” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulankiisa 21st ee 3/11/2018

¹⁶⁷ Qodobka 72^{aad} (3) ee “ku dhawaaqidda xaalad deg dega ah” waxay u qornayd Golaha shacabku wuxuu ansixin karaa ama dheereyn xaalad dagdag ah si waafqasan Qodobka 131 faqradiisa 3rd ee Dastuurka Kumeele Gaarka ah. Waxaa loo baddelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulankiisa 21st ee 3/11/2018

Qodobka 73aad: Ku Dhawaaqidda Xaalad Dagaal¹⁶⁸

- 1) Sida ku cad Qodobka 90^{aad} ee DKMG ah, xaalad dagaal waxaa ku dhawaaqi kara madaxweynaha JFS.
- 2) Golaha shacabku si uu ansixiyo xaalad dagaal oo ku dhawaaqay madaxweynaha JFS, waxaa loo marayaa habraaca ansixinta xaalad degdeg ah, si waafaqsan qod-131^{aad} ee DKMG.
- 3) Haddii ayna suuragal aheyn in baarlamaanka laga dalbo in uu ansixiyo xaaladda dagaal inta uusan madaxweynuhu ku dhawaaqin, madaxweynaha ayaa ku dhawaaqi kara xaaladda dagaal kadibna todobaatan iyo laba (72) saac gudahood uga dalbada baarlamaanka ansixinta xaaladda dagaal.
- 4) Haddii xaaaladda dagaal lagu dhawaaqo iyada uu baarlamaanku fasax ku maqan yahay, Guddoomiyaha Golaha Shacabka ayaa si dhaqsi ah isugu yeeraya baarlamaanka fadhi aan caadi aheyn afartan iyo siddeed saac (48) gudahood kadib ku dhawaaqidda.
- 5) Madaxweynaha oo haysta ansixinta baarlamaanka wuxuu burin (ka noqon karaa) karaa ku dhawaaqidii xaalad dagaal.

¹⁶⁸ Qodobka 73^{aad} “Ku dhawaaqidda xaalad dagaal” waa cusub yahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

CUTUBKA 7AAD: SOO-JEEDINADA (MOTIONS)

Qodobka 74aad: Noocyada Soojeedinnada (Types of Motions)¹⁶⁹

- 1) Golaha Shacabka wuxuu ka doodayaa soo-jeedinada.
 - a) Arrin waliba oo u baahan cod waa in loo soo bandhigaa qaab Soo-jeedin ah.
 - b) Soo-jeedinadu waxay u qeybsamaan:
 - i. Soo-jeedin habraac (procedural motion) iyo
 - ii. Soo-jeedin nuxur (substantive motion).
- 2) Soo-jeedintu waxay noqon kartaa mid khusaysa habraaca, isla markaana Soo-jeedinteedu aysan u baahnayn wax wargelin ah, waxaana ka mid ah.
 - a) Soo-jeedin in fadhiga dib loo dhigo maalinta xigta.
 - b) Soo-jeedin in dooda dib loogu dhigo maalinta xigta.
 - c) Soo-jeedin dhexgal toosineed ayadoo dood socota.
 - d) Soo-jeedin in la xiro dooda lana codeeyo.
 - e) Soo-jeedin in la xaqiijiyo guntanka.
 - f) Soo-jeedin in dib u tirin lagu sameeyo codbixin gacan-taag ah.
- 3) Soo-jeedintu waxay noqon kartaa mid nuxur, oo u baahan in guddoonka la soo wargeliyo inta aan la soo jeedin. Waxaana ka mid ah:

¹⁶⁹ Qodobka 74^{aad} “Noocyada Soo-jeedinnada” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

- a) Soo-jeedin wax ka baddelid ajendaha fadhiba.
 - b) Soo-jeedin hindise-sharchiyeed ama qaraar.
 - c) Soo-jeedin wax ka bedel hindise-sharchiyeed ama qaraar.
 - d) Soo-jeedin heshiis caalimi ah.
 - e) Soo-jeedin wax ka bedelid dastuurka.
 - f) Soo-jeedin wax ka bedelid xeer-hoosaadka Golaha.
 - g) Soo-jeedin eedayn madaxwayne.
 - h) Soo-jeedin kalsoonni kala noqosho xukuumad.
 - i) Soo-jeedin xil-ka qaadis guddoonka Golaha Shacabka.
 - j) Soojeedin kalsoonni kala noqosho habdhowr.
- 4) Soo-jeedinta Nuxur waxaa soo jeedin kara:
- a) Golaha wasiirada.
 - b) Xildhibaannada ama.
 - c) Gudi Golaha Shacabka ah haddii uusan xeer-hoosadka si kale u qeelin.

Qodobka 75aad: Qabashada Soo-jeedinnada¹⁷⁰

Habraaca qabashada soo-jedinada (motions) waa:

- 1) Soo jeedinta nuxur waa in ay ahaataa mid qoraal ah, kuna saxiixan yihiin guntanka xildhibaanada uu ku ansaxayo Soo-jeedintiisu.
- 2) Soo-jeedinta (motion) nuxur waa in loo gudbiyaa xafiiska guddoonka, maalin shaqo, saacad shaqo loona diiwaangeliyaa in la qabtay.

¹⁷⁰ Qodobka 75^{aad} “Qabashada Soo-jeedinnada” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

- 3) Guddoonku marka la diiwaan-geliyo ka dib, soo-jeedin kasta oo ka hor-imaanaysa shareecada islamka, dastuurka, shuruucda kale ee dalka ama xeer-hoosaadka Golaha, waa inuu buriyaa isla markaasna ku wargeliyaa Golaha sababta burisay soo-jeedintaas.
- 4) Soo-jeedin kasta oo aan ku caddeyn dastuurka oo u baahan in la hubiyo sharcinimadeeda, guddomiyuhu waa inuu u gudbiyaa hay'adda ay khuseyso, si ay uga soo talo-bixiso muddo aan ka badneyn saddex (3) maalin shaqo¹⁷¹.
- 5) Guddoomiyaha goluhu, haddii uu u baahdo xog dheeri ah wuxuu u dirayaan Guddiga ee ay khuseyso muddo aan ka badneyn laba (2) maalin shaqo gudahood, waana inuu gudigu ka soo talo bixiyaa muddo aan ka badneyn saddex (3) maalin shaqo.
- 6) Guddoomiyuhu marka uu helo soojeedinta oo ay la socoto faahfaahinta Guddiga, waa inuu afar iyo labaatan saaac gudahood (24), u soo gudbiyaa Golaha.
- 7) Xildhibaan kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu ku biiro ama ka baxo soojeedin inta aan guddoonka loo gudbin, mar haddii loo gudbiyo guddoonka, saxiixayaasha Soo-jeedintu kama noqon karaan saxiixooda soojeedinta (motion) ka.
- 8) Guddoonka ma qaban karo mooshin la mid ah ama lagu burinyo mooshin horay loo soo gudbiyay ilaa iyo inta go'aan laga gaarayo mooshinkii hore.

¹⁷¹ Qodobka 75^{ad} (4) XH-GSH-B10 “Soo-jeedin kasta oo aan ku caddeyn dastuurka oo u baahan in la hubiyo sharcinimadeeda, guddomiyuhu waa inuu u gudbiyaa hay'adda ay khuseyso, si ay uga soo talo-bixiso”. Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhliga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

- 9) Soo-jeedin (motion) kasta oo nuxur oo mara habraaca ku cad qodobka 75^{aad}, haddii aysan mudada guddoonku haysan karo ku caddeyn dastuurka iyo xeer-hoosaadka Golaha, waa in guddoonku hor keena Golaha muddo aan ka badneyn afartan iyo sideed (48) saac marka la qabto¹⁷².

Qodobka 76aad: Habraaca Doodda Soo-jeedinada¹⁷³

- 1) Soo-jeedin nuxur kasta waa in loo qeybiyaa Golaha ka hor doodda.
- 2) Inta aan la furin dooda Soo-jeedinta, qof ka tirsan soo jeediyayaasha ayaa u aqrinaya Golaha soo-jeedinta muddo aan ka badneyn tobant (10) daqiiqo, isagoo faahfaahinaya nuxurka soojeedinta iyo magacyada xubnaha soo jeediye, isla markaasna waxaa taageeraya xubin ka tirsan soojeediyayaasha muddo aan ka badneyn shan (5) daqiiqo¹⁷⁴.
- 3) Goluhu waa in uusan u gudbin soo jeedin nuxur kale, asigoo aan dhameyn soo-jeedin nuxur oo horey loogu soo gudbiyay.
- 4) Inta lagu guda jiro doodda, Soo-jeedinta habraaca ayaa mudnaanta ka leh soo jeedinta nuxur.

Qodobka 77aad: Codsi Wadareed Qoraal Ah (Petition)

- 1) Codsi wadareedka waa inuu keydiyo Xoghayaha Guud.

¹⁷² Qodobka 75^{aad} (9) waa cusub tahay. Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

¹⁷³ Qodobka 76^{aad} “Habraaca Doodda Soojeedinada” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

¹⁷⁴ Qodobka 76^{aad} (2) XH-GSH-B10 “Inta aan la furin dooda Soo-jeedinta, qof ka tirsan soo jeediyayaasha ayaa u aqrinaya Golaha soo-jeedinta”.

- 2) Codsi wadareed waliba waa inuu soo jeediya xildhibaan.
- 3) Marka codsi wadareed loo soo-jeedinaayo Golaha, xildhibaanku waa in uusan ka bixin mowduuca codsi wadareedka.
- 4) Dhammaan codsi wadareedyada marka loo soo gudbiyo Golaha, guddoomiyuhu waxuu u xilsaari karaa guddi.
- 5) Guddoomiyuhu waxuu codsi wadareed u gudbin karaa wasaaradda ay khuseeyso waana in ay warbixin ugu soo gudbisaa todoba (7) maalin shaqo gudahood.
- 6) Codsi wadareedka loo gudbiyay gudi waa inay uga soo shaqeeyaan todoba (7) maalin gudahood.
- 7) Haddii xildhibaan keeno Soo-jeedin ku aadan in codsi wadareedka la celiyo sababo la xiriira in uusan u qorneen si haboon, ama sabab kale, goluhuna aqbalo, codsi wadareedka dib ayaa loo celinaya.
- 8) Goluhu markuu ka doodo codsi wadareedka, go'aanna ka gaaro, waxaa go'aanka loo gudbinayaa soo gudbiyayaasha codsi wadareedka iyadoo loo marsiinayo xafiiska Guddoomiyaha.

Qodobka 78aad: Hadaljeedin

Waxaa hadaljeedin leh:

- 1) Xubin kasta oo ka tirsan Golaha Shacabka oo is diwaan-galisay, guddoomiyuhuna fasaxay.

- 2) Xubinta codsanaysa in la siiyo hadalka waa in uu wargaliyaa xoghayaha. Guddoomiyaha ayaa siinayo xubnaha hadalka sida ay isugu xigaan.
- 3) Xubin ka tirsan Golaha, kama hadli karto arrin ku saabsan hal mowduuc in ka badan hal mar, haddii arrintaas aysan aheyn mid shakhsii ah oo isaga saameyneysa, ama la xiriirta xeer-hoosaadka ama cadeyn ku saabsan arrin aan hore looga hadlin lana xiriirta mowduucaasi.
- 4) Xubintii in ka badan labo jeer digniin ka hela, sabab la xiriirta ka bixida mowduuca laga doodayo ama aanan hadalkiisa ku dhameysan mudada la siiyey sida ku xusan faq.^{2aad}, guddoomiyuhu waxuu ka joojinayaa hadalka.
- 5) Haddii si kale uusan u go'aansan goluhu, hadalka xubinta kama badnaan karo tobant (10) daqiiqo.
- 6) Ka hadalka arrimaha ajendaha kama badnaanayo shan (5) daqiiqo.
- 7) Guddoomiyaha ayaa u ogolaan kara xubin inay hadasho waqtii ka badan muddada la qeexay haddii uu u arko macquul.

Qodobka 79aad: Dhengal Toosineed (Point of Order)

- 1) Xubin kasta waxay codsan kartaa dhengal toosineed (point of order), iyadoo ay xubin kale hadalkeeda wadato¹⁷⁵.
 - a) Dhengalka toosineed waxay ku imaan kartaa siyaabaha soo socda.

¹⁷⁵ Qodobka 79nd (1) ee "Dhengal Toosineed" waxaa ku cusub xarfaha (a-ilaa-l). Goluhu wuxuu isla ogaaladay kalfadhiga 4nd, kulanka 20nd ee 31/10/2018.

- i. Dhexgal toosin xeer-hoosaad (point of procedure).
 - ii. Dhexgal toosin caddeymeed (point of clarification).
 - iii. Dhexgal toosin xogsiin (point of information).
- b) Dhexgal toosineed ee arrimaha sharchiyeed ama xeerhoosaad waxay ku imaanaysaa hadal jeedin.
- c) Dhexgal toosin caddeyneed ama xogsiineed waxaa si qoraal ah loogu gudbinaya Guddoomiyaha, iyadoo isla markaasba loo sheegayo Golaha.
- 2) Guddoomiyaha wuxuu siin karaa fursad xubinta ka codsata dhexgal toosineed (point of order) haddii uu u arko sax.
- 3) Marka la aqbalo codsiga dhex-galka toosinteed (point of order), xubinta waxay si toos uga hadlaysaa qodobka uu u istaagay isagoo soo koobaya kamana hadli karo arin ka baxsan qodobka uu u istaagay.

Qodobka 80aad: Xaqa Ay Xubinta U Leedahay Jawaab Celin

- 1) Xildhibaan ama wasiir kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu jawaab deg-deg ka bixiyo dood/hadal lagu xusay magaciisa.
- 2) Xaqa jawaab celinta ee ku xusan kor faq.1^{aad}, waxaa lagu xadidayaa labo (2) daqiiqo.
- 3) Haddii xildhibaan ama wasiir isticmaalo xaqa jawaab celinta, waxaa loo ogolyahay xubintii jawaab celintii laga qaatay is-difaacid ku kooban hal daqiiqo.

CUTUBKA 8AAD: HINDISE SHARCIYEEDYADA

Qodobka 81aad: Curinta Hindise Sharchiyeedka

Waxaa hindise sharchiyeed soo bandhigi kara:

- 1) Golaha wasiirada; ama
- 2) Ugu yaraan tobant (10)-xildhibaan oo ka tirsan Golaha Shacabka, marka laga reebo hindise-sharchiyeed la xiriira misaaniyad sanadeedka, taasoo ka imaaneysa Golaha wasiirada.

Qodobka 82aad: Hor-tabinta Soo Bandhigidda Hindise Sharchiyeed¹⁷⁶

- 1) Xukuumaddu waxay codsan kartaa in loo soo hormariyo shuruucda ay mudnaanta siimayso ama shuruuc qabyo ah oo loo baahan yahay ama dhameystirka hindise sharci qabyo ah, doodiisuna socoto¹⁷⁷.
- 2) Xukuumaddu waxay hindise sharchiyeed u soo bandhigi kartaa Golaha labada bilood ee ugu horreeya kal-fadhi kasta¹⁷⁸.

¹⁷⁶ Qodobka 82nd "Hor-tabinta Soo Bandhigidda Hindise Sharchiyeed" cinwaanku wuxuu ahaa "Soo Bandhigidda Hindise Sharchiyeed". Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd, kulanka 21st ee 3/11/2018

Qodobka 82nd Cinwaankaan markiisi hore wuxuu ahaa "Soo Bandhigidda Hindise Sharchiyeed Degdeg ah". Waxaa loo baddelay siduu ugu qornaa XB9aad. Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhii 3rd kulankiisi 19nd ee 23/10/2013.

¹⁷⁷ Qodobka 82nd (1) ee "hortabinta soo bandhigid Hindise Sharchiyeed" oo markii ugu horreysay u qornaa "Xukuumaddu waxay awood u leedaday soo bandhigidda hindise sharchiyeedyo degdeg ah ama shuruuc qabyo ah oo loo baahan yahay ama dhameystirka hindise sharci oo qabyo ah doodiisuna socoto" waxaa loo baddelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3rd kulankiisi 19nd ee 23/10/2013.

¹⁷⁸ Qodobka 82nd (2) ee "Hortabinta soo Bandhigidda Hindise sharchiyeed" waxaa lagu soo kordhiyey Qodobka . Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3rd kulankiisi 19nd ee 23/10/2013.

Qodobka 83aad: Soo Bandhiggida iyo Akhrinta Hindise Sharciyeedka

- 1) Hindise sharciyeed walba (sharci qabya ah) wuxuu la xiriira soo jeedin codsi ogolaansho oo qaab mooshin leh (motion for leave) halkaas oo ay ku caddahay tilmaanta hindise sharciyeedka.
- 2) Hindise Sharciyeed waliba waa in xubnaha loo qaybiyo 48-saac ka hor inta uusan marin akhrinta koowaad¹⁷⁹.
- 3) Soo-jeedin (motion) soo bandhigaysa hindise sharciyeed cusub waxay ka gudbeysaa akhrinta koowaad haddii aan laga keenin wax dood ah, wax-ka-bedelid ama su'aal.
- 4) Hindise sharciyeed kasta (sharci qabya) ee la keeno Golaha Shacabka waa in ay ku lifaaqan yihiin arrimaha soo socda.
 - a) Faahfaahin ku saabsan arrimaha sharcigu xallinayo, ujeedooyinka iyo saameyn ta sharcigu xambaarsan yahay iyo in uu waafaqsan yahay dastuurka.
 - b) Caddeyn ku saabsan saameyn ta dhaqaale ee sharcigu leeyahay sanadka kowaad iyo mustaqabalka.

Qodobka 84aad: Akhrinta Hindise Sharci¹⁸⁰

- 1) Hindise Sharciyeed walba waa in laga hor-akhriyaa Golaha Shacabka sadex jeer oo kala duwan, sadax maalmood oo kala duwan, ka hor intuusan ansax noqon¹⁸¹.

¹⁷⁹ Qodobka 83^{aad} (2) ee "Soo bandhiggida & Akhrinta Hindise Sharciyeed" waa faqrad lagu soo daray Qodobka oo Goluhu anxiyey Kalfadhligii 3^{aad} kulankiisi 19^{aad} ee 23/10/2013.

¹⁸⁰ Qodobka 84^{aad}, Ciwaanka "Akhrinta Hindise Sharci" wuxuu markii hore ahoo "Saddex Jeer Akhrinta Hidise Sharci" waxaa la baddelay kalfadhliga 4^{aad} kulanka 21^{aad} ee 3rd Nofeember 2018.

¹⁸¹ Qodobka 84^{aad} (1) ee Qodobka "Akhrinta Hindise Sharci" waxay u qorneyd" Hindise Sharciyeed walba waa in laga hor akhriyaa Golaha Shacabka Saddex Jeer oo kala duwan, sadax maalmood oo kala duwan, ka hor inuusan ansax noqon. Haddii ay jirto arrin degdeg ah ama qeyrul-caadi ah, soojeedinta hindise sharciyeed waxay noqon

- 2) Akhrinta koowaad waxaa akhrinaya cidii keentay hindise sharchiyeedka, akhrinta labaad (oo ah xiliga soo jeedinta warbixinta Guddiga iyo dooda Golaha) iyo sedaxaad (oo ah akhrinta nuqulka hindise sharchiyeedka oo dhamaystiran oo ay ku jirto talo soo jeedintii xubnaha Golaha Shacabka) waxaa akhrinya Guddiga ay howshiisu la xiriirto hindise sharchiyeedkaas¹⁸².
- 3) Hindise sharchiyeedku marka uu ka gudbo akhrinta koowaad, waa in loo gudbiyaa Guddiga ay hawlihiisu la xariiraan, ka hor inta aan soo jeedin (motion) wax-ka-bedelid aan lagu sameyn¹⁸³.
- 4) Akhrinta koowaad ee hindise sharchiyeedka laga hor-akhrinayo Golaha, doodda waa in ay ku koobnaato mabaadi'da guud iyo ujeedada hindise sharchiyeedka. Dhinaca soo jeeediyay hindise sharchiyeed, waxaa loo ogolaanayaa in uu bixiyo faahfaahin dheeraad ah oo qeexseysa qdobada hindise sharchiyeedkaas. si waafaqsan qdobka 2nd (3) ee dastuurka ku mealgaarka ah. Wax ka-badal lama sameynayo akhrinta kowaad¹⁸⁴.

kartaa laba ama saddex jeer, amah al maalin Gudaheed ayaa laga Gudbi karaa dhowr marxaladood" waxaa loo baddelay sida kor ku xasan waxaana Goluhu ansixiyey Kalfadhligii 3rd kulankiisi 19th ee 23/10/2013.

¹⁸² Qodobka 84nd (2) ee "akhrinta Hindise Sharci" waa faqro lagu soo kordhiyey Qodobka . Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhligii 3rd kulankiisi 19th 23/10/2013.

¹⁸³ Qodobka 84nd (3) ee "Akhrinta Hindise Sharci" waxay horey u aheyd faqrada 2nd, markii faqrada 2nd la soo kordhiyey ayeq noqotay fakhrrada 3rd. Waxayna markii hore u qorneyd "hindise Sharchiyeed walba waa in la akhrriya laba jeer ka dibna loo Gudbiyaa Guddiga ay howlihiisu la xiriiraan ka hor inta aan soojeedin (motion) wax ka baddel lagu sameyn" waxaa loo baddelay sida kor ku xusan oo goluhu ansixiyey kalfadhligii 3rd kluankiisi 19th ee 23/10/2013.

¹⁸⁴ Qodobka 84nd (4) ee " Akhrinta Hindise Sharci" waxay markii hore aheyd Faqrada 3rd waxay isbaddeshay markii faqrada 2nd lagu soo daray. Waxay markii hore u qornayd "Waqtiga labaad ee Hindise Sharchiyeedka laga hor akhrinayo Golaha Shacabka, doodad goluhu waa inay ku koobnaato mabaad'a guud iyo Ujeedada Hindise Sharchiyeedka. Dhinaca soojeediyey Hindise Sharchiyeed, ha ahaado xubin Golahaka mid ah ama wasir, waxaa loo oggolaanayaa inuu bixiyo faahfaahin dheeraad ah ee qeexseysa qdobada hindise sharchiyeedkaas. Wax ka baddel lama sameynayo heerkaan". Waxaa loo baddelay sida kor ku xusan oo Goluhu ansixiyey kalfadhligii 3rd kulankiisi 19th ee 23/10/2013.

Qodobka 84nd (4) XH-GSH-B10 "Akhrinta koowaad ee hindise sharchiyeedka laga hor-akhrinayo Golaha, doodda waa in ay ku koobnaato mabaadi'da guud iyo ujeedada hindise sharchiyeedka. Dhinaca soo jeeediyay hindise

Qodobka 85aad: U-gudbinta Hindise Sharchiyeedka Guddiga U-Xil-Saaraan

- 1) Hindise sharchiyeedku markuu ka soo gudbo akhrinta koowaad, waa in si dhaqsa ah loogu gudbiyaa Guddiga u-xilsaaran, si uu uga doodo ugana talo bixiyo, isagoo la kaashanaya cid walba oo aqoon u leh, ama uu khuseeyo, ka dibna dib ugu soo celiyo Golaha¹⁸⁵.
- 2) Marka uu gudigu ka doodayo hindise sharchiyeedka, qodobbada waxaa looga doodayaa sida yu kala horeeyaan.

Qodobka 86aad: Soo-Celinta Warbixinta Hindise Sharchiyeedka ee Heerka Labaad iyo U-Gudbinta Guddiga

- 1) Golaha Shacabka waa in lagu wargeliyaa wixii soo jeedin wax-ka-bededid ah ee Guddiga ku dhaqaaqay. Hindise sharchiyeed walba ee gudi soo bandhigo, wax ha laga beddelo ama yaan laga beddelin, waa in loo soo gudbiyaa Golaha, iyadoo ay la socoto warbixin qoraal ah¹⁸⁶.
- 2) Warbixinta mid ka mid ah gudiyada goluhu uu ka bixiyey hindise sharchiyeed hore loogu gudbiyey si loo mariyo akhrinta labaad, lagama dooddi karo saddex (3) maalmood ka hor laga bilaabo markii loo qeybiyey xubnaha Golaha Shacabka¹⁸⁷.

sharchiyeed, waxaa loo ogolaanayaa in uu bixiyo faahfaahin dheeraad ah oo qeexeya qodobada hindise sharchiyeedkaas. Wax ka-badal lama sameynayo akhrinta kowaad". Goluhu wuxuu ansixiyey waxkabadelkaan Kalfadhiga 2aad, Kulanka 6aad ee dhacay Disember 31, 2022.

¹⁸⁵ Qodobka 85^{aad} (I) ee "U-gudbinta hindise Sharchiyeed Gudi u Xilsaaran" waxay markii hore u qormeyd "markii Hindise Sharchiyeedku ka soo Gudbo soojeedinta labaad, waa in si dhakhsa ah loogu Gudbiyaa Guddiga (U-Xilsaaran) si uu ula kaashado qof walba oo aqoon u leh mowduca ka dibna dib loogu soo celiyo Golaha Shacabka. Waxaa la baddelay oo Goluhu ansixiyey kalfadhigii 3^{aad} kulankiisi 19^{aad} ee 23/10/2013.

¹⁸⁶ Qodobka 86^{aad} (I) ee "Soo Celinta Warbixinta hindise Sharchiyeedka ee heerka labaad & u Gudbinta Guddiga" waxaa laga soo rarey Qodobka "U-gudbinta hindise Sharchiyeed Gudi u Xilsaaran". Goluhu wuxuu ansixiyey Kalfadhiga 3^{aad} kulankiisa 19^{aad} ee 23/10/2013.

¹⁸⁷ Qodobka 86^{aad} (2) ee "Soo Celinta Warbixinta hindise Sharchiyeedka ee heerka labaad & u Gudbinta Guddiga" waxay markii hore u qornayd "warbixinta mid ka mida Gudiyada Goluhu ka bixiyey Hindise sharchiyeed hore loo

Qodobka 87aad: Wax-ka-badelidda Hindise Sharchiyeedka ee Xiliga Warbixinta Guddiga¹⁸⁸

- 1) Xubnaha aan ka mid aheyn Guddiga ka baaraan degey hindise-sharchiyeedka, waa inay fursad u helaan wixii soo jeedin wax ku daris ama wax ka baddelid ah oo loo baahan yahay.
- 2) Xubnaha aan ka mid ahayn Guddiga howsha gacanta ku haya, waxay soo gudbin karaan soojeedin wax ka bedel qoraal ah, oo ku saabsan hindise sharchiyeedka uu gudigu gacanta ku hayo afar maalmood ka hor, intaan hindise-sharchiyeedka loo mudayn akhrinta labaad¹⁸⁹.
- 3) Guddoonka Golaha Shacabka awood ayuu u leeyahay in uu kala qaado ama isku daro talooyin wax-ka bedelid ama qodobo kala duwan marka lagu guda jiro doodda warbixinta Guddiga. Wuxuu kaloo awood u leeyahay, haddii uu u arko sidaas, in uu ka codsado xubinta soo jeedisay wax-ka-badelidda in ay ka bixiso faahfaahin kooban si guddoonka fikir uga qaato.

Gudbien si loo mariyo akhrinta labaad, lagama doodi karo muddo ka yar todoba (7)-cisho laga bilaabo markii loo qeybiyey xubnaha Golaha Shacabka” waxaa loo baddelay sida kor ku xusan oo Goluhu ansixiyey Kalfadhigii 3rd kulankuisii 19th ee 23/10/2013.

¹⁸⁸ Qodobka 87^{aad} “Wax-kaa-badelidda Hindise sharchiyeedka ee Xilligiga Warbixinta Guddiga” Cinwaanka wuxuu ahaa “Wax-Ka-badelidda Hindise sharchiyeedka ka dib Soojeedinta warbixinta Guddiga loo Gudbiyey”. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

¹⁸⁹ Qodobka 87^{aad} (2) ee “Wax-Ka-Badelidda Hindise Sharchiyeedka ee Xilligiga Warbixinta Guddiga” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 20^{aad} ee 31/10/2018.

- 4) Guddoonka uma soo jeedin karo Golaha Shacabka, qodob wax-ka bedelid ah oo hore Guddiga u xil-saaran hindise sharchiyeedku ugu arkay mid aan waafaqsaneyn sharciga. Howsha guddoonka waxay ku kooban tahay qodobada ama arrimaha uu Guddiga waqtii ama fursad u waayey in uu kusoo lafa-guro.
- 5) Guddoomiyuhu wuxuu u soo bandhigi karaa (si looga dodo) soo jeedin wax ka badalid oo hore ay u diideen Guddiga u xil saarnaa, haddii uu u arko mid muhimadeeda leh oo mudan in tix gelin dheeraad ah la siiyo, haddii aysan gudigu soo jeedintaas ku diidin ka hor imaasho sharci¹⁹⁰.
- 6) Guddoonka ma aqbali karo codsi dood galin wax ka badalid la xiriirta oo keeni kara qas iyo isku dir, lehna dabeeccad soo noqnoqosha ama ujeedada laga leeyahay ay tahay in si macno darra ah u dheereeyo hannanka dib-u-eegista (dooda) ee warbixinta (Guddiga).

Qodobka 88aad: Habka Doodda Wax-Ka-Bedelidda Hindise Sharchiyeed¹⁹¹

- 1) Ka doodista Hindise-Sharchiyeed waa in ay u kala horeysaa sida soo socda:
 - a) Cidda keentay hindise sharchiyeedka.
 - b) Guddoomiyaha Guddiga ay khuseyso hindise sharchiyeedka.

¹⁹⁰ Qodobka 87^{aad} (4) ee “wax-ka-badelidda hindise sharchiyeedka ee Xilliga Warbixinta Guddiga” waxay markii hore u qornayd “Guddoomiyuhu wuxuu Golahuu soo bandhigi karaa (si looga dodo) soo jeedin wax ka badalid oo hore u diideen Guddiga u xilsaarnaa, haddii uu u arko mid muhimadeeda leh, mudanna in txigelin dheeraad ah la siiyo” waxaa loo qoray sida kor ku xusan oo Goluhu anisixiyey Kalfadhligii 3^{ad} kulankiisi 19^{ad} ee 23/10/2013.

¹⁹¹ Qodobka 88^{aad} “Habka Doodda Wax-Ka-badelidda Hindise Sharchiyeed” waxaa lagu soo daray faqrada 1aad oo ka soo wareegtay Qodobka “Ka Doodista hindise Sharchiyeedka ama Mooshinka”. Goluhu wuxuu isla ogolaaday Kalfadhliga 4^{ad}, kulanka 20^{ad} ee 31/10/2018.

- c) Kulanka guud ee Golaha.
 - d) Haddii aaney xukuumadu keenin hindise-sharchiyeedka, golahu wuxuu xukuumada weydiin karaa aragtideeda (fikerkeeda).
 - e) Xubnaha kale waxay u hadlayaan sida uu u kala siyo hadalka guddoomiyuhu. Markay dooda dhamaato, cidda keentay hindise-sharchiyeedka waxay xaq u leedahay in ay jawaab bixiso. Intaa kadib Guddoomiyaha ayaa soo xiraya dooda isagoo dalbanaya codeynta xubnaha ee ku aadan hindise-sharchiyeedka.
- 2) Soo-jeedin walba oo wax-ka-bedelid ah, oo wargelinteeda waafaqsan tahay xeer-hoosaadka waa laga doodi kara waxna waa laga badeli karaa.
- 3) Haddii la ogolaado in laga doodayo warbixin gudi, xubin walba waxaa loo ogol yahay in ay hadasho mar qura, waqtii aan ka badneyn tobani (10)-daqiqiyo, iyadoo xaq u yeelmaneysa soo jeedin wax-ka-bedelid kasta ee warbixinta Guddiga.
- 4) Dooda la xiriirta wax-ka-bedelid hindise sharchiyeed, dib ayaa loo dhigi karaa muddo usbuuc ah, haddii sidaas ay codsadaan ugu yaraan tobani (10)-xubnood oo ka duwan xubnihii soo bandhigay wax-ka-bedelidda ama inta badan xubnaha Guddiga ku shaqo leh.

Qodobka 89aad: Soo-Jeedinta (Motion) Gabagabada Heerka Warbixinta

Marka ay soo afjaranto ka doodidda hindise-sharchiyeed laba goor akhris maray, waxaa la soo gudbinayaan Soo-jeedin (motion) ku aadan ogolaanshaha wax ka bedelka hindise-sharchiyeedka ama in sidiisa loo qaato.

Qodobka 90aad: Hubinta & Ansixinta Hidise-Sharchiyeedka

- 1) Haddii hindise sharchiyeed laga hor-akhriyey Golaha laba jeer, waxna laga bedelay ama dood la geliyey waqtiga warbixinta Guddiga la soo bandhigayey, waa in loo gudbiyaa akhrin sadexaad kadibna lagu ansixiyaa saddex maalmood kadib¹⁹².
- 2) Marka hindise sharchiyeedka ka gudbo akhrinta sedexaad, qodobada la doonayo in wax laga bedelo waa in lagu wargeliyaa Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyadoo qoraal ah, kaasoo ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan toban (10)-xubnood, 24-saac ka hor inta aan la ansixin hindise sharchiyeedka¹⁹³.
- 3) Wixii soo jeedin wax-ka-bedelid ah ee ku saabsan hindise sharchiyeed la hor keenay Golaha Shacabka, waa in loo qeybiyaa Golaha iyadoo qoraal ah. Haddii xubinihii soo bandhigay ka noqdaan wax ka beddelkii ay soo jeediyeen, xubin kasta oo kale ayaa soo jeedin karta isla wax-ka-beddelkii oo uu ka noqday soo jeidiyihii hore¹⁹⁴.

¹⁹² Qodobka 90^{aad} (1) ee “Hubinta & Ansixinta Hindise Sharchiyeed” waxay markii hore u qornayd “haddii Hindise Sharchiyeed Golalahaga hor akhriyey laba jeer, waxna laga baddelay ama dood la geliyey waqtiga warbixinta Guddiga la soo bandhigayey, waa in loo Gudbiyaa akhrinta saddexaad laguna ansixiyaa fadhliga xiga ee Golaha Shacabka” waxaa loo baddelay sida kor ku xusan oo Golulu ansixiyey Kalfadhligii 3^{aad} kulankiisi 19^{ad} ee 23/10/2013.

¹⁹³ Qodobka 90^{aad} (2) ee “Hubinta & Ansixinta Hindise Sharchiyeed” waxaa laga soo raray oo ay horey ugu qorneyd “wax-ka-baddelida Hindise-Sharchiyeedka ee Xilliga warbixinta Guddiga” waxay markii hore u qornayd “Qodabada la doonayo in wax laga baddelo wa ain lagu wargeliyaa Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyadoo qoraal ah, kaasoo ay ku saxiixan yihiin ugu yaraan 20-xubnood, 24-saac ka hor intaan warbixinta Guddiga la soo jeedin”. Waxaa loo qoray sida kor ku xusan oo Golulu ansixiyey kalfadhligii 3^{aad} kulankiisi 19^{ad} ee 23/10/2013.

¹⁹⁴ Qodobka 90^{aad} (3) ee “Hubinta & Ansixinta Hindise Sharchiyeed” waxay laga soo raray oo ay horey ugu qorneyd “wax-ka-baddelida Hindise-Sharchiyeedka ee Xilliga warbixinta Guddiga” waxay markii hore u qornayd “Wixii soojeedin wax-ka-baddelid ah eek u saabsan hindise sharchiyeed la horkeenay Golaha Shacabka. Golulu ansixiyey kalfadhligii 3^{aad} kulankiisi 19^{ad} ee 23/10/2013

- 4) Haddii guddoonka Golaha Shacabka uu u arko wax-ka-bedelid hindise sharchiyeed mid aan sharciga waafaqsaneyn, waa in lagu celiya xubnihi soo bandhigay¹⁹⁵
- 5) Haddii tobant (10) xildhibaan isla soo bandhigeen soo jeedin wax-ka bedelid hindise sharchiyeed, guddoonka ayaa tilmaamayo xubinta soo jeedin doonta wax-ka-bedelidaas¹⁹⁶.
- 6) Geba-gebada warbixinta Guddiga oo lagu daro waxka beddalada la qaata, waa in dib loogu celiyo Guddiga ku shaqada leh¹⁹⁷.
- 7) Gudigu waxay hubiyaan in waxka beddaladaas sidii ay ahayd loogu daray, mana sameynayo waxka beddal cusub ama dood, haddii aysan wax ka dhimaneyn ama ka hor imaaneyn qodobbo dastuurka ama shuruucda kale ee dalka.
- 8) Gudigu haddii ay arkaan in hindise-sharchiyeedku ama qodobbo ka mid ahi ka hor imaanayo dastuurka ama shuruucda kale ee dalka, waxay dib ugu soo celinayaan Golaha.
- 9) Marka gudigu hubiyo in hindise-sharchiyeedku saxan yahay, waa in loo muddeeyaa akhrinta seddaxaad¹⁹⁸.

¹⁹⁵ Qodobka 90nd (4) ee “Hubinta & Ansixinta Hindise Sharchiyeed” waxaa laga soo raray oo ay horey ugu qorneyd “wax-ka-baddelida Hindise-Sharchiyeedka ee Xilliga warbixinta Guddiga” waxay markii hore u qornayd “Haddii Guddoonka GolahaShacabku uu u arko wax-ka-bedeled hindise sharchiyeed mid aan sharciga waafaqsaneyn waa in lagu celiya xubinti soo bandhigay” waxaa loo badeley sida kor ku xusan oo Goluhu ansixiyey Kalfadliga 3rd kulankiisi 19nd ee 23/10/2013.

¹⁹⁶ Qodobka 90nd (5) ee “Hubinta & Ansixinta Hindise Sharchiyeed” waxaa laga soo raray oo ay horey ugu qorneyd “wax-ka-baddelida Hindise-Sharchiyeedka ee Xilliga warbixinta Guddiga” waxay markii hore u qornayd “Haddii dhown xubnood isla bandhigaan soojeedin wax ka badelid hindise sharchiyeed, Guddoonka ayaa tilmaamaya xubinta soojeedin doontawax-ka-badel noocas ah” waxaa loo qoray sida kor ku xusan oo Goluhu ansixiyey kalfadliga 3rd kulankiisa 19nd ee 23/10/2013.

¹⁹⁷ Qodobka 90nd (6) ee “Hubinta & Ansixinta Hindise Sharchiyeed” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadliga 4nd kulankiisa 21 ee 3rd Nofeember 2018.

¹⁹⁸ Qodobka 90nd (7) ee “Hubinta & Ansixinta Hindise Sharchiyeed” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadliga 4nd kulankiisa 21 ee 3rd Nofeember 2018.

10) Ka hor akhrinta seddaxaad, xubnaha waa in loo qaybiyaa nuqulka hindise-sharchiyeedka ugu yaraan laba maalin¹⁹⁹.

Qodobka 91aad: Hindise Sharchiyeed Sugaya Saxixa Madaxweynaha

- 1) Hindise sharchiyeed wuxuu sharci noqonaaya marka uu maro habraaca sharci dejinta ee ku xusan dastuurka Qodobka 85^{aad} iyo xeer-hoosaadka kadibna uu saxiixo madaxweynaha jamhuuriyadda federaalka ee soomaaliya, laguna soo saaro faafinta rasmiga ee dawladda.
- 2) Sida ku cad Qodobka 81^{aad} (4), ee dastuurka KMG ah, Golaha Shacabka oo kaliya ayaa madaxweynaha JFS, u diri kara sharci qabyo ah si uu u saxiixo loona faafiyoo²⁰⁰.
- 3) Madaxweynuhu, waa inuu muddo aan ka badneyn soddon (30) maalmood oo maalmo shaqo ah ku saxiixaa ama dib ugu soo celiyaa Golaha, isagoo soo raacinaya sababta soo celinta hindise sharchiyeed soo maray Golaha Shacabka oo sugaya saxiixiisa²⁰¹.
- 4) Haddii mudada 30-cisho ku filnaan weydo, madaxweynuhu wuxuu codsan karaa muddo kordhin aan ka badneyn soddon (30)-cisho, ka hor intaysan ka dhamaan²⁰².

¹⁹⁹ Qodobka 90^{aad} (8) ee “Hubinta & Ansixinta Hindise Sharchiyeed” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiisa 21 ee 3rd Nofeember 2018.

²⁰⁰ Qodobka 91^{aad} (2) ee “Hindise Sharchiyeed Sugaya Saxixa Madaxweynaha” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiisa 21 ee 3rd Nofeember 2018.

²⁰¹ Qodobka 91^{aad} (3) ee “Hindise Sharchiyeed Sugaya Saxixa Madaxweynaha” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiisa 21 ee 3rd Nofeember 2018.

²⁰² Qodobka 91^{aad} (4) ee “Hindise Sharchiyeed Sugaya Saxixa Madaxweynaha” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiisa 21 ee 3rd Nofeember 2018.

- 5) Hindise shariyeed kasta oo Golaha shacabku u dirayo Madaxweynaha JFS si uu u saxiixo, goluhu waa inuu xaqqiiyaa inuu yahay nuqulka saxda ah ee Golaha²⁰³.

Qodobka 92aad: Hindise Shariyeedka La Diiday

- 1) Sida ku cad Qodobka 81^{aad} (2), ee dastuurka KMG ah, Golaha Shacabka oo kaliya ayaa xaq u leh awoodda diidmada sharci qabyo ah”.
- 2) Haddii Golaha Shacabka diido hindise-shariyeed, hindise haasi laguma soo celinkaro muddo 30 malmoood laga bilaabo maalinta hindisaha la diiday, sida ku xusan Qodobka 68 (4) ee dastuurka²⁰⁴.

Qodobka 93aad: Faafinta & Xafidaadda Sharciyada

Kaydka sharciyada dawladda iyo baafintooda waxaa mas’uul ka ah xoghayeyaasha labada aqal iyo garyaqaanka guud ee jamhuuriyadda federaalka oo faafinta rasmiga ah ku samaynaya, sida ku cad Qodobka 84^{aad} ee dastuurka.

Qodobka 94aad: Dhaqan-Gelidda Sharciyada

Sida ku cad Qodobka 85^{aad} ee dastuurka, hindise sharci qabyo ah wuxuu dhaqan-gelayaa kaddib marka uu maro habraaca sharci-dejinta, madaxweynaha jamhuuriyadduna saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga.

²⁰³ Qodobka 91^{aad} (5) ee “Hindise Shariyeed Sugaya Saxiixa Madaxweynaha” waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd kulankiisa 21 ee 3rd Nofeember 2018.

²⁰⁴ Qodobka 92^{aad} (2) ee “Hindise Shariyeed la diiday” waa cusub tahay. Goluhu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd kulankiisa 21 ee 3rd Nofeember 2018.

Qodobka 95aad: Durid Sharci

- 1) Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada iyo dhaqan-gelintiisa, si waafaqsan Qodobka 86^{aad} ee dastuurka, waxaa lagu duri karaa oo keliya marka uu ka soo horjeedo shareecada islaamka iyo dastuurka.
- 2) Sharci maray habraaca ansixinta sharciyada, si waafaqsan, sida ku xusan cutubka 6^{aad} ee dastuurka iyo xeerka Golaha, waxaa duri kara:
 - a) Saddex meelood (1/3) xubnaha Golaha.
 - b) Wasiirada federaalka.
 - c) Toban-kun (10,000) iyo in ka badan oo cod bixiyayaal ah oo diiwan-gashan.
- 3) Durid sharci ee waafaqsan faqaradda (1 & 2) ee qodobkaan, waxaa la horgeyn karaa go'aanna ka gaari karta maxkamadda dastuurka ah oo keliya.
- 4) Haddii maxkamadda dastuurku ay jebiso duriddii sharciga, kharajka ku baxay waxaa bixinaaya dhinacii hindisaha duridda maxkammadda dastuurka hor-geeyay.

Qodobka 96aad: Dib-u-eegista & Ka Warbixinta Qoraalada Sharciyada Qabyada Ah

Marka sharci qabyo ah Golaha shacabku u soo gudbiyo gudi, Guddigaasi waa inuu dib u eegis ugu sameeyaa sharcigaa qabyada ah, sida soo socota:

- 1) Gudigu waa inuu casuumaa cidda soo gudbisay sharciga qabyada ah, si uu ugu sharraxo ugana jawaabo su'aalaha ay ka qabaan.

- 2) Haddii cidda keentay sharciga qabyada ah aysan ahayn wasaarad, gudigu waa inuu marti-qaadaa wasiirka sharciga shaqada ku leh ama hay'adaha ay arrintu khuseyso si ay uga dhiibtaan fikirkooda.
- 3) Gudigu waxaa uu yeelan karaa kulamo uu dhageysigooda ka soo qayb galiyo dadweyne isugu jira khubaro, ururada dadweynaha, dad wakiil ka ah bulshada rayidka ah iyo shakhsiyaadkii kale ee keeni kara warbixino la xiriira sharcigaa qabyada ah.
- 4) Ka dib marka uu dhageysto xogta saraakiisha dawaladda iyo marqaatiyaasha kale, gudigu waa inuu u dib u eegis ugu sameyaa sharcigaas qabyada ah qodob qodob.
- 5) Marka gudigu gaba-gabeeyo dib u eegistiisa qodob-qodobka ah, uuna go'aamiyo isbeddello lagu samaynayo sharciga qabyada ah ee loo soo gudbiyay, waa inuu wargeliyo wasiirka shaqada ku leh ama ha'yadaha ay arrintu khuseyso, uuna raadiyo fikirkooda ku aadan isbadallada lagu sameeyey sharciga qabayada ah.
- 6) Ka dib marka gudigu gaba-gabeeyo shaqada ku xusan faqradaha kore (1-5), waxaa gudigu war-bixinta oo qoran u gudbinayaa Golaha Shacabka, ayadoo ay la socoto wixii la badalay ama haddii aan wax laga baddelin. Golaha Shacabka dhexdiisa, warbixinta waxaa xoojiya hadal ahaan Guddoomiyaha Guddiga ama xubin kamid ah Guddiga oo uu asagu u xilsaarto.

- 7) Warbixinta ku saabsan sharciga qabyada ah, waa in lagu soo bandhigo isbadallo cayiman oo sabab loo yeelayo, kuwaasoo Golaha Shacabka uu go'aan uga gaaro kulankiisa xilliga warbixinta.
- 8) Gudigu waxaa uu xaq u leeyahay inuu u soo jeediyoo Golaha, diidmada sharci qabyo ah, asagoo soo bandhigaya cadaymo la xiriira sababta uu u diidayo.
- 9) Xoghayaha Guddiga waa inuu ku wargaliyaa wasiirka shaqada ku leh ama ha'ayadaha arrintu khuseyso, waqtiga laga doodayo, sharciga qabyada ah ee uu Golaha Shacabka u soo gudbiyey.

Qodobka 97aad: Nidaamka Isu Gudbinta Hindise-Sharchiyeedyada ee Labada Aqal²⁰⁵

Marka labada aqal isu gudbinayaan Hindise-Sharchiyeedyo, waxaa la marayaa habkaan.

- 1) Goluhu wuxuu raacaya isla habraaca seddex jeer akhrinta hindise-sharchiyeedka ee ku qoran xeer-hoosaadka.
- 2) Marka mid ka mid ah labada aqal uu waxka beddal ku sameeyo hindise-sharchiyeed kasoo gaaray aqal kale, waa in seddax (3) maalin shaqo gudahood dib loogu celiyo aqalka uu ka soo bilowday nuqulka waxka beddalka oo uu saxiihay Xoghayaha Guud, guddoomiyuhuna ku waafaqay.

²⁰⁵ Qodobka 97^{aad} “Nidaamka Isu Gudbinta Hindise Sharchiyeedyada ee labada aqal” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

- 3) Waxka beddalka hindise-sharchiyeedka kasoo billawday aqal kale, waa in loogu qaybiyaa xubnaha aqalka loo soo diray, seddax (3) maalin shaqo gudahood marka la keeno, waana in looga doodaa kulanka guud ee Golaha.
- 4) Ka doodista waxka beddalka hindise-sharchiyeedka kasoo billawday aqal kale, waa inuu ku billawdaa qaab soo-jeeedin (motion) ah.
- 5) Waxka beddal kasta oo lagu sameeyey hindise-sharchiyeed ka yimid aqal kale, waxaa akhrinaya Guddiga ay khuseyso, markaas ka dib ayaa goluhu aqbalayaa ama diidayaa.
- 6) Hindise sharchiyeed kasta oo loo gudbiyey aqal kale, waa in la xaqijiyyaa in nuqluka gaaray aqalka loo diray yahay nuqluka saxda ah.

Qodobka 98aad: Hindise-Sharchiyeed Loo Gudbinayo Aqalka Sare²⁰⁶

Hindise sharchiyeed ka baxaya Golaha Shacabka oo loo gudbinayo aqalka sare ee BFS, waxaa loo maraya habraaca ku xusan Qodobka 82^{aad} ee dastuurka.

Qodobka 99aad: Hindise Sharchiyeed Ka Yimid Aqalka Sare²⁰⁷

Hindise Sharchiyeed loo soo gudbinayo Golaha Shacabka oo ka yimid aqalka sare, ee BFS, waxaa loo maraya habraaca ku xusan Qodobka 83^{aad} ee dastuurka.

²⁰⁶ Qodobka 98^{aad} “Hindise Sharchiyeed Loo Gudbinayo Aqalka Sare” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

²⁰⁷ Qodobka 99^{aad} “Hindise Sharchiyeed ka yimid Aqalka Sare” waa qodob cusub. waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

CUTUBKA 9AAD: HABRAACA MIISAANIYADDA

Qodobka 100aad: Hab-raaca Loo Ansaxiyo Miisaaniyadda Federaalka

Xukuumadu waxay u soo gudbineysaa Golaha, qabyo qoraalka miisaaniyadda federaalka ee sanadka soo socda ugu dambeyn bisha Oktoobar 15-keeda ee sanad walba.

- 1) Xukuumadu waxay soo gudbineysaa faafaahin qoraal ah iyo qoraallada kale ee la-xariira qabyo qoraalka miisaaniyadda federaalka sida uu sharcigu farayo²⁰⁸.
- 2) Guddoomiyaha wuxuu u gudbinayaa xubnaha, qabyo qoraalka miisaaniyadda, qoraal faafaahinaya iyo wixii qoraallo kale ah ee la xariira, sida uu farayo sharciga iyo ogeysiinta furitaanka fadhiga lagu soo bandhigi doono²⁰⁹.
- 3) War-bixinta ku saabsan miisaaniyadda iyo qabyo-qoraalka miisaaniyadda ayuu wasiirka maaliyadda ka hor akhrinayaa fadhiga Golaha, mana looga doodayo fadhigaas.
- 4) Gudi kasta ama xubno aan ka yareen toban (10)-xildhibaan, ayaa Guddiga miisaaniyadda iyo maaliyadda u soo bandhigi karo soo jeedin wax ka baddel.

²⁰⁸ Qodobka 100^{aad} (2) ee “Habraaca loo Ansaxiyo Miisaaniyadda Federaalka” waxay u qornayd “Sidoo kale xukuumaddu waxay la soo gudbinaysaa qabyo qoraalka miisaaniyadda federaalka faahfaahin qoraal ah iyo qoraallada kale ee la xiriira qabyo qoraalka miisaaniyaddasida uu sharcigu qabo”. Waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

²⁰⁹ Qodobka 100^{aad} (3) ee “Habraaca Loo Ansaxiyo Miisaaniyadda Federaalka” waxay u qornayd “Guddoomiyaha wuxuu u gudbinayaa xubnaha qabyo qoraalka Miisaaniyadda, qoraal faafaahinaya miisanayidda iyo wixii qoraallo kale ah ee la xariira, sida uu farayo sharciga iyo ogeysiinta furitaanka fadhiga lagu soo bandhigi doono qabyo qoraalka miisaaniyadda federaalka & qoraalka faahfaahinayaba” waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad} kulankiisa 21^{aad} ee 3/11/2018

- 5) Wax ka badalka waxaa lagu soo gudbinaya qoraal uu la socdo faahfaahinta sababta keentay soo jeedinta wax-ka-baddelka.
- 6) Soo-jeediyayaasha wax ka badalka waa in ay is barbar dhigaan dhakhliga iyo kharashka miisaaniyadda.
- 7) Labaatan (20)-cisho gudahood soo bandhigida qabyo qoraalka miisaaniyadda ee uu sameynayo wasiirka maaliyaddu, Guddiga maaliyadda iyo miisaaniyadda waxaa uu mowqif ka qaadanayaa dhamaan qoraallada la hor-keenay Golaha, ee saameynaya wax ka badalkiisa, ka dibna diyaarinayaa warbixin uu u dirayo Guddoomiyaha si uu u tixgaliyo.
- 8) Guddiga miisaaniyadda iyo maaliyadda wuxuu qaban karaa dhageysi dadweyne ee miisaaniyadda, ka hor inta uusan gabagabeyn warbixintiisa ku saabsan sharciga qabyoqoraalka misaaniyada federaalka.
- 9) Soddon (30)-cisho gudahood, soo jeedinta wasiirka maaliyadda kadib, goluhu wuxuu ka doodayaa warbixinta Guddiga maaliyadda ee ku saabsan miisaaniyad sanadeedka. Xukuumaddu waxay go'aan ka qaadanaysaa dhammaan wax ka bedelada goluhu soo jeediyay, ka dibna waafajinaysaa qabyo-qoraal miisaaniyadeedka ay soo gudbisay oo isbedel lagu sameeyay, soona hordhigaysaa toban & shan (15)-casho gudahood.

- 10) Qabyo-qoraalka miisaaniyadda federaalka ee wax ka badalka lagu sameyey wuxuu noqonayaa nuqulka cusub ee miisaaniyadda, kaas oo xukuumaddu ay ku soo dartay wax ka-badalka ay ogoshahay, iyo kan ay u aragto lagama maarmaan. xukuumadda ayaa soo bandhigeysa warbixin faahfaahsan oo ay ku cadeyneysa qaabka ay u tixgalisay wax ka-badalkii goluhu soo jeediyay, iyo wax ka badalka dheeraadka ah ee ay ku sameysay qabyo-qoraalka miisaaniyadda.
- 11) Guddiga miisaaniyadda iyo maaliyadda ee goluhu, waxuu mowqif ka qaadanayaa qabyo qoraalka miisaaniyadda ee wax ka badalka lagu sameeyey, ka dibna warbixintiisa u soo gudbinayaa muddo aan ka badneyn todoba (7) maalmood, kadib marka uu helo qabyo-qoraalka wax ka-badalka lagu sameeyey ee miisaniyada.
- 12) Golaha ayaa ka doodaya kadibna u codeynaya qabyoqoraalka Miisaaniyadda Federaalka ee wax ka-badalka lagu sameeyey.
- 13) Haddii qabyo-qoraalka miisaaniyadda federaalka la ansixin waayo, golohu wuxuu xukuumadda u qabanayaa inay muddo soddon (30) casho gudhood ah, ku soo gudbiso qabyo qoraal miisaaniyadeed cusub.

- 14) Akhrinta koowaad ee qabyo qoraalka miisaaniyadda ka dib, gudiyada goluhu waxay dib uu eegis ku sameyanayaan miisaaniyad sanadeedka hay'adaha dawladda ee ay korjoogteyn ta shaqo ku leeyihii, iyagoo isu qiimaynaya miisaaniyadda iyo howlaha shaqo ee hay'adda u yaal sanadkaas, waxayna talo bixintooda ku soo celinayaan Guddiga maaliyadda ee Golaha Shacabka²¹⁰.

Qodobka 101aad: Hab-raaca Lagu Ansixinayo Kabid-Miisaaniyadeedka Federaalka & Wax-Ka-Bebalka Miisaaniyadda Federaalka

- 1) Dowladu waxaa aay soo jeedin kartaa Kabid miisaaniyadeedka Federaalka marka sanad miisaaniyadeedka lagu jiro uu dhexda marayo.
- 2) Qabyo qoraalka Kabid miisaaniyadeedka federaalka waxaa la galinayaajendaha fadhiga Golaha, haddii 10-mal mood fadhigaasi ka hore loo sii qeybiyay xubnaha.
- 3) Qodobbada ku saabsan wax ka badalka qabyo qoraalka miisaaniyadda, ayaa loo isitcmaalayaa hogaa minta waxka badalka qabyo qoraalka kabid misaaniyadeedka meesha ay iskaga midka yihii marka laga reebo waqtiyenta xadideysa soo jeedinta waxka badalka.
- 4) Wax-ka-beddel waxaa la soo jeedin karaa kama dambeyn sadax maalmood ka hor maalinka fadhiga Golaha²¹¹.

²¹⁰ Qodobka 100^{ad} (15) ee "Habraaca loo Ansixinayo Miisaaniyadda Federaalka" waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiisa 21^{ad} ee 3/11/2018

²¹¹ Qodobka 101^{ad} (4) ee "Habraaca Loo Ansixinayo Kabid & Wax ka badelka Miisaaniyadda JFS" waxaa lagasoo gooyey faqrada 3aad ee isla qodobkaan waxna lagama badelin. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad} kulankiisa 21^{ad} ee 3/11/2018

Qodobka 102aad: Habraaca Loo Ansixinayo Warbixinta Xisaab Xir-Sanadeedka Ku Saaban Miisaaniyadda Federaalka

- 1) Iyadoo uu caawinayo xisaabiyaha guud, xukuumaddu waxay soo diyaarineysaa warbixinta xisaabxir sanadeedka miisaaniyadda federaalka ee sanadkii la soo dhaafay. warbixinta waxaa la hor geynaya Golaha si uu uga doodo, una ansixyo ugu dambeyn 30-juun ee sanadka xiga²¹².
- 2) Guddoomiyaha wuxuu u gudbinayaa warbixinta xisaab xirk, Guddiga maaliyadda iyo xubnaha 15-maal mood ka hor inta uusan goluhu ka doodin.
- 3) Dooda ku saabsan warbixinta xisaab xirk waxaa loo kala qeybin karaa mid ku saabsan warbixinta guud iyo mid ku saabsan qeybo ka mid ah miisaaniyadda.
- 4) Marka la gabagabeeyo dooda warbixinta xisaab xirk, goluhu wuxuu u codeynaya warbixinta guud ahaan²¹³.

Qodobka 103aad: Madaxbannaanidda Qoondada Miisaaniyadeed ee Golaha Shacabka²¹⁴

Mas'uuliyadda Golaha Shacabka waxaa ka mid ah sharcidejinta, kor-joogteynta, la-xisaabtanka iyo u kuur-gelidda hay'adaha dowladda federaalka, haddaba:

²¹² Qodobka 102nd (1) ee "Habraaca Loo Ansixinayo Warbixinta Xisaab Xir Sanadeedka Kusaaban Miisaaniyadda Federaalka" waxay u qornayd "Iyadoo uu caawinayo xisaabiyaha guud, Xukuumaddu waxaa ay soo diyaarineysaa warbixinta xisaabxir sanadeedka Miisaaniyadda federaalka ee sanadkii la soo dhaafay. Warbixinta waxaa la hor geynaya si uu uga doodo, una ansixyo ugu dambeyn 30-Maarsro ee sanadka xiga". Waxaa loo badelay sida kor ku xusan Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd, kulanka 21nd ee 3/11/2018.

²¹³ Qodobka 102nd (4) ee "Habraaca Loo Ansixinayo Warbixinta Xisaab Xir Sanadeedka Kusaaban Miisaaniyadda Federaalka" waxaa laga soo gooyey Faqrada 3aad ee isla qodobkaan waxna lagama badelin. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd kulankisa 21nd ee 3/11/2018

²¹⁴ Qodobka 103nd "Madaxbannaanida Qoondada Miisaaniyadeed ee Golaha Shacabka" waa cusub yahay. waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4nd, kulanka 21nd ee 3/11/2018

- 1) Sida ku xusan dastuurka Qodobka 70^{aad} (5), xuquuqda iyo gunnooyinka xildhibaanada Golaha Shacabka waxaa lagu qoondeeyay miisaaniyadda qaranka lagana bixinayo khasnadda dhexe, iyadoo ka madaxbannaan xukuumadda.
- 2) Golaha shacabku si uu u guuto waajibaadkiisa dastuuriga ah, wasaaradda maaliyaddu waa in ay ku damaanad-qaadaa xeerka miisaaniyadda, madaxbannaanida miisaaniyadeed ee Golaha Shacabka.
- 3) Madaxbannaanida miisaaniyadeed iyo dhaqangelinta Qodobka 70^{aad} (5), ee dastuurka, Guddiga miisaaniyadda iyo maaliyadda ee Golaha Shacabka marka loo gudbiyo qabyo-qoraalka miisaaniyadda waa in uu hubiyaa inuu buuxiyo shuruudaha soo socda:
 - a) Waa in ay ku caddahay qeybta dakhliga miisaaniyadda qaranka ee ay ka imaaneyso miisaaniyadda Golaha Shacabka, si loo fuliyo faritaanka Qodobka 70^{aad} (5) ee dastuurka.
 - b) Waa in ay ku caddahay, in wasaaradda maaliyaddu qoondada miisaaniyadda bil walba toos ugu dhacayso koontada Golaha Shacabka.
- 4) Goluuh, haddii ay timaado xaalad ku xad-gudub xeerka miisaaniyadda ee goluhu ansixiyey, wuxuu qaadayaa talaabooyinka soo socda:

- a) Xoghayaha Guud, haddii wasaaradda maaliyaddu fulin weydo arrimaha ku cad; faqradiisa 3^{aad} (b), wuxuu qoraal u qorayaas Guddoomiyaha Golaha Shacabka & Guddiga maaliyadda, in lagu xad-gudbay hannaankii ku qeexnaa xeerka miisaaniyadda ee xaqijinta madaxbannaanida miisaaniyadeed ee Golaha.
- b) Guddoomiyaha goluhu wuxuu isugu yeerayaa wasiirka maaliyadda iyo Guddiga Golaha Shacabka ugu xilsaaran maaliyadda todoba (7) maalin shaqo gudahood.
- c) Guddiga miisaaniyadda iyo maaliyaddu waxay jawaab celin ku saabsan sababeynta ku xad-gudubka xeerka miisaaniyadda Golaha ka dhegeysanayaan wasiirka maaliyadda.
- d) Haddii sababeynta wasiirku noqoto mid maangal ah oo ka tarjumeysa xaaladda miisaaniyadeed ee qaranka, waxay gudigu warbixin qoraal ah u soo gudbinayaan Guddoomiyaha Golaha Shacabka oo ay ku caddahay jawaab celinta wasaaradda oo ay ku xaqijineyso fulinta faq. 3^{aad} (b) ee bisha xigta.
- e) Haddii wasiirka maaliyaddu u hoggaansami waayo u yeeridda, waxaa la raacayaa hannaanka ku cad xeerhoosaadka ee su'aal-wadareedka faq. 7^{aad}, si loogu diro digniin iyo canaan.
- f) Haddii ay sii socoto u hoggaansanaan la'aanta wasiirka, waxaa waajib ku ah Guddiga ugu xilsaaran Golaha Shacabka arrimaha miisaaniyada iyo maaliyaddu, in ay Golaha soo hordhigaan mooshin dib u eegis xilkiisa si waafaqsan Qodobka 69^{aad} (2) (c) ee dastuurka.
- g) Haddii ay wasaaradu fulin weydo madaxbannaanida qoondada xeerka miisaaniyadda ee ku aaddan faqrada. 3^{aad} (b) ee sare ku xusan, waxaa la raacayaa habraaca ku qeexan xarfaha (e & f) ee faqradaan.

Qodobka 104aad: Habraaca Ansixinta Miisaaniyad Sanadeedka Golaha Shacabka

- 1) Waxaa jiri doona Guddiga Adeegga Baarlamaanka, sida waafaqasan Qodobka 111(d) ee dastuurka, oo u xilsaaran soo diyaarinta qiyaasta miisaaniyad sanadeedka Golaha Shacabka.
- 2) Qiyaasta waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka si uu uga doodo una ansixiyo. Guddiga ayaa u xilsaaran gacan ku heynta howlaha maaliyadda ee Golaha.
- 3) Si uu u diyaariyo qiyaasta miisaaniyadda:
 - a) Xoghaya guud ee wuxuu u gudbinayaa Guddiga adeegga ku tala-gal miisaaniyad sanadeedka la xariirta; gunnooyinka xubnaha iyo mushaaraadka shaqaalahaa Golaha, ku tala galka kharashaadka gudiyada, howlaha Golaha, qalabka iyo dayactirka Golaha.
 - b) Guddiga Joogtada ah ayaa ansixinaya qiyaasta loogu tala galey gudiyada inta aanan loo gudbin Guddiga adeegga Golaha.
- 4) Inta laga dhisayo Guddiga Adeegga Baarlamaanka, Guddiga Joogtada ayaa howsha qabanaya.

CUTUBKA 10AAD: QODOBO GUUD

Qodobka 105aad: Guddiyadda Madaxbannaan

- 1) Sida ku cad Qodobka 69^{aad} iyo Qodobka 112^{aad} ee Dastuurka, haddii Ra'isul Wasaaraha ama Wasiirka ay khuseyso soo

jeediyo magacyada Guddiyada Madaxabannaan (Independent Commissions), Guddoomiyuhu wuxuu ku wargelinaya Golaha magacyada Guddiyada la soo jeediyey. Guddoomiyuhu wuxuuna soddon (30)-cisho gudahood, oo ka bilaabata taariikhda soo jeedintu soo gaartay Golaha ku soo qaban-qaabinaya fadhiga looga doodayo, oo laguna ansixinayo ama lagu diidayo magacyadaas.

- 2) Ansixinta kadib, magacyada waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Soomaaliya siii uu xeer uga soo saaro.
- 3) Goluuhu wuxuu u yeeri karaa Guddoomiyayaasha Guddiyada Madaxabannaan iyo xafiisyada. Golaha Shacabku wuxuu awood u leeyahay in uu dib-u-eegis ku sameeyo xilka mas'uul kasta oo jawaab celin sameyn waaya marka uu goluhu u yeero.
- 4) Warbixinta Guddiyada Madaxabannaan waxaa hagaya sharciyada dhisaya gudiyadaas.
- 5) Guddiyada Golaha shacabku wuxay mas'uul ka yahiin dib u eegista warbixinada Guddiyada Madaxabannaan waqtii kasta, kuwaasoo warbixintooda u gudbinayo Golaha Shacabka.
- 6) Ugu yaraan sanadkiiba mar, Guddiyada Madaxbannaan waa in ay warbixinta howlahooda qoraal iyo bandhigis oraa ahba ugu soo gudbiyaan Golaha Shacabka.

Qodobka 106aad: Guddiyada Wadajirka ah²¹⁵

Dhismaha & hagidda Guddiyada Wadajirka ah ee labada gole ee Baarlamaanka, waxaa loo marayaa sida ku cad Qodobbada (62, 81(3) iyo 83 (7) ee Dastuurka.

Qodobka 107aad: Dhismaha Guddiga Wadajirka ah ee Wax-ka-baddelka Dastuurka²¹⁶

Sida ku cad Qodobka 133^{aad} (2), xarafka (a), aqal kasta oo Baarlamaanka JFS, ka tirsan wuxuu dooranaya Shan (5) ka mid ah xubniiisa inay ka mid noqdaan Guddiga La-socodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka.

Qodobka 108aad: Curinta Wax-ka-Beddalka Dastuurka²¹⁷

Curinta wax-ka-baddelka Dastuurka KMG, ee JFS, golayaasha baarlamaanku waxay u marayaan habraaca ku xusan Cutubka 15^{aad} ee Dastuurka KMG, Qodobka 132^{aad}.

Qodobka 109aad: Howlaha Guddiga Wadajirka ah ee Wax-Ka-Baddelka Dastuurka²¹⁸

Howlaha Guddiga wadajirka ah ee wax-ka-baddelka Dastuurka KMG, waxaa la waafaqayaa habraaca ku xusan Qodobka 132^{aad} ee Dastuurka.

²¹⁵ Qodobka 106^{aad} “Gudiyada Wadajirka ah” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

²¹⁶ Qodobka 107^{aad} “Dhismaha Guddiga wadajirka ah ee Wax-ka-badelka Dastuurka” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

²¹⁷ Qodobka 108^{aad} “Curinta Waxkabadelka Dastuurka”. Waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

²¹⁸ Qodobka 109^{aad} “Howlaha Guddiga wadajirka ah ee waxkabadelka Dastuurka” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

Qodobka 110aad: Ansixinta Heshiisyada Caalamiga Ah²¹⁹

- 1) Heshiis caalami ah waa heshiis qoraal ah oo u dhaxeeya wadamada iyo hay'adaha caalamiga laguna maamulo shuruucda caalamiga ah. Heshiisyada laba geesoodka ahi kuma jiraan arrimaha looga hadlayo qodobkaan.
- 2) Heshiis kasta oo caalami ah waa in lagu soo tarjumaa luqadda soomaaliga isla markaasna lagu soo lifaaqaa nuqulka asalka ah, intaan Golaha Shacabka la hor-keenin.
- 3) Golaha wasiirada waa in ay u soo gudbiyaan Golaha Shacabka heshiisyada caalamiga ah si loo ansixiyo.
- 4) Marka heshiiska loo soo gudbiyo Golaha, waa in loo gudbiyaa Guddiga arrimaha dibada, isagoo caawinaad ka raadsadsanaya Guddiga ay khuseyso shaqadaasi.
- 5) Gudigu waa inuu u dersaa heshiiska faqro faqro, uuna ka diyaariyo talo-bixin ah in la ansixiyo ama la diido. Talo-bixinta waxaa ku jiri karta ka taxadarid (reservation) ku saabsan qodobo ka mid ah heshiiska. Wax-kabedel heshiiska laguma talin karo.
- 6) Gudigu waa in uu u soo gudbiyaa talo-bixintiisa Golaha. Arrinta waxaa loo mudeynaa akhrin labaad, kadib Golaha Shacabka aaya ka doodaya talo-bixinta iyo faqrooyinka heshiiska kadibna u codeynaya in talobixinta heshiiska la ansixiyo ama la diido. Inta lagu guda jiro akhrinta labaad talo-bixinta wax waa laga bedeli karaa balse heshiiska wax ma laga bedeli karo.

²¹⁹ Qodobka 110^{aad} “Ansixinta Heshiisyada Caalamiga ah” waa qodob cusub. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

- 7) Marka talo-bixinta heshiiska la ansixiyo waa in loo gudbiyaa akhrinta sedaxaad si ansixin kama dambays ah, si looga soo saaro qaraar.
- 8) Guddoomiyaha waa in uu ku wargeliya wasiirada qaraarka Golaha Shacabka.

Qodobka 111aad: Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka

- 1) Xeer-hooosaadka Golaha Shacabka waxuu dhaqan galayaa kadib ansixinta cod aqlabiyyad (50%+1) ee xubnaha, ayna saxiixaan Guddoomiyaha Golaha iyo Ku-xigeennadiisa²²⁰.
- 2) Xeerhoosaadka Golaha Shacabka wuxuu leeyahay awood sharci oo dastuuri ah sida ku cad Qodobka 68^{aad} ee dastuurka²²¹.

Qodobka 112aad: Wax-ka-bedddel Xeer-Hoosaadka Golaha

- 1) Xeer-hoosaadka waxaa wax-ka-beddel lagu sameyn karaa, kadib markii ay mooshin soo jeeediyaan ugu yaraan toban (10)-Xildhibaan, ayna ku taageeraan cod aqlabiyyad ah (50%+1) tirada guud xubnaha Golaha²²².

²²⁰ Qodobka 111^{aad} (1) ee “Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka” waxay u qornayd “Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka waxuu dhaqan gelayaa ka dib ansixinta cod aqlabiyyad 2/3 ee xubnaha Golahaunuma saxiixay Guddoomiyaha Golaha shacabka”. Waxaa loo badelay sida ku xusan kor. Goluhu wuxuu ansixiyey kalfadhigii 3rd kulankuisii 19^{ad} ee 23/10/2013

²²¹ Qodobka 111^{aad} (2) ee “Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka” waa Faqradda 4^{ad} ee “Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka” oo xigasho dastuurka ah lagu daray. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 21^{ad} ee 3/11/2018

²²² Qodobka 112^{aad} (1) ee “Wax-ka-badelka Xeer-Hoosaadka Golaha” waxaa laga soo wareejiyey “Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka”. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{ad}, kulanka 21^{ad} ee 3/11/2018

- 2) Wax-ka-baddel laguma sameyn karo Qodob ka tirsan xeerkaan iyadoo lagu xallinayo howl taagan xilligaas ama cid gaar ah loogu daneynayo²²³.

Qodobka 113aad: Laalis

- 1) Qodob kasta oo ka tirsan Xeer-hoosaadkaan ee la xiriira hawlahaa ama hab-socodka fadhiyada ama guddi ka mid ah Golahan, waxa lagu laali karaa Qaraar ka soo baxa isla Golaha.
- 2) Laalis kasta oo ku saabsan Qodob ka mid ah Xeer-hoosaadkaan, waxay ku koobnaanaysaa oo keliya ujeedada tooska ah oo laalista la ansixiyay ku beegan.
- 3) Laalista qodobada Xeer Hoosaadka waxaa go'aamin kara aqlabiyyad sadax dalool labo (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha, haddii aysan ka hor imaaneyn faritaanada dastuurka²²⁴.
- 4) Natijjada ka dhalaneysa laalista xeerkaan ama qodob ka mid ah waa ineysan abuureyn dhibaato qaran ama saameyn ka baxsan howlahaa khaaska ah ee Golaha Shacabka²²⁵.

Qodobka 114aad: Reebhanaanta Hoos u Dhigista iyo Xaddidaadda Awoodda

Ma jiro sharci ama xeer dhaqan oo xadidi kara ama wax u dhimi kara Qodobbada Xeer Hoosaadkan²²⁶.

²²³ Qodobka 112^{aad} (2) ee "Wax-ka badelka Xeer-Hoosaadka Golaha" waa cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018

²²⁴ Qodobka 113^{aad} (3) ee "Laalis "waxaa laga soo wareejiyey "Xeer-Hoosaadka Golaha Shacabka". Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4aad, kulanka 21aad ee 3/11/2018

²²⁵ Qodobka 113aad (4) ee "Laalis" waa Cusub tahay. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4aad, kulanka 21aad ee 3/11/2018

²²⁶ Qodobka 114^{aad} "Reebhanaanta Hoos-U-Dhigista & Xaddidaadda Awoodda" waxay u qorneyd "ma jiro heshiis ama xeer dhaqan oo xadidi kara ama wax u dhimi kara qodobada Xeer-Hoosaadkaan. Waxaa loo badelay sida kor ku xusan. Goluhu wuxuu isla ogolaaday kalfadhiga 4^{aad}, kulanka 21^{aad} ee 3/11/2018.

